

لا إله إلا الله

"Kuwa ka fogaaday inay caabudaan Dhaaquut oo Allah u noqday waxaaa usugnaaday Bishaaro ee u bishaaree addoomadayda.!"
(39/ZUMER, 17)

# LAA'ILAAHAILLALLAH

## UJEEDADA ABUURKA

teuhid
BASIM YAYIN

لا إله إلا الله محمد رسول الله

# LAA'ILAAHAILLALLAH


**Halis BAYANCUK**
**(Abuu Xandala)**


"Waxaa hubaal ah inaan u soo dirnay ummad kasta Rasuul inuu gaarsiiyo farriinta ah: Caabuda Alla Dha-aqutna ka fogaada ..."
(16/Naxl, 36)


teuhid
BASIM YAYIN

www.tevhidkitap.net
www.tevhidmeali.com
www.tevhiddersleri.org
www.tevhiddergisi.org
tevhiddergisi@gmail.com

# LAA'ILAAHAILLALLAH

## Halis BAYANCUK
## (Abuu Xandala)

**Diyaarinta Farsamada:** **Habaynta iyo Tixidda**
Tevhid Basım Yayın, 42546
**Sixitaan**
Tevhid Basım Yayın, 42546

**Daabacaadda:** **Goobta lagu daabacay:**
İmak Ofset - 71320
Akçaburgaz Mah. 137. Sok. No. 12
Esenyurt/İSTANBUL

**ISBN:** 978-605-71764-6-2

**Isgaarsiinta:** **Iimayl**
tevhiddergisi@gmail.com
**Taleefanka**
+90 545 762 15 15
**Boostada**
P.K. 51 Güneşli Merkez PTT
Bağcılar/İstanbul
**Xafiiska Guud**
Güneşli Mah. 1332. Sok. No. 1 34212
Bağcılar/İstanbul

**Goobaha lagu iibiyo: Tevhid Kitabevi**

İstanbul : Güneşli Mah. 1332. Sok. No. 1 34212 Bağcılar/İSTANBUL 0 545 762 15 15
Konya : Mengene Mah. Büyük Kumköprü Cad. No. 78/A 42020 Karatay/KONYA 0 543 225 50 49
Bursa : Bağlarbaşı Mah. 1. Hürriyet Cad. 1. Sedir Sok. No. 1 16160 Osmangazi/BURSA 0 543 225 50 46
İnegöl : Sinanbey Mah. Baykut Sok. No. 1 16400 İnegöl/BURSA 0 543 225 50 16
Ankara : Piyade Mah. İstasyon Cad. No. 190 06794 Etimesgut/ANKARA 0 543 225 50 48
Adana : Reşatbey Mah. 62008. Sok. No. 10 İşyeri-2 01120 Seyhan/ADANA 0 555 655 00 70
Kırıkkale : Yenişehir Mah. Özbek Saran Sok. No. 3/A 71450 Yahşihan/KIRIKKALE 0 536 391 76 60
Şanlıurfa : Paşabağı Mah. Zafer Cad. Aydınlar A Blok No. 42/C, 63040 Haliliye/ŞANLIURFA 0 544 978 00 63
Diyarbakır : Mezopotamya Mah. 327. Sok. Şeval Kent Sitesi A Blok No. 1/A 21070 Kayapınar/DİYARBAKIR 0 543 225 50 43
Van : Vali Mithat Bey Mah. Gündüz 2. Sok. No. 2/A 65100 İpekyolu/VAN 0 543 225 50 45
Erciş : Kışla Mah. Şehitler Cad. No. 10 65400 Erciş/VAN 0 543 225 50 30

# TUSMADA BUUGGA


**KHUDBATUL XAAJAH** . . . . . . . . . . 7

**HORDHAC/GOGOLDHİG** . . . . . . . . . . 9

**MAXAAN UGU HADLAYNAA KELİMA TAWXİID?** . . . . . . . . . . 13

I. Kelmeddaani waa dacwada guud ee Nebiyada oo dhan . . . . . . . . . . 13

II. Micnaha kelmeddaani iyo Ujeeddada lanoo abuuray waa isku mid 27

III. Farqiga inoo dhexeeya annaga iyo kuwii hore ee kelmeddaan yiri. 30

IV. Muhiimmada kelmeddaani ay ku sallaysan tahay . . . . . . . . . . 35

**MİCNAHA KELİME TAWXİID** . . . . . . . . . . 41

I. Waa maxay micnaha Ilaah iyo Cibaado? . . . . . . . . . . 42

II. Quraanka Kariimka ahi İyo Cibaadada . . . . . . . . . . 45

A. In la siiyo awoodda Xukunka kuwa kale waa Cibaado . . . . . . . . . . 45

B. Ducadu waa cibaado . . . . . . . . . . 50

C. Addeecida buuxda waa Cibaado . . . . . . . . . . 52

III. Micnaha ballaadhan ee Kelime Tawxiid . . . . . . . . . . 55

A. Waa maxay micnaha Ilaah? . . . . . . . . . . 55

B. Muxuu Alla u yahay macbuudka Keliya? . . . . . . . . . . 58

Waxa daliil u ah Alla inuu yahay Ilaaha keliya . . . . . . . . . . 58

C. Tafaafiisha ku saabsan ilaahnimada Alla ee Qur'aanka kariimka ah 62

D. Kuwa Kasoo Horjeesta ugu yeerida ilaaha keliga ah ee xaqa ah (Laa'ilaaha illallah) . . . . . . . . . . 68

IV. Sida Khaldan ee loo sharraxo kelime tawxiidka . . . . . . . . . . 74

**SHURUUDAHA KELİME TAWXİID** . . . . . . . . . . 79

I. I. In Lagu Gaaloobo Dhaaquut . . . . . . . . . . 83

A. Waa maxay Dhaaquut oo ah shardiga koo'waad ee kelime Tawxiidka oo aan la soo geli karin diinta iyadoon lagu Gaaloobin? . . . . . . . . . . 87

1. Dhaaquut waa kan naga jiidaya iftiinka waxyiga oo nagu riixaya mugdiga kufriga . . . . . . . . . . 92

a. Shaydaanka . . . . . . . . . . 93

Sidee Looga Soo Baxaa Mugdiyada? . . . . . . . . . . 95

Ka digtoonow Shayaadiinta Insiga ah! . . . . . . . . . . 97

b. Dimoqraadiyiinta ku baaqaya (Xisbiyada Siyaasadeed) . . . . . . . 98

c. Machadyada (Ururada) Bixiya Waxbarasho Kasoo Horjeeda Habka Islaamka . . . . . . . . . . 100

d. Diyanet . . . . . . . . . . 103

e. Telefishinka/Internetka/Shaashooyinka Dijitalka ah . . . . . . . . . . 106

f. Hawada, Rabitaanka iyo Shahwaadka (Damaca) Adduunka . . 110

2. Dhaaquut waa sharciyada aan kuwa Alla ahayn iyo kuwa sameeya Sharciyadaas . . . 113
a. Madaxda (Maamulayaasha) iyo Xubnaha Golaha Barlamaanka 115
b. Maxkamadaha Kufriga iyo shirkiga ah . . . 117
c. Caadooyinka, Dhaqanka iyo Diinta Awoowayaasha . . . 118
d. Caqliga Ka Baxsan Xadkiisa . . . 119
3. Dhaaquut waa waddo kastoo aan jidka Alla loogu dagaallamin iyo ciidamada loo dhisay ujeedadaas . . . 122
4. Dhaaquut waa wax kastoo Alla ka sokow la caabudo . . . 131
B. Sidee loogu Gaaloobaa Dhaaquut? . . . 132
1. Halgankii Ibraahim ee Dhaaquutka Ka Dhanka Ahaa . . . 134
a. In laga bari ahaado kuwa Caabuda Dhaaquut ee u adeega . . . 135
b. Ka fogaanshaha Dhaaquut . . . 136
c. In La Takfiireysiyo Dhaaquut iyo Addoomadiisa . . . 137
Waajibnimada ah in la Takfiireysiyo Dhaaquutka . . . 139
In la Takfiireysiyo Dhaaquut waa Shuruuda Kelime Tawxiidka/ Iimanka . . . 139
Si loogu bari noqdo Shirkiga waxaa lagama maaarmaan ah in la Takfiireysiyo Dhawaaqiinta . . . 141
In la Takfiireysiyo Dhaaquut; Waxay ka dhigan tahay In raalli lagu noqdo xukunka Alla iyo in la aqbalo magaca uu bixiyay . . . 142
Sida aan ula dhaqmi doonno Dhaaquut waxay ku xiran tahay xukunkiisa . . . 143
d. Nacayb iyo cadaawad weligeed ah . . . 150
2. Halgankii ficiliga Ahaa ee Ibraahim ee Dhawaaqiinta . . . 151
C. Kuwa Rumeeyey Dhaaquut . . . 153
II. In la yiraahdo Kelmeddaani iyadoo cilmi loo leeyahay . . . 154
A. Kelmedda Ashhaadka Waxay Tilmaamaysaa shardiga cilmiga ah 156
B. Aqoonta Tawxiidku waa fidhro . . . 157
C. Dadka Maanta Jooga Tawxiidka ayey ka Jeedsadeen . . . 162
III. Kelmeddaan In la Yiraahdo Iyadoo La Yaqiinsan yahay Oo Aan Shaki iyo Shubhaad ku jirin . . . 164
A. Maxaa Loo Baahan Yahay Si Aan Yaqiin Ugu Sugnaano? . . . 166
1. Barashada Cilmiga . . . 166
2. In La Kaalmeysto Alla . . . 167
3. In Laga Fogaado Ahlu Shakiga . . . 168
B. Waswaaska ma wax bay u dhimaan Kelime Tawxiidka? . . . 170
Maxaa Loo Baahan Yahay inaan sameeyno Marka Waswaasku Maskaxdeena Kusoo Dhaco? . . . 172

IV. In kelmeddan Loo Yiraahdo Si Daacadnimo (ikhlaasnimo) Iyo Run ah 175
İkhlaas . . . . . . . . . . 176
1. Ikhlaaska shirkiga ka daahiriya . . . . . . . . . . 177
2. Ikhlaaska Riyaaga/Damacyada xunxun ka daahiriya . . . . . . . . . . 179
3. Sideen ku ogaan karnaa inaan İkhlaas iyo Run ku sugan nahay 184
V. In La Jeclaado Ehelka kelmeddaan iyo In La Necbanaado Cadawgeeda 185
A. Jacaylka Alla . . . . . . . . . . 185
B. Jacaylka Rasuulka . . . . . . . . . . 187
C. Jaceylka Mu'miniinta . . . . . . . . . . 189
D. In la necbanaado Kuwa Cadawga Ku ah Kelmeddaan . . . . . . . . . . 190
E. Saaxiibtinimada La Mamnuucay . . . . . . . . . . 192
VI. Ku-dhaqanka Shuruudaha Kelmeddaan . . . . . . . . . . 195
VII. In lagu dhinto kelmeddaani (İyadoo lagu sugan yahay) . . . . . . . . . . 201
Maxaa loo baahan yahay in la sameeyo si loogu sugnaado Tawxiidka? 204
**TIXRAACA** . . . . . . . . . . 209

بِسْمِ اللّٰهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِيمِ

اِنَّ الْحَمْدَ لِلّٰهِ نَحْمَدُهُ وَنَسْتَعِينُهُ، وَنَسْتَغْفِرُهُ،
وَنَعُوذُ بِاللّٰهِ مِنْ شُرُورِ اَنْفُسِنَا، وَمِنْ سَيِّئَاتِ اَعْمَالِنَا، مَنْ
يَهْدِهِ اللّٰهُ فَلاَ مُضِلَّ لَهُ، وَمَنْ يُضْلِلْ فَلاَ هَادِيَ لَهُ،
وَاَشْهَدُ اَنْ لاَ اِلَهَ اِلاَّ اللّٰهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيكَ لَهُ،
وَاَشْهَدُ اَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ

﴿يَآ اَيُّهَا الَّذِينَ اٰمَنُوا اتَّقُوا اللّٰهَ حَقَّ تُقَاتِهٖ وَلَا تَمُوتُنَّ اِلَّا
وَاَنْتُمْ مُسْلِمُونَ ﴿١٠٢﴾﴾ اٰلُ عِمْرٰنَ/١٠٢

﴿يَآ اَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّكُمُ الَّذٖى خَلَقَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ
وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَّ مِنْهُمَا رِجَالًا كَثٖيرًا وَنِسَآءًۚ وَاتَّقُوا
اللّٰهَ الَّذٖى تَسَآءَلُونَ بِهٖ وَالْاَرْحَامَۜ اِنَّ اللّٰهَ كَانَ عَلَيْكُمْ
رَقٖيبًا ﴿١﴾﴾ النِّسَاءُ/١

﴿يَآ اَيُّهَا الَّذٖينَ اٰمَنُوا اتَّقُوا اللّٰهَ وَقُولُوا قَوْلًا سَدٖيدًاۙ
﴿٧٠﴾ يُصْلِحْ لَكُمْ اَعْمَالَكُمْ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْۜ وَمَنْ يُطِعِ اللّٰهَ
وَرَسُولَهُ فَقَدْ فَازَ فَوْزًا عَظٖيمًا ﴿٧١﴾﴾ الْاَحْزَابُ/٧٠-٧١

اَمَّا بَعْدُ فَاِنَّ خَيْرَ الْحَدِيثِ كِتَابُ اللّٰهِ، وَخَيْرَ الْهَدْيِ
هَدْيُ مُحَمَّدٍ، وَشَرَّ الاُمُورِ مُحْدَثَاتُهَا، وَكُلَّ مُحْدَثَةٍ
بِدْعَةٌ، وَكُلَّ بِدْعَةٍ ضَلاَلَةٌ، وَكُلَّ ضَلاَلَةٍ فِى النَّارِ

# KHUDBATUL XAAJAH

"Hubaal, Mahad oo dhan Allaah ayaa iska leh, isaga ayaanu u mahadinaynaa, isaga ayaanu waydiisanaynaa gargaar iyo dambi dhaaf. Waxaan Allaah ka magan galnay sharka nafteena iyo xumaanta camalkeena. Qof Allaah hanuuniyey cidna ma dhumin karo, cidduu dhumiyeyna qofna ma hanuun karo. Waxaan ka marag kacayaa inaan Allaah mooyee ilaah kale jirin. Isagu waa keligiis, lamana laha lammaane. Waxaan kaloo ka marag kacayaa in Muxammad yahay addoonkiisii iyo rasuulkiisii.

'Kuwa Xaqa rumeeyow ka dhawrsada Allah dhawrsashadiisa Xaqa ah, hana dhimanina idinkoon Muslim ahayn/ Adoomo ka tagay Shirkiga oo Allaah ula noqday Tawxiid.'[1]

'Dadow ka Dhawrsada Rabbigiin Idinka Abuuray Nafkaliya (Aadam) kana Abuuray xaggeeda Haweenaydeeda (Xaawo) kana Abuuraay Xagooda Rag Badan iyo Haweenba, ka Dhawrsada Rabbigiin aad wax isku Warsataan iyo Qaraabada, Allana wuxuu u Yahay Korkiina Ilaaliye.'[2]

'kuwa (xaqa) rumeeyoow ka dhawrsada Allaah hadal toosanna ku hadla. Haydiin wanaajiyo Camalkiinna hana idiin dhaafo Dambigiinee, Ruuxii Adeeca Allaah iyo Rasuulkiisa wuxuu u liibaanay dhab ahaan Liibaan weyn.'[3]

Intaa ka dib, waxaan shaki ku jirin in hadalka ugu wanaagsan uu yahay qawlkii Allaah, dariiqooyinka ugu wanaagsanna waa wadadii Muxammad. Waxyaalaha ugu xun waa kuwa dib laga allifay. Wax kasta oo dib laga allifay waa bidco, bidco kastaa waa baadil, baadil kastaa waxay ku jirtaa Naarta."[4]

1. 3/Âl-i İmrân, 102
2. 4/Nisâ, 1
3. 33/Ahzâb, 70-71
4. Muslim, 867; Nesai, 1578

# HORDHAC/GOGOLDHİG

"Laa'ilaaha illallah" waa dacwada guud ee rususha oo dhan.

Qoomamka u kala qaybisay Muslimiin iyo Gaalo…

"Laa'ilaaha illallah" waa midda go'aamisa aakhirka dadku, halka ay gaari doonaan adduun iyo aakhiroba.

Tani waa kelmedda bogga taariikhda ku jirta ee aabbe iyo wiilkiisa iska hor keentay…

Tani waa kelmeddii Nebi Nuux (cs) ku qaaday doontii badbaadada, oo wiilkiisana ku xukuntay mawjadaha cadaabka sita…

Tani waa kelmeddii Nebi Luud (cs) ka dhigtay mid ka mid ah kuwii badbaaday, oo ku soo dejisay dhagaxyo samada ka yimid madaxa xaaskiisa…

Tani waa kelmeddii Ibraahiim (cs) kasoo saartay geesinnimo uu ku yiraahdo Aabihii iyo Qoomkiisii: "İdinka iyo Aabayaashiin waxaad tihiin kuwa baadi ku sugan"…

Tani waa kelmedda reer binu Israa'iil ka badbaadisay Dhawaaqiintii waqtigaa, oo afartan sannadood cidlada ku dhex wareegaysay.

Kelmeddaani waa sababta dhammaan Dhawaaqiinta ay u dhibaatayn jireen Nebiyadooda…

In kastoo uu ahaa qofka loogu kalsoonida badnaa ee waagaas, haddana kelmeddaan ayaa ka dhigtay Rasulku inuu ku suntan yahay "abwaan, beenaale, waalan, kaahin iyo sixiroole".

Isagoo baayacmushtar iska ahaa, ayuu Rasuulku (scw) dadka ku yiri "waxaa la ii soo diray si ay bani'aadamka oo dhan u caabudaan Alla, oo aysan u shariik yeelin". Tani waa kelmedda ka dhigtay inuu sidaasi yiraahdo.

Tani waa kelmeddii addoonkii Bilaal (Allaha ha ka raalli noqdee) ka hadashisay, oo wajahisay Umayyah, oo madaxdii Maka ka mid ahaa… Waa Kelmeddii kulmisay Carabtii ku noolayd kala fogaanshiyaha iyo dullinimada, una soo saartay marxaladda taariikhda midnimo iyo sharaf…



Ka fikir kelmed insi iyo jinniba loo abuuray.

Ka fikir kelmed uu Alla (swt) u xilsaaray boqollaal kun oo Rasuul (cs) si ay u sheegan, si loo sheego, iyo si ay ugu noolaadan oo u noolaato darteed.

Ka fikir kelmed darteeda loo soo dejiyay Kutubta oo dhan.

Bal ka fikir kelmed darteeda deegaannadii looga baxay, saaxiibbadiina col noqdeen, oo seefna galka la iskula baxay.

Kelmeddaasi waa "Laa'ilaaha illallah".

Hadafkeenu waa: Si kelmeddaan loo fahmo, loo sharraxo, oo aan ugu wada noolaano.

Bilaa shaki la'aan: Fahamka kelmeddaan, ku noolaanshaheeda iyo ugu yeeridda dadka waa adeegga ugu weyn uguna sharafta badan.

Taasna waa dacwadii Rususha. Ruuxii jidkaas gala wuxuu dhaxallay Rususha, sidoo kalena waa askari geesi ah oo dacwada tawxiidka wada.

Si walba aan u ammaanno Alla (swt) waa mid aan filnayn, maxaa yeelay dacwada tawxiidka gargaarkiisa iyo fadligiisa awgeed ayay si xawli ah ugu fidaysaa. Kuwa ku baaqaya Tawxiidka, waxay la kulmayaan sarakicid cusub barakadiisa iyo nimcadiisa awgeed.

Dhawaaqiinta: Iyagoo ku dadaalaya fidinta shirkiga, bidcada iyo macsiyadda, haddana way ka hor istaagi la yihiin dadka u janjeersiga dhanka tawxiidka.

Dad lagu maaweelinaayay hurdo iyo shaki, been iyo khuraafaad: Waxay ku soo tooseen caddaymo sugan oo tawxiidka xaqa ah. Derbiyada beenta ah ee ka dhex dhismay fidhrada iyo tawxiidka ayaa mid mid loo duminaya, iyadoo ay caddayn cad u tahay tawxiidka sida qorraxda oo kale, taasi Alla (swt) ayaan ugu mahad naqeynaa.

Sababta risaaladaan loo qoray ayaa ah inaan Alla (swt) ku ammaanno/ ugu shukrino horumarkan quruxda badan iyo inaan sidoo kale ka jawaabno baaqa walaalaheena nagaga yimid.

Qaar ka mid ah walaalaheena waxay ka cabanayeen inaysan jirin risaalo sharraxayso "Laa'illaaha illallah", oo casharna laga dhigan karo. Waxa aanu go'aansannay inaanu qorno Kitaabkan, annaga oo ka dalbanaynaa inuu Allaha sare gacan naga siiyo. Si aynu dhammaanteen uga qayb qaadanno baaqa tawxiidka, uguna kaalmeyno walaalahaan wadadii ay dadka ugu yeeri lahaayeen. Waxaan isku daynay inaan siino af-carabiga aayadaha iyo axaadiista qaarkood ee ka hadlayaa mowduucyada qaarkood. Si loogu fududeeyo kuwa doonayaa inay xafidaan.

"… Ma rabo inaan idinka hor imaado anoo u hoggaansami waayay waxaan idinka reebay. Hadafka keliya ee aan leeyahay waa inaan islaaxiyo inta aan awoodo. Guushaydu waa idanka Alla uun. Isagaan tala saartay, isaga uun baan u noqdaa."[1]

---

1. 11/Huud, 88

# MAXAAN UGU HADLAYNAA KELİMA TAWXİİD?

Kitaabkeena Kuwa akhriya, waxaa laga yaabaa inay qabaan su'aashaan oo kale:

Waa maxay sababta "Laa'illaaha illallah"?

"Waxaan ku soo koobi karnaa sababaha keenay inaan ka hadalno, oo aan baarno kelmedda "Laa'ilaaha illallah" waa sidatan:



## I. Kelmeddaani waa dacwada guud ee Nebiyada oo dhan

Alla (swt) wuxuu yiri:

وَمَٓا اَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ مِنْ رَسُولٍ اِلَّا نُوحٖٓي اِلَيْهِ اَنَّهُ لَٓا اِلٰهَ اِلَّٓا اَنَا۬ فَاعْبُدُونِ

"Rasuul kasta oo aan dirray hortaa waxaan u waxyoonay İlaah kale (oo cibaadada xaq u leh) ma jiro aniga mooyee ee i caabuda."[1]

1. 21/Anbiyaa, 25

**Aayad kale wuxuu ku yiri:**

وَلَقَدْ بَعَثْنَا فٖى كُلِّ اُمَّةٍ رَسُولًا اَنِ اعْبُدُوا اللّٰهَ وَاجْتَنِبُوا الطَّاغُوتَۚ

"Waxaa hubaal ah inaan u soo dirnay ummad kasta Rasuul inuu gaarsiiyo farriinta ah: Caabuda Alla Dhaaqutna ka fogaada ..."[2] [3]

**Suuratul Acraaf ee ka hadasha taariikhda Nebiyada, ayaa dhammaan Nebiyada marka hore dadkooda ugu yeeray kelmeddaani:**

لَقَدْ اَرْسَلْنَا نُوحًا اِلٰى قَوْمِهٖ فَقَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللّٰهَ مَا لَكُمْ مِنْ اِلٰهٍ غَيْرُهُۜ اِنّٖى اَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ عَظٖيمٍ



"Waxaan dhab ahaan u dirnay (Nebi) Nuux qoomkiisii Wuxuu ku yiri: Qoomkayow! Caabuda/addeeca Alla. ILaahay idiinma sugna isaga mooyee (cibaado mudan). 'Waxaan idiinka cabsan korkiinna cadaabka maalintaas weyn.' "[4]

وَاِلٰى عَادٍ اَخَاهُمْ هُودًاۜ قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللّٰهَ مَا لَكُمْ مِنْ اِلٰهٍ غَيْرُهُۜ اَفَلَا تَتَّقُونَ

"Waxaan u Dirnay Caadna Walaalkood (Nebi) Huud wuxuuna ku yiri: Qoomkayow Caabuda Alla. ILaahay idiinma

2. 16/Naxl, 36
3. Sida aan ku arki doonno in Alla la caabudo, oo lagana fogaado Dhaaquut waa micnaha "Laa'ilaaha illallah."
4. 7/Acraaf, 59

sugna isaga mooyee (cibaado mudan). Miyeydaan Dhawr-sanayn.?' "[5]

وَاِلٰى ثَمُودَ اَخَاهُمْ صَالِحًاۢ قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللّٰهَ مَا لَكُمْ مِنْ اِلٰهٍ غَيْرُهُۜ

"Waxaan u Dirnay Thamuudna Walaalkood (Nebi) Saalax, wuxuuna ku yiri Qoomkayow Caabuda Alla. İLaahay idiinma sugna isaga mooyee (cibaado mudan) ...' "[6]

وَاِلٰى مَدْيَنَ اَخَاهُمْ شُعَيْبًاۜ قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللّٰهَ مَا لَكُمْ مِنْ اِلٰهٍ غَيْرُهُۜ

"Madyanna waxaan u Dirnay Walaalkood (Nebi) Shucayb wuxuuna ku yiri: Qoomkayow Caabuda Alla. ILaahay idiinma sugna isaga mooyee (cibaado mudan) ...' "[7]



Sida aan ka baranayno aayadaha Qur'aanka, Nebiyadu; In kastoo ay jireen falalka xunxun ee Alla (swt) reebay sida cabidda khamriga, sinada iyo khiyaameynta miisaanka, haddana qoomamkoodi waxay ugu yeereen, oo dacwadoodi ka bilaabeen kelmeddaani. Waxba ajandahoodu masoo gelin iyagoon tawxiidka ugu yeerin, waxna kamay hor marin tawxiidka.

Alla (swt) wuxuu Nebigeena (scw) faray sidatan:

اُولٰٓئِكَ الَّذٖينَ هَدَى اللّٰهُ فَبِهُدٰيهُمُ اقْتَدِهْۜ

5. 7/Acraaf, 65
6. 7/Acraaf, 73
7. 7/Acraaf, 85

"Kuwani waa dadkii Alla hanuuniyay ee Raac Jidkooda …"[8]

Rasuulka (scw) sida xaqiiqadu ay tahay, wuxuu raacay wadadii Nebiyadaas, oo ugu horrayn Qoomkiisi ugu yeeray "Laa'ilaaha illallah".

Rasuulku (scw) markuu dacwadii bilaabay, bulshada reer Maka waxay ku jireen xilligii jahliga ugu mugdiga badnaa. Ku dhawaad wax kastoo shareecada Islaamka anshax xumo lagu tix-geliyey, waxay ahaayeen wax ay ku faani jireen.

Tusaale ahaan Jaahilliga Carabta, dadku waxay u arkayeen cabidda khamriga iyo khamaarka inay yihiin wax sharaf leh, maxaa yeelay markii ay khamriga cabbaan, waxay noqon jireen kuwo aad ugu dhiirannaada, oo si fudud hantidoodu ugu qaybin kara dadka. Waxay ku andoocan jireen ujeeddada u khamaartamaan inay tahay "in loo qaybiyo lacagta khamaarka laga kasbado masaakiinta", sidaa darteed waxay cambaareen jireen taajiriinta aan ka qayb qaadan khamaartanka.



Maanta iyo waagii horeba, ku dhawaad dhammaan xiriirada loo yaqaan "tumashada" Xilligii Jaahilliga Carabta waxaa loo arki jiray inay yihiin nooc ka mid ah nikaaxa, oo loo tixgelin jiray wax caadi iska ah.

Hooyadeena Caa'isha (Allaha ka raalli noqdee) waxay ka hadlaysaa noocyadan nikaaxa ah:

"Waxaa jiray afar nooc oo nikaax ah xilligii jaahilliga:

---

8. 6/Ancaam, 90

Waxaa kuwaasi ka mid ah nikaaxa maanta ee dadka intoodu badan ku dhaqmaan, yacnii qofku wuxuu ka waydiiyaa qof gabadhiisa ama gabadha uu masuulka ka yahay, wuxuu siinayaa meher, kaddibna wuu guursadaa.

Qaabka kale ee nikaaxu wuxuu ahaa sidaan: Qofku, goortay naagtiisu ka daahirto caadada, wuxuu ku odhan jiray hebel u tag oo la galmood, naagtiisana qofkaas ayuu u diri jiray. Ninkeedu wuu ka fogaan jiray, oo wax xiriir ah lama yeelan jirin, ilaa laga ogaado inay naagtu uur u leedahay ninkaas. Markay caddaato inay ninkaas uur u leedahay, ninkeedu hadduu doono wuu u galmoon jiray. Nikaaxa noocan ah waxaa loo adeegsan jiray in lagu helo ilmo sharaf leh. Nikaaxan waxa lagu magacaabi jiray istibdaac.



Nooca kale ee nikaaxu wuxuu ahaa sidaan: Koox aan toban qof ka yarayn ayaa isu imaan jirtay, oo waxay u geli jireen gabadh, dhammaantoodna xiriir bay la samayn jireen. Haddii naagtu uur yeelato oo ay dhasho, waxay ku wargelin jirtay dhawr maalmood kaddib dhalmada oo ay u wada wici jirtay. Midkoodna ma diidi karin martiqaadkan, oo waxay u imaan jireen naagta. Naagtu waxay ku odhan jirtay, Hadda baan dhalay, oo hebel iyo hebel 'ilmaha adigaa leh,' oo waxay u nisbeyn jirtay ubadka cidda ay doonto. Qofkuna xaq uma lahayn inuu arrintaasi diido.

Nooca afarad ee nikaaxu wuxuu ahaa sidaan: Dad aad u tiro badan ayaa isu imaan jiray oo u soo geli jiray qof dumar ah. Naagtu ma aysan diidi karin mid ka

mid ah dadka yimid. Haweenkaasi waxay ahaayeen kowo jirkooda ka ganacsada. Si loo aqoonsado, albaabadooda ayay calamo suri jireen. Markii mid ka mid ah haweenkaas ay uur yeelato oo kaddibna ay dhasho, nimankaas ayaa isugu imaan jiray haweeneyda akteeda, waxaana loo yeeri jiray khabiiro la yiraahdo kaaifs. Haddii Kaaifisyaasha ay sheegaan mid iyaga ka mid ah inuu dhalay ilmahaan, waxaa lagu dari jiray nasabkiisa. Ilmihiina isaga ayaa loo nisbeyn jiray, oo waxa loogu yeeri jiray ubadkiisii. Taas oo aan qofkaasi diidi karin.

Goortii Maxamad (scw) xaqa lala soo diray, wuxuu meesha ka saaray dhammaan nikaaxyadii xilligii Jaahilliga, marka laga reebo nikaaxa ay dadku ku dhaqmaan maanta."[9]



Midda ugu muhiimsan ee na tusaysa dhiiqada jaahilligii Carabtu ku jirtay, waxay ahayd sida ay inanta ula dhaqmi jireen. Markii mid ka mid ah gabar loogu bishaareeyo, cadho darteed ayuu wajigiisa la madooban jiray, sida aayadduba sheegtay. Waxay isku dhiiri gelin jireen inay inantoodi ka takhallusaan, oo ay inantoodi nolol ku aasaan. Alla (swt) wuxuu ku sifeeyay falkii ay ku kaci jireen sidatan:

"Marka loogu bishaareeyo mid ka mid ah inanta (oo aanu ka waaban inuu Alla u nisbeeyo), wajigiisu wuu madooban, wuuna cadhoodaa. Wuxuu ka dhuuntaa bulshada (ceeb darteed) war xun oo soo gaaray darteed. (maskaxdiisu waa mid isku buuqsan) ma inantaas ma noolayn doonaa (uu aq-

9. Bukhaari, 5127

bali) bahdilaadda, mise dhulka ayuu ka hoos marin doonaa? waxaa xun waxay xukumi."[10]

Haddana, Carabtu waxay ku dawaafi jireen Kacbada iyagoo qaawan, oo ay taas u arkayeen inay fadli ku jirto. Sanad ka hor xajka waddaac, ayuu Rasuulku (scw) mamnuucay dawaafka noocan ah.

Waxaa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"Rasuulku (scw) waxaa uu amray Abuu Bakar (Allaha ka raalli noqdee) inuu noqdo amiirkii xajka ee xajka waddaac ka hor, maalintii ugu horraysay ee Ciidul Adxa, waxa uu yiri isaga oo koox la joogo 'iska jira!' Sanadkan kaddib, Mushrikiinta ma soo xajin karaan, mana la dawaafi doono iyadoo la qaawan yahay."[11]



Bulshada reer Maka, dadku ma haysan ammaan hanti iyo dhawrsanaanba, gaar ahaan kuwii kasoo jeeday qabiilada shisheeye ama aan qabiilkoodu xoog lahayn, ayaa si fudud loo cabudhi jiray, dadkuna waxay ku faani jireen arxan-darradaas iyo anshax-xummadaas. Xitaa si taas looga hortago, waxaa la dhisay koox lagu magacaabo"Xilfuul Fuduul" uu Rasuulka (scw) ka mid ahaa:

"Ganacsade Yemeni ah, oo kasoo jeeday qabiilka khathcam, ayaa isaga iyo gabadhiisa Maka u yimid si ay xajka u gutaan. Nubeyh ibni Xajaaj oo ka mid ahaa dadkii magaalada ugu xoogga badnaa ayaa gabadhiisa

10. 16/Naxl, 58-59
11. Bukhaari, 1622

xoog kaga kaxeystay, kaddibna ganacsadihii wuxuu u tagay Xilfuul Fuduul. Xubno ka mid ah Xilfulka ayaa isla markiiba isku gadaamay guriga Nubeyh, waxayna kasoo kaxeyeen inantii oo ay u soo celiyeen aabaheed."[12]

Iyadoo ay taasi jirto, haddana Rasuulkeenii (scw) wuxuu dadka marka hore ugu yeeray Tawxiidka ee ma ahayn akhlaaqda wanaagsan. Haddii ducaada maanta rabaan inay raacaan sunnaha Rasuulka (scw) iyo dacwada Nebiyada oo dhan, waa inay dacwadoodu ka bilaabaan halkii Nebiyada kasoo bilaabeen.

Dabcan dhagarta ugu weyn ee shaydaanku ayaa ah "Bulshadaani waa bulsho Muslimiin ah, oo uma baahna in loogu yeero kelmedda tawxiidka, hase yeeshee waxay u baahan yihiin in loo sheego akhlaaqda wanaagsan iyo hufidda ruuxda (ruuxda daahirinteeda) ..." Hadalladaasi oo kale waa kuwo xaqiiqda ka fog, Dadka fikirkaas oo kale qaba ma fahmin shirkigu waxa uu yahay ama waxay iska dhigaan inaysan fahmin oo kale ... Maxaa yeelay, tawxiidku waa lidka shirkiga. Haddii shirki meel ka jiro, waa in loogu yeero Tawxiid. Haddii bulshadu u shariik yeelayso Alla (swt), waxa keliya ee ay tahay in loogu yeero waa "Laa'ilaaha illallah".

Haddii aynu is barbar dhigno bulshadii Rasuulka (scw) loo soo diray iyo bulshada maanta, waxaa tusaale inoogu filan isu ekaanshiyaha labada bulsho ee ay ka midaysan yihiin:

12. Al-Bidâye wa'n Nihâye, 3/458

Bulshada loo soo diray Rasuulku, waxay gargaar weydiisan jireen taallada dadka ay ka aaminsanaayeen inay saalixiin yihiin. Bulshadeenna, waxa gargaar laga doonta xabaalaha iyo xabaalaha dadka laga rumaysan yahay inay saalixiin yihiin. Ma inay sanamyadii hore dhererkoodu dheer yihiin, sanamyada maantana ay balac dheer yihiin, ayaa falkaan ka dhigeynin mid shirki ah?

Bulshada Rasuulka (scw) loo soo diray, dadku waxay awood u siiyeen inay sharci u dejiyaan Daarun Nadwa, oo ah urur sharci dejineed. Bulshada aan ku dhex nool nahay ayaa awooddaan siisa Baarlamaanka. Waxaan la yaabanahay haddii mid ka mid ah uu yahay dhismo caarish ah, midna uu yahay dhismo casri ah; Ma awood u yeelashada sharci u dejinta in la siyo cid aan Alla (swt) ahayn ka saareysa mid Shirki ah?



Dadka bulshadaas; waxay aaminsanaayeen faaliyaasha iyo Saaxiriinta inay yaqaanaan waxa maqan, markay dhibaato wajahaan, dadkaan ayey u imaan jireen. Maanta, faaliyaasha, qaar ka mid ah dadka jinka saara iyo boggaga horoscope-ka wargeysyadu, waxay buuxiyaan baahidan. Haddii waxay sameeyeen uu ahaa shirki, dadka maanta jooga maxay samaynayaan?

Maalintaas, waxaa loo dagaallamayey qabyaalad iyo isir; Dadku waxay kasbanayeen saaxiibbo iyo col, iyadoo loo eegayo tilmaamaha qaarkood sida qabiilka, calanka, dhulkii hooyo… Ma ii sheegi kartaa ilaahaay dartiis maxaa is beddelay maanta? Malaayiin dad ah miyaanay u halgamayn ujeeddooyin aan micne lahayn

oo khuraafaad ah? Bulshooyinka aan u dhaqaaqeyn diinta Alla miyaanay isku dilaynin dhul iyo hal miitir oo maro ah?

Waxaan ku arki doonnaa tusaalooyin badan boggaga soo socda ee buugga. Annagoo tusaalooyinkaas ka duulayno waxaynu odhan karnaa: Inkastoo magacyada, deegaannada, qaababka … isbeddelaan, haddana bulshooyinku isma beddelaan shirkiga.

Marka xaalku sidaa iska yahay, maxaa diiday inaynu dacwadu ku bilowno Tawxiidka?

Mise waxaynu isku arkeynaa inaynu Rususha kaga aqoon badannahay howshaan, mise culeyska dacwadaan ayaa u muuqata mid ku culus iyaga?



Sababtay doontaba ha ahaatee, sababta aan loogu bilaabin dacwada tawxiidka … Hadday kuwa inoo yeeraya ka leexdaan wadadii rususha, oo ay ku dhaqmaan habka dacwada ee ay garanayaan, haddana inkastoo aanay wax farqi ah u dhexayn labada bulshadood, taasi waxay ka dhigan tahay khilaaf cad oo Nebiyada ka dhan ah iyo burinta (baabi'iinta) camalkooda:

فَلْيَحْذَرِ الَّذِينَ يُخَالِفُونَ عَنْ اَمْرِهٖٓ اَنْ تُصِيبَهُمْ فِتْنَةٌ
اَوْ يُصِيبَهُمْ عَذَابٌ اَلِيمٌ

"… ha ka Digtoonaadeen kuwa Khilaafa Amarka Nebiga inay ku Dhacdo Fidno (Masiibo) ama Cadaab Daran."[13]

13. 24/Nuur, 63

"In la khilaafo amarkii Nebigeena (scw): Waa in laga horyimaado jidkiisa iyo habkiisa, sunnahiisa iyo shareecadiisa. Hadal iyo falba waxa la hor dhigayaa hadalkiisa iyo camalkiisa. Ciddii u hoggaansata waa la aqbalayaa, ciddii u hoggaansami waydana waa la diidayaa."[14]

Sida la arki karo, kuwa khilaafay Rasuulka (scw), waxay la kulmaan khatar iyo hanjabaad weyn. Kuwa dacwadoodu aan la mid ahayn dacwadiisa ee ay mudnaantoodu ka duwan tahay mudnaantiisa, ajandayaashoodu aanay ahayn tawxiid sida isaga oo kale, isaga ayey khilaafeen, cidday doonaan ha noqdaan.

Khilaafkaas abaalkiisu waa fidno iyo cadaab daran. Waxaan ognahay inuu cadaabku yahay ciqaabta aakhiro. Fitnadu waa cadaab adduunyo. Waa hagaag; Ciddii dacwadoodu ka duwan tahay midda Rasuulka (scw), waxay la kulmi doonaan fidno adduunyo. Haddaba, waa maxay fidnadani? Salafka, Fitnadaan saddex micne ayey u nisbeeyeen oo kala ah: baadi, kufri iyo balaayo adduunka ku wajahi doonto.[15]



Haa, kuwa aan dacwadoodu u ekayn dacwadii Nebigeenna (scw), waxaa laga yaabaa inay baadiyoobaan, gaaloobaan, ama ay la kulmaan masiibo adduun.

Waxaa intaa dheer, in laga tago habka Rususha iyo in la hormariyo habab kale ee ku saabsan dacwada, waa balaayada ugu weyn iyo baadida ugu khatarta badan ee Alla (swt) uu ku ciqaabay addoon.

14. Tafsîru'l Kur'âni'l Azîm, 6/82, Tafsiirka Suuradda Nuur ee aayadda 63'aad.
15. eeg. Zâdu'l Masîr, 3/360, Tafsiirka Suuradda Nuur ee aayadda 63'aad.

Waxaan la yaabanahay sababta ducaada ay u khilaafayaan amarkii Rasuulka (scw)? Hadday Alla (swt) ka cabsan lahaayeen oo ay ogaan lahaayeen camalkii ay sameeyeen inaysan waxba u tarayn maalinta qiyaame. Maanta, shacabka ku jira shirkiga noociisa kala duwan, waxay isu moodayaan inay muslimiin yihiin ducaada baadiyoobay awgeed, oo ay ku sii dhex jiraan shirkiga.

Bulshada oo keliya loo sheegayo cibaadada ay ka mid yihiin weysada, salaadda iyo soonka, ama falalka xaaraanta ah sida cabidda khamriga, khamaarka iyo sinada, waxay la tahay bulshada inay dhibaatooyinkaas diineed oo keliya ay la kulmaan. Fikirka ah, "siday noqotaba, Ilaah ayaa mu'miniinta u dambi dhaafi doono." Wax dadaal ah kuma bixiyo inuu xaqa ku baadho. Waxaan xasuusineynaa kuwa aan tawxiidka dadka uga warmin ee ku mashquuliya arrimo labaad, aayaddan:



"(İnay yiraahdaan hadalkan waa) inay xambaarayaan culeyskooda «dambigooda» oo dhan Maalinta Qiyaame, iyo culeyska «dambiga» kuway dhumiyeen cilmi la'aan waxaana xun waxay xambaaranayaan."[16]

Waxaan jeclaan lahayn inaan mar kale ku xasuusinno tan: Xitaa rususha xaq uma laha inay kala doortaan markay timaado xagga fidinta diinta. Dacwada tawxiidka ayaa lagu soo dejiyay, waxaana la faray inay dadka gaarsiiyaan dacwada sida ay tahay:

"Rasuulow Gaarsii waxa lagaaga soo Dejiyey xagga Rabbigaaga (Dadka) Haddaadan Falin Ma'aadan Gaarsiin Risaal-

16. 16/Naxl, 25

lada «fariinta», Alla ayaa kaa ilaalin doonaa Dadka, Allana ma hanuuniyo Qoom Gaala ah."[17]

Gabagabadii; Haddaba si acmaasha Alla (scw) agtiisa ugu ansaxmaan, waa in si ikhlaasnimo ah loo guto, iyo waa in la waafajiyo sunnaha. Hadii kale acmaashaasi wax qiimo ah kama laha Alla agtiisa. Dacwadu sidoo kale waa camal. Si camalkaas loo aqbalo loogana abaal-mariyo qofka daaciga ah, waa inuu si ikhlaasnimo ah ku guto iyo habka dacwada u fidinayo ay waafaqsanaanto sunnaha.

Waxa laga soo weriyey Hooyadii mu'miniinta Caa'isha (Allaha ka raalli noqdee) inay tiri: wuxuu Rasuulkii Alla (scw) yiri:

"Qofkii amarkayagaan kusoo dara waxa aan ka mid ahayn isagaa lagu celinayaa."[18]



Nebiga (scw) markuu Mucaad (Allaha ka raalli noqdee) u diray Yaman isagoo daaci ah, wuxuu amray inuu dadka marka hore ugu yeero Tawxiidka.

Waxaa laga soo weriyey Ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"Markii Rasuulku (scw) u diray Mucaad Yaman isagoo (guddoomiye ah), wuxuu ku yiri: "Waxaad aadaysa meel ay dadkeedu Ahlu-kitaab yihiin. Marka hore ugu yeer inay Alla caabudaan. U sheeg markay Alla gartaan (aqbalaan inay caabudaan keligiis) uu Alla ku waajib yeelay inay tukadaan shan jeer maalintii. Markay sala-

17. 5/Maa'idah, 67
18. Bukhaari, 2697; Muslim, 1718

adda bilaabaan, u sheeg Alla inuu ku waajib yeelay inay xoolahooda sako ka bixiyaan, oo ay masaakiinta siiyaan. Hadday tani addeecaan ka qaad, laakiin ka digtoonow inaad qaadato waxa ugu wanaagsan ee hantida Dadka."[19]

Mucaad (Allaha ka raalli noqdee) isagoo daaci ah, wuxuu u tagay Yahuudda oo Ahlu-kitaab ah. Yahuuddu waxay aaminsan yihiin Alla (swt), waxayna aqbalaan mabda'a ah in isaga uun la caabudo, waxayna isu haystaan inay ka sareeyaan mushrikiinta, laakinsee xaqiiqda jirta, Alla ayey u shariik yeelan. Hagaag, sidee? Culimmadoodu wixii Alla xalaaleeyey xaaran wixii Alla xaaraantimeeyayna xalaal bay yiraahdeen, iyaguna way ku addeeceen. Rasuulku (scw) marka hore wuxuu farayaa in loogu yeero tawxiidka.



Taas micneheedu waa hadday bulshadu "Laailaaha illallah" qowl ahaan u tiraahdo, " Nebi iyo kitaabna raacdo, laakiin xaqiiqda ay Alla (swt) u shariik yeelayaan, kelmeddaasi ma ansaxayso, bulshadaasna waxaa loogu yeerayaa tawxiidka. Sababtoo ah in la yiraahdo "Laailaaha illallah", iyadoo Alla loo shariik yeelayo: acmaasha wax kale ma aha oo aan ka ahayn mid beeninaysa qowlka.

Annagoo caddaymahaas ka duulayna, waxaynu leenahay: Ducaada maanta ee garbaha saartay culayska gudbinta farriinta, waa inay marka hore eegaan habka dacweed ee Nebiga (scw), si aanay camalkoodu u burin. Ciddii baartana waxay si cad ah u arki doonaan in bi-

19. Bukhaari, 1458; Muslim, 19

lawgii ilaa dhammaadkii dacwadiisa aanu ka fogayn Tawxiidka. Markii ugu horreysay ee uu yimid, dacwada wuxuu ku bilaabay Tawxiidka, xitaa goortuu geeriyoonayey waxuu uga digay ummadiisa inay Qubuuraha ka dhigtaan Masaajid. Xitaa marka uu geeriyoonayo kamuu dayn inuu ummadiisa u sheego aasaaska tawxiidka.

## II. Micnaha kelmeddaani iyo Ujeeddada lanoo abuuray waa isku mid

Sababta kale ee aynu mudnaanta koo'waad u siinayno ayaa ah; inay kelmeddaani sharraxayso ujeeddada lanoo abuuray, taasoo ah tawxiidka, oo ah ujeeddada lanoo abuuray. Haddaba, waa maxay ujeeddada lanoo abuuray? Waa in Alla (swt) lagu mideeyo cibaadada, yacni tawxiid.



وَمَا خَلَقْتُ الْجِنَّ وَالْاِنْسَ اِلَّا لِيَعْبُدُونِ

"Waxaan u abuuray Jinni iyo insi inay i caabudaan uun."[20]

Hagaag, waa maxay micnaha Kelime Tawxiid? Ilaah ahaan, waa in Alla lagu mideeyo cibaadada.

Si'aan u fahamno xiriirka ka dhaxeeya Kelime Tawxiid iyo cibaado, marka hore waxaynu u baahannahay inaan fahamno qodobka ah "Ilaah".

Alla (swt) wuxuu yiri:

وَمَٓا اَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ مِنْ رَسُولٍ اِلَّا نُوحٖٓى اِلَيْهِ اَنَّهُ
لَٓا اِلٰهَ اِلَّٓا اَنَا فَاعْبُدُونِ

20. 51/Daariyaat, 56

"Rasuul kasta oo aan dirray hortaa waxaan u waxyoonay İlaah kale (oo cibaadada xaq u leh) ma jiro aniga mooyee ee i caabuda."[21]

Gortuu Rabbigeen caddeeyey inaan isaga mooyee ilaah kale jirin, wuxuu yiri: "Haddaba anniga keligay i caabuda".

Tani waxay ku tusinaysaa in ilaah loola jeedo "cidda la caabudo".

وَاتَّخَذُوا مِنْ دُونِ اللّٰهِ اٰلِهَةً لِيَكُونُوا لَهُمْ عِزًّاۙ كَلَّاۜ سَيَكْفُرُونَ بِعِبَادَتِهِمْ وَيَكُونُونَ عَلَيْهِمْ ضِدًّاࣖ

"Waxay yeesheen Alla ka sokow ilaahyo si ay ugu noqdaan cizzi (awood). saas ma aha ee (maalinta qiyaamaha) waxay inkirayaan cibaadadooda, waxayna ku noqon korkooda lid (col)."[22]



Haddii loo fiirsado waxaa marka hore aayadda ku sugan inay yeesheen Alla (swt) ka sokow İlaahyo, kaddibna waxaa lagu sheegay inay inkirayaan ilaahyadan beenta ah cibaadadooda. Taasina waxay ku tusinaysaa in İlaah loola jeedo "cidda la caabudo".

Haddaba, ujeeddada lanoo abuuray ee ah; inaan caabudno Alla (swt) oo keliya iyo micnaha Kelime Tawxiidku waa isku mid. Labadaba nuxurkoodu waa in Alla (swt) cibaadada lagu mideeyo.

21. 21/Anbiyaa, 25
22. 19/Maryama, 81-82

"Laa'ilaaaha illallah" oo ah in Alla cibaadada lagu mideeyo, waa xaq uu Alla Subxaanahuu watacaalaa ku leeyahay addoomadiisa.

Waxaa laga soo weriyey Mucaad ibnu Jabal (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"Mar waxaan fuulay gaarigii Rasuulka (scw). Anniga iyo isaga waxba nooma dhexayn oon ahayn geedka kooraska gadaasha ku yaal.

Rasuulku (scw) ayaa ku dhawaaqay "Mucaadoow!

Waxaan ku yiri: Haa Rasuulkii Allow! 'Diyaar baan u ahay amarkaaga.'

Kaddibna in cabaar ah ayuu socodkiisii sii watay.

Wuxuu ka daba dhawaaqay oo yiri "Mucaadoow".

Waxaan ku yiri: Haa Rasuulkii Allow! 'Waxaan sugayaa amarkaaga.'

Kaddibna in cabbaar ah ayuu socodkiisa sii watay.

Wuxuu ka daba dhawaaqay oo yiri "Mucaadoow".

Waxaan ku yiri: Haa Rasuulkii Allow! 'Waan sugayaa amarkaaga'.

Wuxuu yiri (scw) ma ogtahay xaqa Alla ku leeyahay addoomadiisa?

Waxaan ku yiri Alla iyo Rasuulkiisa ayaa yaqaan.

Nebigu (scw) wuxuu yiri: Xaqa Alla ku leeyahay addoomadiisa waa inay caabudaan isaga oon waxba la

wadaajin.'

Kaddibna in cabbaar ah ayuu sii socday.

Kaddibna wuxuu ku dhawaaqay: Mucaad ibni Jabaloow!

Waxaan ku yiri: Haa Rasuulkii Allow! 'Waxaan sugayaa amarkaaga.'

Rasuulku (scw) wuxuu yiri: "Hagaag, ma garanaysaa xaqa addoomadu ku leeyihin Alla hadday sidaas sameeyaan?

Waxaan ku yiri Alla iyo Rasuulkiisa ayaa ugu aqoon badan.

Nebiguna (scw) wuxuu yiri (haddii ay sidaas tahay) xaqa ay addoomadu ku leeyihiin Alla waa inaanu (Alla) cadaabin iyaga."[23]



"Ka hadalida "Laa'illaaha illallah" waxay la micno tahay ka hadalida tawxiidka ee ah xaq Alla (swt) nagu leeyahay, yacnii in isaga uun la caabudo oo aan loo shariik yeelin. Waxa la rajaynayaa u hoggaansanaanta xaqa Alla inay innaga badbaadiso cadaabkiisa.

## III. Farqiga inoo dhexeeya annaga iyo kuwii hore ee kelmeddaan yiri.

Dadkii hore ee ku dhawaaqay kelmeddaan gabi ahaanba way is beddeleen, oo waxay isu dhiibeen Alla (swt), iyagoo ka daahiray dhammaan wasakhdii jaahiliga ahayd.

23. Bukhaari, 5967; Muslim, 30

Dadkii hore ee ku dhawaaqay kelmaddaan, waxay ahaayeen kuwo ku kacay dhawaaqiintii waagaas, waxayna qalbigooda ka dareemayeen xamaasad aan kala joogsi lahayn.

Kelmeddaani, waxay beddeshay aragtidoodii ku aadan nolosha oo ay siisay arakti cusub.

Dad u noolaa, oo u dhimanaayey dano qabiil oo fudud, waxay noqdeen kuwa u nool, oo u dhimanaaya Alla (swt) dartiis, kaddib markii ay kelmeddaan yiraahdeen. Waxa ay xiriir kasta ka qaddarinayeen walaalnimada iimaanka oo ay ka sarreeysiyeen, oo waxa ay ka daahireen dhammaan noocyada cadowtinnimo. Dadkii ku tartamayey anshax-xummada, waxay isu beddeleen hormuudka akhlaaqda iyo wanaagga, kaddib markay kelmeddaan yiraahdeen.



Dadkaas oo ilo-dhaqaale u ahayd inay bulshada cabburiyaan, dhacaan, oo dulsaar ku sameeyaan, kelmeddaas kaddib, wixii ay haysteen waxay ku bixinayeen jidka Alla (swt).

Saaxiriintii Fircoon waxay ahaayeen: Kuwo adduunyo uun raadsada oo u nool laba shilin ee ay ka qaadan jireen dhaaqutkii waagaas, kaddib markii ay kelmeddaas yiraahdeen, waxay gaareen heer ay ku kacaan Fircoon.

Xaaladooda ka hor inta aanay rumayn, waxa Qur'aanka lagu sheegay sidaan:

"Waxay u yimaadeen Saaxiriintii Fircoon, waxayna ku dhaheen: Haddaan ka adkaanno (Nebi Muuse) waxaad na siinaysaa

Ajri buuxa, soow ma'aha? Wuxuu yiri: Haa, (haddii aad ka adkaatan) waxaadna noqonaysaan kuwa la ii soo Dhaweeyo."[24]

### Way Rumeeyeen…

"Sixiroolayaashiina way sujuudeen (waxa ay arkeen darteed). Waxayna dheheen waxaan rumaynay Rabbiga Caalamka. (Allaha ah) "Rabbiga Muuse iyo Haaruun.' "[25]

### Fircoon wuxuu bilaabay hanjabaad…

"Wuxuuna yiri Fircoon Miyaad rumeyseen Muuse, Idan ka hor, Arrintaani waa Dhagar aad ku Dhagarteen si aad uga Bixisaan magaalada Dadkeeda, dhawaan ayaad ogaan doontaan/fahmi doontaan (waxa aan samayn doono). Hubaal, waxaan u gooyn Gacmihiinna iyo Lugahiinna isdhaaf waana idin daldali Dhamaantiin.' "[26]



### Kaddib markii ay rumeeyeen…

"Waxayna dheheen: 'Waxaan u noqonaynaa xagga Rabbigeena. Sababta keliya ee aad naga aargudanneyso waa inaan rumaynay aayaadka Rabbigeen marka ay noo yimaadaan. Rabbiyow! samir nagu soo deji oo nafteena naga saar annagoo Muslimiin ah (oo naga yeel addoomo shirkiga ka tagay oo Alla ula noqda tawxiid).' "[27]

"Waxay dhaheen ka dooran meyno waxa noo yimid oo xujo ah iyo Rabbigeen na abuuray, ee xukmi waxaad xukumi, waxaad uun xukumi nolosha adduunyo.' "[28]

24. 7/Acraaf, 113-114
25. 7/ Acraaf, 120-122
26. 7/ Acraaf, 123-124
27. 7/ Acraaf, 125-126
28. 20/Dhaaha, 72

Allaahu Akbar! keliya markii ay yiraahdeen "Waan Rumaynay." Bal aan in yar ka fikirno weedhahan is beddelay!

Maxaa beddelay dadkan diintooda ku iibin kara dakhli iyo jago? Dabcan "Laa'ilaaha illallah"! Cabsidii uu Fircoon sannado badan qalbigooda ku beeray ayaa baaba'ay, markii kelmeddaani quluubtooda taabatay. Dullaysigu waxay isu rogtay cizzinimo, addoonsigu sayyidnimo, Baqdintuna geesinnimo.

Ka warran wixii saxaabada kasoo gaaray kaddib markii ay kelmeddaan yiraahdeen? Muscab, Khabbaab ibnu Arraat, Bilaal, Cammaar iyo qoyskiisa (dhammantood Allaha ka raalli noqdee) Dadkaas oo ilaa shalay addoomo ahaa, ayaa waxay ku kaceen dhawaaqiintii waagaas, kaddib markii ay la kulmeen Kelmeddaan…



Maxaa ka dhigay inay sidaan isu beddelaan? Maxaa ku dhacay dadkan addoonka ahaa, oo roodhida qallalan ku qanacsanaa, oo aan ku dhiiranayn inay eegaan wejigii sayidkooda, markaas kaddib bay sayidkoodii iyo ilaahkoodiiba dhayalsadeen oo diinta islaamka iyo towxiidka ugu yeereen? Sababtoo ah waxay garteen sayidkii dhabta ahaa, kan xaqa ah ee awoodda leh, oo ilaaha xaqa ahaa. Markii ay ammaaneen, oo ay weyneeyeen ilaahay uun, waxay arkeen wejigii runta ahaa iyo waxyaabaha beenta iyo macmalka ah ee la ammaanayey.

Nolol cusub, nidaam cusub iyo fikir cusub dhinac iska dhig; Waxaan aad iyo aad ugu dheggannahay gundhig-

ga jahliga. Sharafta iyo ilbaxnimada dhinac iska dhig; Maalinba maalinta ka dambeysa waxaa raqiisoobay dhiigeeni, jirkeeni iyo sharafteeni, oo cagaha dul marsiyeen cadawga Islaamka![29]

Waxaan la yaabanahay, waa maxay sababta keentay kala duwanaanshahan cad ee inoo dhexeeya annaga iyo jiilkii ugu horreeyay ee kelmeddaan yiri?

Waxaan u sharxi karnaa sida soo socota:

Kelmeddaas si fiican bay u fahmeen, oo waxay yiraahdeen "Laa'ilaaha illallah", iyagoo og waxa ay aqbaleen.

Maanta, dadka intiisa badani waxay yiraahdaan "Laa'ilaaha illallah", iyagoo aan fahansanayn, oo isla markaana aan garanayn waxa ay aqbaleen iyo waxa ay diideen.



Haddaba, si loo fahmo sida ay u fahmeen jiilkii hore, waa in kelmeddaan dib loo baaro, oo micnihiisa lumay iyo shuruudihii la ilaaway mar kale ajandaha la keeno. Si farqiga inoo dhaxeeya uu u xirmo, si aynu u fahamno, oo aynu kelmeddaan ugu noolaano sida dadkii na lagu amray inaynu raacno ay u fahmeen oo kale.

29. Dabcan, waa waajibaadkeena in'aan tilmaamno inay jiraan waxyaabo ka reeban halkan. Kuwa sida la rabay u Rumeeyey Laailaaha Illallah, oo dadka ugu yeera; Kuwa naftooda, maalkooda iyo afkoodaba ku halgama jidka Alla, waa sharafta ummadda iyo mujaahidiinta geesiyaasha ah ee diinta Islaamka.

## IV. Muhiimmada kelmeddaani ay ku sallaysan tahay

Kelmeddaani waa kelmeddii uu Alla (swt) kusoo dejiyey addoomadiisa sharafta leh ee uu Malaa'igta u soo mariyey:

"Wuxuu kusoo dejiyaa Malaa'igta ruux/waxyi cidduu doono oo addoomadiisa ka mid ah, wuxuuna uga amraya (in Gaaladu sidatan) ugu digaan ilaah kale ma jiro anniga ka sokow(oo cibaadada xaq u leh) , ee iga dhawrsada.' "[30]

"Rasuul kasta oo aan dirray hortaa waxaan u waxyoonay İlaah kale (oo cibaadada xaq u leh) ma jiro aniga mooyee ee i caabuda."[31]

Kelmeddaani waa xarig sugan oo adag:

"… Qofkii ku gaalooba (diida, ka bari noqda) Dhaaquut ee rumeeya Alla, wuxuu qabsaday xarig (guntay) sugan oo adag (Kelime Tawxiid) iyo wuxuuna soo galay (İslaamka)."[32]

Saciid ibnu Jubeyr iyo Daxaaq (dhammaantood Allaha u naxriistee) waxay yiraahdeen:

"Xariga sugan oo adag waa Laa'ilaaha illallah."[33]

Kelmeddaani waa kelmadda ku sugaysaa Mu'miniinta adduun iyo aakhiraba:

"Alla wuxuu ku sugaa kuwa rumeeyey kelmedda sugan



30. 16/Naxl, 2
31. 21/Anbiyaa, 25
32. 2/Baqarah, 256
33. eeg. Tafsîru'l kur'ân'il azim, 1/523, Tafsiirka aayadda suuradda Baqarah ee 256'aad.

(Laa'ilaaha İllallah) Nolosha Adduun iyo Aakhiraba. Alla wuu dhumiyaa daalimiinta, Allana wuxuu falaa wuxuu doono."[34]

Waxa laga soo weriyay Baraa ibni Caazib (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Marka Muslimka qabriga lagu weydiyo, wuxuu ka marag kacayaa inaan Alla mooyee ilaah kale jirin, Maxamadna uu yahay rasuulkiisii. Tani waa micnaha aayaddani:

'Alla wuxuu ku sugaa kuwa rumeeyey kelmedda sugan (Laa'ilaaha illallah) Nolosha Adduun iyo Aakhiraba. Alla wuu dhumiyaa daalimiinta, Allana wuxuu falaa wuxuu doono.'[35] "[36]

Kelmeddaani waa kelmed uu Alla (swt) ku tilmaamay geed qurux badan oo xididkiisu sugan yihiin, laamahiisuna ay samada gaadheen:



"Miyeydaan arag sida Alla u tusaaleeyey (tawxiidka)? "Kelmedda wanaagsan (Laa'iaaha illallah) waxa ay la mid tahay geed qurux badan oo xididkiisu sugan yihiin, laamahiisuna samada gaareen."[37]

Ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) wuxuu yiri:

"Kelmedda wanaagsan waa 'Laa'ilaahaillallah.'"

Kelmeddaani waa kelmedda lagaga badbaadayo Naarta:

Waxaa laga soo weriyay Anas ibni Maalik (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

34. 14/İbrahim, 27
35. 14/İbrahim, 27
36. Bukhaari, 4699; Muslim, 2871
37. 14/İbrahim, 24

"Rasuulku (scw) wuu soo duuli jiray marka waagu beryo. Duulaanka ka hor ayuu eegi jiray, hadduu maqlo aadaanka ma duuli jirin, hadduusan dhawaaqa aadaanka maqlinna wuu duuli jiray.

Mar waxuu maqlay: qof leh Allaahu Akbar! Allaahu Akbar! wuxuuna yiri wuxuu ku taagan yahay fidhrada (İslaamka).

Markaas ayuu qofkaas yiri, 'Ashahadu an Laa'ilaaha illallah.'

Rasuulku (scw) wuxuu yiri: Waxaad kasoo baxday Naarta.

Waxa ay eegeen qofkani cidduu yahay, oo wuxuu noqday mid qowsaar ah."[38]



Waxa laga soo weriyey Cubaadah ibnu Saamit (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Qofkii ka marag kaca inaan Alla mooyee ilaah kale jirin, Maxamadna uu yahay Rasuulkii Alla, qafkaasi Naarta waa ka xaaraan."[39]

Kelmeddaani waa kelmedda wax kasta ka miisaan badnaan doonto:

Waxa laga soo weriyey Cabdullaahi ibnu Camar (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Markii uu Nuux dhimanayay wuxuu wiilkiisa ku yiri: 'Waxaan ku amrayaa Laa'ilaaha illallah.' Hadday kelmeddaani dhinac

38. Muslim, 382
39. Muslim, 29

miisaanka laga saari lahaa, oo toddobada samo iyo dhulkana dhinaca kale la saari lahaa, kelmeddaasu ayaa cuslaan lahayd.' "[40]

**Waxa laga soo weriyey Cabdullaahi ibni Camar bin Caas** (Allaha ka raalli noqdee) **inuu yiri, wuxuu Rasuulku** (scw) **yiri:**

"Maalinta qiyaamaha, Alla wuxuu ka sooci doonaa ummad-dayda hal qof, wuxuuna ku furi doonaa sagaal iyo sagaashan fayl oo ka dhan ah qofkaas. Cabbirka fayl kastaa wuxuu ahaan doonaa ilaa inta ay isu arki karto.

Markaasuu weydiin doonaa: 'Ma diideysaa mid ka mid ah kuwan? Malaa'igtii acmaasha ilaalinaysa, oo acmaasha qo-raysa ma xaq-darro bay kugula dhaqmeen?'

Oo isna wuxuu ku jawaabi doonaa, Maya Rabbiyow.



Kaddibna wuxuu ku dhihi doonaa, Ma waxaad sidataa cudurdaar?

Oo isna wuxuu ugu jawaabi doonaa, Maya Rabbiyow.

Markaas buu Alla ku dhihi doonaa: Haa, waxaad leedahay camal annagu raalli ka nahay, oo la aqbalay, maantana lagu-ma dulmin doono.'

Waxa la soo saarayaa warqad ay ku qoran tahay: 'Waxaan ka marag kacayaa inuusan jirin ilaah xaq ah oo aan Alla ahayn, 'Maxamadna waa addoonkiisii iyo rasuulkiisii', Alla waxuu ku dhihi, ku raadi miisaankaaga.

Qofkaasi wuxuu dhihi doonaa, Alloow, dhinac tani waa hal warqad, dhanka kalena kuwana waa faylal aad u badan oo dembiyada lagu qoray.

40. Axmad, 6583

Alla waxuu ku dhihi waligaa maanta laguma dulmin doono…

Faylalka dambigiisa ku qoran ayaa la saari doonaa hal dhinac, warqadda sidoo kale waxaa la saari doonaa dhinaca kale. Dhinaca la saaray faylalka ayaa kor u kici doonaa, oo warqaddu ayaa culeys noqon doontaa, maxaa yeelay ma jiro wax ka miisaan sarreeya magaca Alla."[41]

**Kelmeddaani waxay ilaalinaysaa hantida dadka iyo nolosha adduunkani:**

**Waxa laga soo weriyey Dhaariq ibni Ashyaam** (Allaha ka raalli noqdee) **inuu yiri:**

**wuxuu Rasuulku** (scw) **yiri:**

"Qofkii yiraahda ilaah kale ma jiro Alla mooyaane, beeniyanna waxa la caabudo Alla ka sokow, qofkaasi maalkiisa iyo dhiiggiisa waa lama taabtaan. "Xisaabtiisana Alla bay u sugnaatay."[42]



**Xadiiskii shaacbaxay ee Bukhaari, Muslim iyo imaamyo kale** (dhammaantood Allaha u naxristee) **oo kasoo weriyeen saxaabo badan** (dhammaantood Allaha ka raalli noqdee) **waxuu Rasuulku** (scw) **yiri:**

"Waxaa la i faray inaan la dagaallamo dadka ilaa ay ka marag kacaan in Alla mooyee ilaah kale jirin, Maxamadna uu yahay Rasuulkii Alla, oogan Salaadda iyo bixiyaan Sakada. Hadday sidaas yeelaan, anniga ayay dhiiggooda iyo maalkoodaba iga ilaalinayaan, xaqa Islaamka mooyee…"[43]

**Kelmeddaani waa laanta iimaanka ee ugu fadliga badan:**

41. Tirmiidi, 2639; İbni Maje, 4300
42. Muslim, 23
43. Bukhaari, 25; Muslim, 22

Waxa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Iimaanku wuxuu leeyahay toddobaatan ama lixdan laamood. Midda ugu sarreysa waa in la yiraahdo Alla mooyee ilaah kale ma jiro. Midda ugu hooseysa waa in wadada laga qaado waxyaabaha dadka dhibaateeya. Xayaa sidoo kale waa laan iimaanka ka mid ah."[44]

Kelmeddaani waa sababta dagaallada u dhacaan. Waa kelmedda iska horkeenta Aabaha iyo wiilkiisa, Hooyada iyo Dhallaanka ka dhigtaa cadaw, kelmeddaani waa kelmedda Rasuulka (scw) iyo dhammaan Nebiyada kale (cs) u samreen jirdil nooc walba ah. Waa kelmedda keliya ee aan lakala dooran karin in laga leexdo farriinteeda iyo nuxurkeeda. Waa kelmedda xitaa jihaadka diinta ugu sarraysa loo galo. Waa kelmeddii uu Nabi Nuux (cs) dadka ugu yeerayay isagoo aan daalin muddo 950 sanno ah. Waa kelmed aad u weyn oo aan fadligeeda lagu micnayn karin in la tiriyo ama muhiimmada ay leedahay in la qoro…



Mar haddii kelmeddaani tahay mid aad u muhiim ah, oo fadli badan, mar haddii farxadda adduun iyo aakhiraba ay ku xiran tahay kelmeddaan; Sidaa darteed kelmeddaan waa tan mudnaanta ugu sarreeysa iska leh in la sharraxo oo la qoro.

44. Muslim, 35

# MİCNAHA KELİME TAWXİİD

Si loo fahmo micnaha kelime Tawxiidka, waxaa lagama maarmaan ah in la fahmo "İlaah" sidaan ku soo sheegnayba boggii hore, maxaa yeelay kelmeddaan nuxurkeedu waa diidmada ilaahyada oo dhan iyo aqbalaadda hal ilaah oo keliya. Innaga oo leh "Laailaaha" waxaynu nidhaahnaa "Ilaah ma jiro", Yacnii Waxaan diidnay wax kasta oo ilaahnimo ah. Kaddib markii aan diidno ilaahnimada wax walba, waxaan dhahnaa "illa". Markaa waxaanu samaynaa ka-reebis, waxaanu nidhaahnaa waxa ka reeban hal keliya. Markaa waxaanu nidhaahnaa "Alla" "qowlkeena ahaa "Ilaah ma jiro" waxaa ka reeban hal keliya, waana Alla" ayaanu leenahay. Waxaan inkiraynaa ilaahnimada waxyaabaha jira oo dhan, waxaana u caddaynaynaa Alla (swt) oo keliya. Markaa; ilaahnimadu waa waxa aynu inkireyno oo ah "La" iyo waxa aynu Ilaah ugu caddaynayno oo ah "illa".



Si loo fahmo ilaah, yacnii kelime Tawxiid, waa in la fahmo "cibaadada", maxaa yeelay Ilaah waa arrin la fahmi karo oo keliya goortii aan ogaanno micnaha ciba-

adada. Haddaba, marka aan fahamno labadaan arrin, waxaan sidoo kale fahmi doonnaa kelime Tawxiidka.

## I. Waa maxay micnaha Ilaah iyo Cibaado?

وَمَٓا اَرْسَلْنَا مِنْ قَبْلِكَ مِنْ رَسُولٍ اِلَّا نُوحٖٓي اِلَيْهِ اَنَّهُ
لَٓا اِلٰهَ اِلَّٓا اَنَا۬ فَاعْبُدُونِ

"Rasuul kasta oo aan dirray hortaa waxaan u waxyoonay İlaah kale (oo cibaadada xaq u leh) ma jiro aniga mooyee ee i caabuda."[1]

Isla markii uu Rabbigeen (swt) xusay in isaga mooyee ilaah kale aanu jirin, wuxuu yiri: "Haddaba aniga uun i caabuda" Taasina waxay ku tusinaysaa in ereyga "Ilaah" uu micnihiisu yahay "cidda la caabudo".



وَاتَّخَذُوا مِنْ دُونِ اللّٰهِ اٰلِهَةً لِيَكُونُوا لَهُمْ عِزًّاۙ كَلَّاۜ
سَيَكْفُرُونَ بِعِبَادَتِهِمْ وَيَكُونُونَ عَلَيْهِمْ ضِدًّاࣖ

"Waxay yeesheen Alla ka sokow ilaahyo si ay ugu noqdaan cizzi (awood). saas ma aha ee (maalinta qiyaamaha) waxay inkirayaan cibaadadooda, waxayna ku noqon korkooda lid (col)."[2]

Haddii loo fiirsado waxaa marka hore aayadda ku sugan inay yeesheen Alla (swt) ka sokow İlaahyo, markaas kadddibna waxaa lagu sheegay ilaahyadan Alla ka sokow yeeshteen inay cibaadadooda inkiri doonaan.

1. 21/Anbiyaa, 25
2. 19/Maryama, 81-82

Taasina waxay ku tusinaysaa in İlaah loola jeedo "cidda la caabudo".

Haddaba, sidee Rasuulladu u micneeyeen ilaah?

"Rasuul kasta oo aan dirray hortaa waxaan u waxyoonay İlaah kale (oo cibaadada xaq u leh) ma jiro aniga mooyee ee i caabuda."[3]

Alla (swt) wuxuu Nebi kasta u waxyooday "Laa'ilaaha illallah". Nebi kastana wuxuu dadkiisa ugu yeeray kelmeddaan, sidaa darteed aynu wada baarno dacwadooda. Bal aynu eegno sida ay kelmeddaan u fasireen iyo waxa ay ula jeeddaan midnimada Alla:

"Waxaa hubaal ah inaan u soo dirnay ummad kasta Rasuul inuu gaarsiiyo farriinta ah: Caabuda Alla Dhaaqutna ka fogaada ..."[4]

"Waxaan dhab ahaan u dirray (Nebi) Nuux qoomkiisii Wuxuu ku yiri: Qoomkayow! Caabuda Alla. ILaahay idiinma sugna isaga mooyee (cibaado mudan) ...' "[5]

"Waxaan u Dirray Caadna Walaalkood (Nebi) Huud wuxuuna ku yiri: Qoomkayow Caabuda Alla. ILaahay idiinma sugna isaga mooyee (cibaado mudan) ...' "[6]

Waa tan nuxurka kelmeddaan, oo ka soo baxay afafkii Nebiyada: In la caabudo Alla (swt) oo keliya iyo in la inkiro oo laga fogaado dhammaan ilaahyada beenta ah ee isaga ka sokow la caabudo.

3. 21/Anbiyaa, 25
4. 16/Naxl, 36
5. 7/Acraaf, 59
6. 7/Acraaf, 65

Marka aynu ku micneeyno in Alla (swt) la caabudo oo keliya, waxaa laga yaabaa in su'aashan oo kale ay ku soo dhacdo maskaxda qaar ka mid ah akhristayaasha:

"Ma jiraa qof caabuda cid aan Alla ahayn, oo waxaad ka hadlaysaan in dib loo fahamo kelmeddaani?"

Taasi waa dhibaatada jirta! Waa arrin dabiici ah inay dadku su'aashan oo kale weydiiyaan, marka ay garan waayeen waxa ay cibaadadu tahay ama ay u malayeen in cibaadadu ka kooban tahay uun salaadda, soonka, sakada iyo xajka. Sababta aan kelmeddaan u keenayno ajandayaasha ayaa ah inaan u iftiimino dadka leh "Laa'ilaaha illallah" una maleeyaan inay caabudayaan Alla oo keliya, maxaa yeelay ma garanayaan micnaha cibaadada ama waxay ku soo kooban arrimaha qaar, balse Xaqiiqda waxay Alla (swt) la caabudaan kumanyaal ilaahyo oo baadil ah. Waxaana la rajaynayaa inay gartaan khaladkooda oo ay kasoo baxsadaan dhiiqada shirkiga ee ay ku jiraan.



Qaamuuska Afka Carabiga, kelmedda cibaadadu waxa ay asal ahaan ka timid "c-b-d". Waxaa loola jeedaa: Addoon; Si dulleysan in wax loo addeeco; caabudid; in cid la caabudo; in wax wax kale ku xiran yihiin oo aan laga sooci karin, iyo wax ka hor istaagayo in qof wax sameeyo.[7]

Yacnii, qofku hadduu wax u hoggaansamo, isu dhiibo, oo si kal iyo laab ah ugu xiran yahay, wuxuu u noqday addoon isaga caabuday.

7. eeg. afar qodob oo quraan ah, b. 78

Qeexitaannadan waa qaar ka mid ah micnayaasha cibaadada ee qaamuuska Afka Carabiga. Sidoo kale aan eegno Qur'aanka iyo micnaha uu Alla (swt) u adeegsado cibaadada.

## II. Quraanka Kariimka ahi İyo Cibaadada

### A. In la siiyo awoodda Xukunka kuwa kale waa Cibaado

اِتَّخَذُوٓا اَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ اَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللّٰهِ
وَالْمَسِيحَ ابْنَ مَرْيَمَۚ وَمَٓا اُمِرُوٓا اِلَّا لِيَعْبُدُوٓا اِلٰهًا
وَاحِدًاۚ لَٓا اِلٰهَ اِلَّا هُوَۜ سُبْحَانَهُ عَمَّا يُشْرِكُونَ

"waxay ka yeesheen culimmadoodii iyo suufiyadoodii Rabbiyaal ilaahay ka sokow iyo ciise ibnu maryama waxaan cibaadada ilaahay kali ahaynna lama farin. Alla mooyee ilaah kalana ma jiro (oo cibaadada xaq u leh) waana ka nasanyahay waxay la wadaajin."[8]



"...Caadiy wuxuu yimid Madiina. Waxa uu ahaa hogaamiyihii Qabiilka Taay. Asigoo qoorta istallaal qalin ah ugu jirta ayuu u galay Rasuulka (scw). Rasuulku (scw) waxa uu markaas akhrinayay aayadda 31-aad ee suuradda At-Tawbah. Caadiy wuxuu Nebiga (scw) ku yiri: 'Ma caabudin culimmada!' Rasuulku (scw) wuxuu ku yiri: Haa, laakiin culimmadu xalaashii xaaran, xaarantiina xalaal bay ka dhigeen, oo iyaguna way u hoggaansameen. "Tani waa cibaadada ay culimmadoodu u sameeyen," ayuu yiri."[9]

8. 9/Tawbah, 31
9. Tirmidi, 3095; Tafsiru ibni Abii Hatim, 2/1784, riyaawada tirsigeedu yahay 1005-10058

Goortee ayuu qofka Rabbi kale yeeshtaa? Mise muxuu qofka sameeyaa si uu u caabudo wax kale?

Su'aalahaas aan weydiinno Rasuulka Alla (scw), Maxaa yeelay mid ka mid ah waajibaadkiisa waa inuu caddeeyo Qur'aanka:

"(waxaana lala soo dirray) xujooyin iyo Kutub waxaana kugu soo dejinay Qur'aanka inaad u caddayso Dadka waxa loo soo dejiyey, waxaa la rajeynayaa inay fikiraan."[10]

Quraanka Kariimka ah; oo ah hanuunka iyo naxariista, iyo cidda sharraxdayna Rasuulku (scw) yahay, waxa uu ku tilmaamay inay cibaado tahay inay Ehlu-kitaabtu culimmadu awood u siiyeen inay wax ka beddelaan xaaraanta iyo xalaasha Alla (swt). Markii ay culimmadoodi awooddaas siiyeen, wuxuu xusay inay Alla ka sokow yeesheen Rabbiyo ay caabudeen.



Bal sidaan u fikir: Kuwa maanta kelime tawxiidka yiraahda, oo xitaa ku wardiyaa: Haddana ka qayb qaataa doorashooyinka dimoqaraadiga ah, iyagoo codkooda siinaya xisbiyada iyo siyaasiyiinta wax ka beddelaa, cusbooneysiyaa, oo baa'biyaa shuruucda Alla, Dadkani ma waxay caabudeen Alla oo keliya si waafaqsan kelime tawxiidka ay ku dhawaaqeen, mise waxay yesheen Alla ka sokow ilaahyo kale?

Dabcan, qaar baa laga yaabaa inay dhahaan: Waad saxan tihiin! Taasi waa khalad, sida aayadda iyo tafsiirkeedaba, laakiin maanta, marka ay dadku ka qayb

10. 16/Naxl, 44

qaadanayaan doorashooyinka, ujeeddadoodu maaha in qofna siiyaan awood uu ku beddelo sharciga Ilaahay, gaar ahaan kuwa u codeeya xisbiyada Islaamiga ah (!) Islaamku waa ka fog yahay, iyagana waa ka fog yihiin Islaamka…

Anagoo ka jawaabayna, waxaanu ku leenahay: Haddaynu u fiirsano xadiiska, Ahlu-kitaabtuba may ogayn inay sidaas tahay, laakiin taasi waxba kama beddelin inay caabudeen culimmadoodu, oo Alla ka sokow ilaahyo kale yeesheen.

Maxaa yeelay, waa xaq Allaha sare iska leh in sharci la dejiyo, isagu waa abuuraha, waa arsaaqaha, waa kan aadanaha ugu deeqa nimcooyinka kala duwan. Isagaa Samooyinka iyo dhulka iska leh, oo isagaa (swt) maamulkooda iska leh. Dabcan, isaga ayaa sidoo doonno mulkigiisa u tasarruf gareynayaa. Si tan u ogaatid Uma baahnid inaad caalim noqotid.



Sida uu qof kastaa xaq ugu leeyahay inuu hantidiisa sida uu doono u tasarruf gareeyo, sidaas si la mid ah ayuu Allaha sare isagana xaq ugu leeyahay inuu mulkigiisa sida uu doono ugu tasarruf garreeyo, maxaa yeelay isaga ayaa ah xaakimka keliya iyo sharci-dejiyaha keliya ah iyo midka awoodda ku keli ah. Looma baahna aqoon gaar ah si taasi loo ogaado:

"… Alla ayaa Abuuridda iyo Amarkaba iska leh, waxaana waynaaday «oo Khayrbatay» Allaha barbaariya Caalamka."[11]

11. 7/Acraaf, 54

Sida aanu qofku u jeclayn in qof kale ku tasarrufo hantidiisa, oo uu taas u arko inay baad iyo dulmi tahay, si la mid ah, sharci u dejinta bulshada, oo ah xaqa Allaha sare, waxay la micno tahay in Alla (swt) mulkigiisa lagu tasarrufo isaga oo sugan. Bini'aadamku si fidhri ah, ayuu u garanayaa inay tani khalad tahay. Si kastaba ha ahaatee, isagu ma daba galo, mana danaynayo xogtaan jidhkiisa lagu beeray. Sababtaas awgeed, ma uu fahmin dembiga culus uu ku kacayo.

Ma jirto wax kala duwanaansho ah oo u dhexeeya in awoodda abuurka la siiyo Alla (swt) ka sokow cid kale iyo in awoodda xukunka la siiyo cid kale. Labadaas arrimoodba wuxuu caabuday cid aan Alla ahayn, wuxuuna la wadaajiyey Alla, oo wuxuu Alla ka sokow yeeshay rabbi iyo ilaah kale.



Aayad kale wuxuu ku yiri:

اِنِ الْحُكْمُ اِلَّا لِلّٰهِۜ اَمَرَ اَلَّا تَعْبُدُٓوا اِلَّٓا اِيَّاهُۜ ذٰلِكَ الدّ۪ينُ الْقَيِّمُ وَلٰكِنَّ اَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ

"... Xukunka waxaa iska leh Alla oo keliya. Wuxuu idin faray inaydaan caabudin cid aan isaga ahayn. Tani waa diinta toosan, laakiin dadka badankiisu ma yaqaaniin."[12]

Aayadu waxa lagu mamnuucay in cid kale la caabudo, kaddib markii lagu sheegay in xukunka uu leeyahay Alla (swt) oo keliya. Waxaan halkaan ka fahmeynaa qofku inuu caabuday cidda uu siiyey sharci dajinta. Waxaase

12. 12/Yuusuf, 40

yaab leh in xilligii Nebi Yuusuf (cs) deegaankii aayaddu kusoo degtay iyo maantana ay dadku garan la'yihiin caqiidadaani inay tahay diinta toosan, oo aysan rabin inay fahmaan.

اَمْ لَهُمْ شُرَكٰٓؤُا شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدّ۪ينِ مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللّٰهُ

"Mise waxay leeyihiin shurako oo u Jideeyey diin (xukun) aan Alla idmin?"[13] [14]

Kuwa sharci ka dejiya arrimo uusan Alla ogolayn waa Rabbiyo lala wadaajiyey Alla (swt). Sida ugu bayaansan ee shirkiga noocan ah ee qarnigeena waa ka qaybgal-ka doorashooyinka, iyo in awooddan lagu siiyo dad-kani, iyadoo loo codeynayo, taasi oo ah sida ay diinta dimoqraadiyadduba ay farrayso.



Haa, in xukunka la siiyo Alla (swt), waxay la micno ta-hay in isaga la caabudo. Ruuxii awood u siinayaa in'uu sharci dejiyo, oo sharci u jideeyo cid aan isaga ahayn, wuxuu Alla ka sokow ka yeeshay ilaah, oo caabuday, Rabbigiisana wax buu la wadaajiyey.

13. 42/Shura, 21
14. Wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan mawduucan, eeg. "Tevhit dergisi (Majaladda Tawxiid) Hakimiyet özel sayısı (Maamulka" qodob Gaar ah.

## B. Ducadu waa cibaado

وَقَالَ رَبُّكُمُ ادْعُونِى اَسْتَجِبْ لَكُمْۜ اِنَّ الَّذِينَ يَسْتَكْبِرُونَ عَنْ عِبَادَتِى سَيَدْخُلُونَ جَهَنَّمَ دَاخِرِينَ

"Wuxuu yiri Rabbigiin i barya aan idiinka ajiibee, (aqbalee) kuwa iska weyneeya inay i caabudaan waxay gali doonaan Naarta Jahannamo, iyagoo dulleysan.' "[15]

Marka hore wuxuu aayadda ku yiri: "I barya." Markaas kaddibna wuxuu yiri, "kuwa iska weyneeya inay i caabudaan". Taasina waxay daliil u tahay in Alla aktiisa ducadu ka tahay cibaado.

Sidoo kale, tafsiirka aayaddan; Tirmiidi iyo Abuu Daa'wuud (dhammantood Allaha u naxriistee), waxay soo weriyeen xadiiska soo socda ee Numaan bin Bashiir (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"Rasuulka Alla (scw) waxa uu yiri, "Ducadu waa cibaadada lafteeda, markaas kaddibna waxa uu akhriyey aayadda 60-aad ee suuradda Mu'min:

"Wuxuu yiri Rabbigiin i barya aan idiinka ajiibee, (aqbalee) kuwa iska weyneeya inay i caabudaan waxay gali doonaan naarta jahannamo, iyagoo dulleysan.' "[16]

Sida la arki karo, Rasuulku (scw) wuxuu caddeeyey isagoo aayaddan ka duulayaa ducadu inay tahay cibaadada lafteeda. Waxaan soo sheegnay in Kelime Tawxiid micneheedu yahay in Alla (swt) lagu mideeyo cibaadada

15. 40/Mu'min (Gafir), 60
16. Tirmiidi, 3247; Abu Daawuud, 1479

iyo cid aan isaga ahayn in la caabudin. Hadday ducadu cibaado tahay, sidee xaalku noqon doonaa dadka ku baryootama qubuuraha iyo mawlacyada dadka ay u aaminsan yihiin inay saalixiin yihiin, ama marka ay dhib la kulmaan maskaxdoodu kusoo dhaca Cabdulqaadir Geylaani Allaha sare ka hor?

Maxayse dadkani kaga hor imanayaan kelime tawxiidka ay odhanayaan, iyagoon micnaheeda garanayn? Waxay afkooda ku odhanayaan, “Ilaah kale ma jiro oo aan Alla ahayn”. Waxay ballan ku qaadeen inay caabudi doonaan Alla (swt) oo keliya, haddana iyagiibaa is-beeninaya, iyagoo baryaya cid aan isaga ahayn. Waxa ay galaan qubuuraha/xabaalaha iyagoo leh “wax walba iyo cid kasta oo la caabudo oo aan Alla ahayn waan diidnay”, waxa ayna kasoo baxaan iyagoo caabuday cid aan Alla ahayn.



Haddaba aynu akhrino aayadahan soo socda ee ka hadlaya xaaladda dadka gacmaha u furta, barya cid aan Alla (swt) ahayn, oo ka rajaynaya inay u gargaari doonaan:

“Ducada xaqa ah waa Alla. Cidda ay baryaan wax aan isaga ahayni sinaba uma ajiibi karaan ducadooda. Tusaalaha kuwa baryaya cid aan Alla ahayn waxay la mid tahay mid calaacashiisa u fidiyey xagga biyaha si ay biyuhu afkiisa u gaadhaan. Haddana (biyaha) ma gaadhaan isaga. Ducada gaalada (kuwa Alla ka sokow) ma aha waxaan baadi ahayn.”[17]

“Yaa ka Dulmi Badan ruux ku been abuurta Alla Been ama Beenisa Aayaadkiisa, kuwaasu waxay Heli qaybtoodii loo

17. 13/Ra’cad, 14

qoray, markay u Timaaddo Malaa'igtanada (Mawdka) oo Dili waxay ku Dhahaan Aaway waxaad baryeyseen Alla ka Sokow waxay Dhahaan way naga Dhumeen, waxayna ku marag Fureen Naftooda inay Gaalo yihiin."[18]

"Hana baryin Alla ka Sokow waxaan wax ku Tarayn kuna dhibayn, Haddaad fasho waxaad ka mid Noqon Daalimiinta/ Mushrikiinta. Hadduu ku taabsiiyo Alla dhib wax faydi oon isaga Ahayn ma jiro, Hadduu kula doono Khayr wax celin kara fadligiisa ma jiro, Wuxuuna gaadhsiiyaa cidduu doono oo Addoomadiisa ka mida, waana Al-Gafuur (oo dambiga dhaafa, astura, oo addoonka ka ilaaliya xumaanta dembiga) iyo Ar- Raxiim (oo addoomadiisa u naxriista)."[19]



"Haddaad iyaga baryadaan ma ay maqli doonaan. Xitaa hadday maqlaan, idinma jawaabi karaan. Maalinta qiyaame way diidi shirkigiina. "cid wax og, oo sidaana wax kuugu warrama ma jiro."[20]

## C. Addeecida buuxda waa Cibaado

اَلَمْ اَعْهَدْ اِلَيْكُمْ يَا بَنٖٓى اٰدَمَ اَنْ لَا تَعْبُدُوا الشَّيْطَانَۚ اِنَّهُ لَكُمْ عَدُوٌّ مُبٖينٌۙ وَاَنِ اعْبُدُونٖيۜ هٰذَا صِرَاطٌ مُسْتَقٖيمٌ

"Miyaanan idinkula ballamin Bani'aadamow inaydaan caabudin Shaydaanku, illen col muuqda yuu idiin yahay. I caabuda (keligey) Tani waa jidka toosan.' (Miyaanan odhan?)""[21]

18. 7/Acraaf, 37
19. 10/Yuunus, 106-107
20. 35/Faadhir, 14
21. 36/Yaasin, 60-61

Aayaddani waxa uu Alla (swt) ku yiri "… Ha caabudina shaydaanka …" Guud ahaan, culimmada mufassiriinta ah, waxay sheegeen in cibaadada halkan loola jeedo "addeecid".[22]

Islaamka, addeecid buuxda waxaa u sugnaatay uun Allaha barbaariya Caalamka. Adeecidda Alla iyo Rasulku idmeen, iyo madaxda Alla sharcigooda ka qaata; Waxay ku jirtaa baaxadda adeecidda Alla (swt), maxaa yeelay Alla ayaa faray in la addeeco iyaga, wuuna banneynaya in loo hoggaansamo iyaga.[23]

Addeecida kuwa naloo oggolaaday inaan addeecno, sida hoggaamiyaasha, waalidiinta, iyo kuwa kale, ma aha mid dhammaystiran. Waanu addeecaynaa mar hadday Alla (swt) iyo Rasuulkiisa (scw) aanay khilaafeyn, oo aanay amreyn waxyaabaha la mamnuucay:



Waxa laga soo weriyey Cabdullaahi ibnu Cumar (Alla ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"… Marka macsiyo la amro, ma jirto dhegeysi iyo addeecid"."[24]

Ruuxii si buuxda u addeeca dawlado/ hoggaamiyaal aan sharcinimadooda ka qaadan xagga Alla, ama addeeca kuwa amar ku bixiyaa in lagu caasiyo Ilaahay, wuxuu caabuday iyaga, oo Alla ka sokow wuxuu ka yeeshtay ilaah. Sababtoo ah addeecidda buuxda "ilaah" oo keliya ayaa loogu hoggaansamaa.

22. bk. Zâdu'l Masîr, 3/528, Tafsiirka Suuradda Yaasin ee aayadda 60'aad
23. eeg. 4/Nisa, 59
24. Bukhaari, 7144

Faraaciinta si cad ama si dadban u sheegta ilaahnimada, waxay bulshada ka filayaan addeecid buuxda. Wax kastoo la sameynayo, iyagoon fasax laga haysan, ama qoraal ka qorin, ama tilmaamo ka bixin, waxay u arkaan inay tahay dambi. Saaxiriintii markii ay rumeeyeen Nebi Muuse (cs), Fircoonkii waagaas joogay ma diidanayn rumeyntooda, balse waxa uu ka horyimid inay rumeeyaan isagoon u idmin.:

"Wuxuuna yiri Fircoon Miyaad rumeyseen Muuse, Idan ka hor, Arrintaani waa Dhagar aad ku Dhagarteen si aad uga Bixisaan magaalada Dadkeeda, dhawaan ayaad ogaan doontaan/fahmi doontaan (waxa aan samayn doono). Hubaal, waxaan u gooyn Gacmihiinna iyo Lugahiinna isdhaaf waana idin daldali Dhamaantiin.' "[25]



Haddaba, waa inaan ka fiirsanaa cidda aan addeecno, oo nolosheenna ku hagaya tilmaamahooda tooska ah iyo kuwa dadbanba. Waa inaan talaabo qaadnaa anagoo og in addeeciddeenu tahay cibaado.[26]

---

25. 7/A'râf, 123-124

26. Ma shirki baa addeecid walba lagu addeeco Shaydaanka iyo Gaaladu?

Su'aashaan waxaan kaga jawaabi karnaa qodobbadan:

a. Kuwa u arka shaydaanka ama dawladaha gaaladu inay yihiin maamul addeecid buuxda leh, oo ugu hoggaansama dhinac kasta oo nolosha ah, Alla ka sokow waxay ilaah ka dhigteen iyaga.

b. Kuwa ugu hoggaansama shaydaanka ama dawladaha gaalada xagga u shariik yeelida Alla (swt) ama ku addeeca awaamirtooda kugriga ah; Waxay la wadaajiyeen Alla (swt).

c. Kuwa aan u arkin shaydaan iyo dawlado gaalo ah inay yihiin kuwo la addeeco, oo aan u hogaansamin awaamiirtooda ay ku jiraan shirkiga iyo kufriga, laakiinsee u hoggaansama rabitaankiisa una hoggaansamo iyaga, in kastoo uu aqbalo inuu Alla (swt) waxyaabhaas xaarantimeeyey, waa mu'miniin dembiile ah.

## III. Micnaha ballaadhan ee Kelime Tawxiid

### A. Waa maxay micnaha Ilaah?

"Ilaah" waa kelmed Af-Carabi ah. Waa kelmed soo jirtay tan iyo aadaminnimada,tan iyo Nebigii ugu horreeyay. Carabtu waxay kelmeddaan u adeegsadeen micnayaashan soo socda:[27]

A-la-ha/ أَلَهَ: Waxaa loola jeedaa " caabudid". Ilaah waa magaca la siiyey macbuudka la caabudo. Magacaan waxaa loo siiyey dadku inay isagu caabudayaan. Haddaba, ilaah waa macbuudka la caabudo.

A-la-ha/أَلَهَ: Waxaa loola jeedaa " ilaaliye, ammaansiye, ama dhowre". Ilaah waa kan ilaaliya, oo ammaan siyaa kuwa isaga magan gala.

A-li-ha/أَلِهَ: Waxaa loola jeedaa "yaabid". Qofka; Waxa uu la yaaban yahay haybadiisa, kaamilnimada khalqigiisa, saxnaanta iyo caddaaladda awaamiirtiisa diiniga ah iyo kuwa rabaaniga ah. Ilaah waa kan la mahadiyo.

Wa-la-ha/ وَلَهَ ama Wa-li-ha/ وَلِهَ: Waxaa loola jeedaa "jacayl dartiis in loo waashto, kalgacalnimo waalli ah". Waxaa loo adeegsadaa goorta ay hooyadu u tiirsato ilmaheeda jacayl iyo kalgacal. Si la mid ah, ilmahana hooyadiisa u tiirsado. Marka loo adeegsado hooyada iyo dhallaanka waxaa loola jeeda ku xirnaansho jacayl iyo kula mucaamilid naxriis. Ilaah waa kan ku gadaama khalqigiisa kalgacal iyo naxariis.



27. Lisânu'l Arab, 13/467-472; El-Mufredât, b. 82-84, e-l-h qodobbada ah

Laa-ha/لَاهَ: Waxaa loola jeedaa "in la qariyo, oo la daboolo". Ilaah waa kan aan la arki karin.

La-ha/لَهْو - لَهَى: Waxaa loola jeedaa "mid mashquuliya, farxad geliya, oo maaweeliya". Ilaah waa kan ka farxiya kuwa isaga addoon u ah, marka qalbigu isaga u jiheysto aan ka dhigin mid u jiheysto waxyaabo kale.

Ha-wa-la/هَوْل - هَوَل: Waa xaalad qofka ku keenta cabsi iyo walaac. Waxaan yiraahnaa muuqaallada naxdinta leh ee maalinta qiyaame "ahwal yawmi'l qiyamah". Ilaah waa kan laga cabsado oo xakamayntiisa loo hoggaansamo.

Haa-la-tun / هالَةٌ: Waxaa loola jeedaa "goobada iftiinka ee ku wareegsan Dayaxa". Ilaah waa nuurka samooyinka iyo dhulka, isagoo ku ifinayaa dariiqa aadanaha waxyi, quluubtoodana iimaan.

Ahlun/ اَهْلٌ: Waxaa loo adeegsadaa qoyska qofka, xertiisa iyo qaraabadiisa. Ilaah waa kan addoomadiisa u dhaw, iimaanka iyo camalka wanaagsanna loogu dhawaan karo.

Ilaah waa kan la caabudo. "Laa'ilaaha illallah" micneheedu waa ku dhawaaqidda in cidna cibaado mudnayn, oo Alla (swt) keliya uu mudan yahay cibaadada.

Tusaalooyin ka mid ah micnaha cibaadada ayaan ku soo xusnay bogaggii hore. Waa inaan ogaano cibaadadu inay tahay wax kasta oo Alla jecel yahay, raalli ka yahay, kuna amrayo mu'miniinta inay sameeyaan, loona sameeyo Alla (swt) oo keliya.

Yacnii, nolosha oo dhan waa cibaado iyo inaad addoon Alla ahaatid.

Markaynu nidhaahno "Laa'ilaaha illallah", Alla ayaanu ka ballan qaadaynaa oo aanu heshiis la galnay. waxaan leenahay in isaga aan ku addeceyno dhinac kasta oo nolosha ah, oo isaga aan caabudeyno, isaga keliya ka sugeyno faa'iido iyo dhib, isaga keliya aynu baryayno, isaga keliya ku kalsoonnahay, isaga keliya aan u jecelnahay, oo aan u neceebbanahay. Waxaan aqbalnay in isaga (swt) keliya uu soo faragelin karo waxbarashadeena iyo dharkeena, fahamkeena fanka iyo madadaalada, dagaalka iyo nabadda, iyo dhaqaalaheenaba.

In la aqbalo ilaahnimadiisa waa in la aqbalo xakamayntiisa. Waa inaan aqbalno dhammaan ficilladeena oo dhan mid qalbi iyo odhahba inay isaga oo keliya u ahaan doonaan:



""Waxaad dhahdaa: salaaddayda, gowraceyga, noloshayda iyo geeridaydu waxay u sugnaatay Allaha barbaariya caalamka. Ma laha cid la wadaagta. Taas ayaa la i faray, waxaanan ahay qofkii ugu horreeyey ee Muslimiinta ka tagay shirkiga oo Alla ula noqday tawxiid.' "[28]

""Laa'ilaaha illallah" waa tawxiid. Waa in Alla lagu mideeyo tixraaca la raaco nolol iyo geeri, salaad iyo Alla bari, nadar iyo dawaaf, duco iyo talo saarasho, awoodda maamul iyo addeecid. Guud ahaan noloshu waa inaad addoon tahay, wax walbana Alla (swt) ayaa iska leh. Ma jirto hal meel oo nolosha qofka muwaaxidka

28. 6/Ancaam, 162-163

aanu ahayn mid cibaado ah, oo aan kelime Tawxiid soo koobin. Siduu u guursan doono iyo meesha iyo sida uu waxbarashada u qaadanayo Ilaah ayaa go'aamiya. Siyaasada uu ku dhaqmi doono, siduu arzaaaqda ku dalban doono iyo halka uu ku bixin doono Ilaah ayaa go'aamiya, maxaa yeelay wuxuu Alla (swt) u aqbalay ilaah ahaan isagoo leh "Laa'ilaaha illallah" wuxuuna ikhtiyaarkiisa ku caddeeyay inuu isaga u yahay addoon.

## B. Muxuu Alla u yahay macbuudka Keliya?

Marka la tixgeliyo micnaha qaamuuska ee ereyga "Ilaah", su'aashan ayaa noqon doonta mid laga jawaabay. Alla (swt) waa macbuudka keliya, maxaa yeelay waa kan addoommadiisa kalgacal ku ilaaliya, u dhow, una oggolaada inay isaga u dhowaadaan; Waa kan khalqigiisa iyo awaamirtiisa, aayadihiisa iyo sharcigiisaba ay ka dhammaystiran yihiin xagga caddaaladda iyo runta; Waa kan qofka magacyadiisa iyo sifooyinkiisa isku dhiibo, oo haybaddiisa iyo maamulkiisa loo guntado, lagana cabsado; Waa kan quluubta iftiimiya, addoommadiisana hanuuniya, oo kasoo saara mugdiga khuraafaadka/falsafada/diimaha beenta ah/ kufriga/ shirkiga una soo saara iftiinka iimaanka/tawxiidka. Waxaas oo dhan dartood iyo micnayaal kale oo magacyadiisii qurxoonaa ay tilmaamayaan, Alla; Waa ilaah, isaga ayaa la caabudaa, waana kan keliya ee mudan in la caabudo.

### Waxa daliil u ah Alla inuu yahay Ilaaha keliya

Nidaamka ka jira koonka waxa ay daliil u yihiin inuu Alla yahay Ilaaha keliya ee jira:

"Hadday jiri lahaayeen ilaahyo Alla ka soo hadhay (samoo-yinka iyo dhulka) way fasahaadi lahaayeen. Waxaa ka Nasahan Rabbiga Carshiga leh waxay ku Tilmaamayaan."[29]

"Ma yeelan Alla Ilmo, mana aha Miciisa Ilaah (kale) Illeen markaas wuu la Tagi lahaa Ilaah walba wuxuu Abuuray, wuxuuna ka Kormari lahaa (Adkaan lahaa) Qaarkood Qaar, waxaa ka Nasahan Alla waxay ku Tilmaamayaan."[30]

## Yaa qaban kara kuwan cid aan Alla (swt) ahayn?

"Waxaad Dhahdaa bal Warrama Hadduu ka Yeelo Alla Korkiinna Habeen Joogta ah tan iyo Qiyaamada waa Kee Allaha Alla ka soo Hadhay ee idiin keeni aftiin miyaydaan wax Maqlayn. Waxaadna Dhahdaa bal Warrama Hadduu ka Yeelo Alla Korkiinna Maalin Joogta ah tan iyo Qiyaamada waa kee Allaha Alla ka soo Hadhay ee idiin keeni Habeen aad ku Xasishaan Dhexdiisa miyeydaan wax arkayn?' "[31]



## Su'aalo jawaabo sugayaa

"Waxaad Dhahdaa mahad Alla iska leh Nabadgalyana ha Ahaato Addoomadiis uu Doortay Korkooda, ma Alla Khayr roon mise waxay la Wadaajin. Ma Allaha Abuuray Samoo-yinka iyo Dhulka oo idiinka soo Dejiyey Samada Biyo oo kasoo Bixiyey Beero Qurux Badan (Miyaa Khayrroon mise waxaad Caabudaysaan) ma kari kartaan inaad Soo bixisaan Geedkeeda, ma Ilaah kalaa jira Alla Miciis, waase Qoom lumay. Mise (waxaa Khayr roon iyaga) mise Allaha ka Yee-lay Dhulka Sugnaan, oo u yeelay wabiyo, buuro oo u Yeelay

29. 21/Anbiyaa, 22
30. 23/Mu'minuun, 91
31. 28/Qasas, 71-72

Badaha Dhexdooda Soohdin, ma Ilaah kalaa Jira Alla Miciisa, Badankooduse wax ma Oga. (Waxa kheyr roon iyaga) mise Allaha Aqbala ka Dhibban markuu Baryo oo ka Fayda Xumaanta (Dhibka) idinkana Yeeli kuwa Dhulka u Hadhi (Iska Baddala), ma Ilaah kalaa Jira Alla Miciisa, Yaraa Intaad wax Xusuusanaysaan. (Waxa kheyr roon iyaga) Mise Allaha idinku Toosiya Mugdiyada Barriga (Dhulka) iyo Badda Dhexdeeda, oo ah kan Dira Dabaylaha oo Bishaarayn Naxariista Alla (Roobka) hortiisa, ma Ilaah kalaa Jira Alla Miciisa, Alla ka Sarreeya waxay la Wadaajin. (Waxa kheyr roon iyaga) Mise Allaha Billaaba Khalqiga (Abuurkiisa) Haddana soo Celin oo ah kan Idinka Arzaaqa Samada iyo Dhulkaba, ma Ilaah (kalaa) Jira Alla Miciisa, waxaad Dhahdaa Keena Xujadiinna Haddaad Run Sheegaysaan.' "[32]



Ma jirin wax dood ah oo taariikhda soo maray oo ku saabsan jiritaanka Allaha sarre marka laga reebo dadaal aan micno lahayn, oo ay sameeyeen dad jaahiliin ah. Ma jirin wax dood ah oo ku saabsan in isaga (swt) uu mudan yahay in la caabudo. Dooddu waxay ahayd arrinta ah inuu Ilaaha keliya yahay iyo in kale. Yacnii,"Ma isaga keli baa in la caabudo, mise waxyaabo kale in dhexda la soo geliyo, oo isaga lala caabudi karaa?" Arrintaas ayaa ah midda la isku khilaafay. Alla (swt) wuxuu aayaddahaasi kusoo afjaray doodahaas ka dhashay bulshooyinkii ka leexday fidhrada iyo waxyiga.

Haddii loo fiirsado, dhammaan caddaymaha xoogga saaraya inuu Alla yahay Ilaaha keliya ayaa ah mid ku

32. 27/Namal, 59-64

habboon caqliga qofka, maxaa yeelay Alla (swt) wuxuu ku abuuray dadka fidhradaas. Bani'aadamku si dhab ah ayuu u garanayaa inay waajib ku tahay inuu Alla caabudo iyo Alla sare inuu yahay mid keliya:

"(Xasuusta) markaan ku koryeelnay Buurtii, una maleeyeen inay ku soo dhaceyso, kuna nidhi ku qaata waxaan idin siinay Niyad Adag, kuna waana qaata waxa ku sugan si aad u dhawrsataan. (Xusuuso) markuu Rabbigaaga ka soo bixiyey Dadka Dhabarkooda Faracoodii uuna marag uga Yeelay Naftooda, kuna Yiri Miyaanaan Rabbigiin ahayn, oy dhaheenna inaad Rabbigeena tahay yaan Marag Kacnay, inaydaan dhihin Maalinta Qiyaame annagu Waan halmaansanayn kan. Ama aydaan Dhihin waxaa wax la wadaajiyey Aabbayaalkanagii mar hore annaguna waxaan nahay farac ka Dambeeyey ee miyaad noo halaagi waxay faleen Xumo falayaal."[33]



"Wajigaaga u jeedi Diinta adoo toosan (Diintu) waa abuuridda Alla ee Dadka uu ku abuuray, wax badali kara abuurka Allana ma jiro, saasina waa Diinta toosan laakiin dadka badankiisa ma oga."[34]

Tani waa tilmaanta ugu cad ee waxa aynu sheegeyno; Waa xilliyada uu qofku aad u baqo, caqligiisa iyo shucuurtiisa ay lumiyaan shaqadoodu, oo ay kusoo noqdaan Abuurka Alla, Waqtiyadaas fidhradda ayaa soo shaacbaxda, oo qofku wuxuu u jeesan Allaha keligiis ah:

"Waxaad Dhahdaa Yaa idinka badbaadiya Mugdiga Barriga iyo Badda ood u Baridaan Isdullayn iyo Qarsoodi, Idinkoo

33. 7/Acraaf, 171-173
34. 30/Ruum, 30

dhihi Haddaad naga badbaadiso Tan waxaan ka mid Noqonaynaa kuwa Mahadiya. Waxaad dhahdaa: 'Ilaahay waa kan idinka badbaadinaya waxaas iyo dhib kale oo dhan, kaddib waxaad u Shariik yeeshaan (mar kale)'! "[35]

"markay koraan Doonta waxay baryaan Alla iyagoo u keliyeeli Cibaadada, markuu u badbaadiyo (oo geeyo) Barrigana (Dhulkana) markaasay u shariik yeelaan (wax la caabudaan)."[36]

## C. Tafaafiisha ku saabsan ilaahnimada Alla ee Qur'aanka kariimka ah



Hoos waxaan ku xusi doonnaa aayadaha sharraxaya magaca İlaah. Aayadahaani waa aayadaha tawxiidka ee muxkamka ah, laga sugay, oo kaddibna laga faahfaahiyey xagga Allaha Al-Xaakimka iyo Al-khabiirka ah. Mid kasta oo iyaga ka mid ah waxa uu ka kooban yahay qodobbo cad cad, la fahmi karo oo fudud sida Qorraxda oo kale. Addoonkii si fiican u akhriyaa aayadaha, una fiirsadaa micnahooda, wuxuu sida ugu wanagsan u fahmayaa magaca ilaah:

"Ilaahigiina waa Ilaah keliya. Ilaah kale ma jiro isaga mooyee. Isagu waa Ar-Raxmaan (oo nuxurkiisa naxariista leh), iyo Ar-Raxiim (oo naxariistiisa u fidiya addoommadiisa)."[37]

"Alla ilaah kale ma jiro isaga mooyee. Al-xay (ka leh nolosha iyo kan nooleeya) waa Al-Qayyuum (oo aan u baahnayn wax jiritaankooda, wax walba jiritaankoodu isagay ku xidhan yihiin). Lulmo iyo hurdo midna ma qabato isaga. Waxa sa-

35. 6/Ancaam, 63-64
36. 29/Cankabuut, 65
37. 2/Baqarah, 163

mooyinka iyo dhulka ku sugan isagaa iska leh. waa kuma kan ka shafeeci agtiisa (Alla) idankiisa mooyee, Isagaa og waxa hortooda iyo gadaashooda ah. Ma koobayaan cilmigiisa wuxuu doono mooyee. wuxuuna u waasac noqday kursigiisu Samooyinka iyo Dhulka. Ilaalintooda (Samooyinka iyo Dhulka) kuma Culays Alla. Waana sareeye weyn."[38]

"Igraah (Qasab) ma'aha Diinta galideedu, Hanuunku (xaqa) waa ka cadaaday (soocnaaday) Baadida Qofkii ku kufriya (ku gaalooba, ka bari noqda) Dhaaquut ee rumeeya Alla, wuxuu qabsaday xarig (guntay) sugan oo adag (Kelime Tawxiid) iyo wuxuuna soo galay (İslaamka) Allana waa Samiic' (waa kan maqla oo ajiiba ducada), waana Al-Caliim (wax walba og)."[39]

"Alla wuxuu Qirayaa inaan Alla mooyee Ilaah kale (cibaadada xaq u leh) aanu jirin, Malaa'igtuna (way qiri) iyo kuwa Cilmiga leh ee Maamula Cadaalada, ilaah kale ma jiro isaga mooyee. Waa Al-Caziiz (waa kan wax walba ka adkaada), waana Al-Xakiim (xukunka iska leh iyo xikmad badane ah)."[40]

"Waxaad dhahdaa Nabiyow Ahlu Kittabow u kaalaya kelimo (odhaah) aan u simanahay annaga iyo adinkaba oo ah inaynaan caabudin Alla mooyee, oynaan lana wadaajin waxba, kana yeelan qaarkeen qaar Rabbiyaal, hadday jeedsadaanna waxaad dhahdaa: marag ka noqda inaynu nahay dad muslimiin ah/ka mid ah addoomada ka taga shirkiga ee tawxiidka Alla ula noqda.' "[41]



38. 2/Baqarah, 255
39. 2/Bakarah, 256
40. 3/Cali-Cimraan, 18
41. 3/Cali-Cimraan, 64

"... Isagaa iska leh waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan. Allana ku filan wakiil."[42]

"Waxaad Dhahdaa yaa ugu Wayn Marag waxaad Dhahdaa Alla Maragga Dhexdeena ah, waxaana lay waxyooday Quraankan inaan idiinku Digo Idinka iyo cidduu Gaadho, Idinku ma waxaad Marag Furaysaan Inay Alla la Jiraan ILaahyo kale, waxaad Dhahdaa ma Marag Furayo (Saas) Waxaad Dhahdaa Alla waa uun ilaaha keliya Anigana waxaan ka Bari ahay waxaad la Wadaajinaysaan.' "[43]

"Kaasi waa Rabbigiin isaga mooyee ILaah kale ma jiro wax kastana isagaa Abuuray ee Caabuda wax walbana isagaa u Wakiil ah (ILaaliya)."[44]



"Raac nabiyow waxa lagaaga Waxyooday Xagga Rabbigaa Alla mooyee ilaah kalana ma jiro kana Jeedso Mushrikiinta."[45]

"Waxaad Dhahdaa wuxuu igu Hanuuniyey Rabbigey Jid Toosan Diin Sugan oo Diinti (Nebi) Ibraahim isagoo toosan oon gaalada ka mid ahayn. Waxaad Dhahdaa Salaaddayda, waxaan Gawraci, Noloshayda iyo Geeridaydaba Allaha barbaariya Caalamka ayaa iska leh. Wax la Wadaagana ma jiro, Saasaana lay faray Anigaana ugu Horreeya Muslimiinta/ Addoomada ka tagay shirkiga oo Alla ula noqday tawxiid.' "[46]

"Waxay ka yeesheen culimmadoodii iyo suufiyadoodii Rabbiyaal ilaahay ka sokow iyo ciise ibnu maryama waxaan

42. 4/Nisa, 171
43. 6/Ancaam, 19
44. 6/ Ancaam, 102
45. 6/ Ancaam, 106
46. 6/ Ancaam, 161-163

cibaadada ilaahay kali ahaynna lama farin. Alla mooyee ilaah kalana ma jiro (oo cibaadada xaq u leh) waana ka nasahan yahay waxay la wadaajin."[47]

"… "waxaad dhahdaa waa Rabbigey. Ilaah kale ma jiro isaga mooyee. Isaga keliya ayaan tala saartaa, xagiisaana u noqon.' "[48]

"Wuxuuna yiri Alla ha Yeelanina Ilaahyo Labo ah Alla waa uun Ilaah keliya ee Aniga uun iga Cabsada. Alla waxaa u sugnaaday waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan, waxaana u sugnaaday Diin (Cibaado) Joogta ah ee Alla cidaan ahayn yaad ka dhawrsanaysaan' "[49]

"waxaad dhahdaa waxaan uun ahay anigu bashar (dad) idinkoo kale ah, waxaa lay waxyooday in uun yahay ilaahiin ilaah keliya, ruuxiise dooni la kulanka Rabbigiis ha falo camal fiican, yuuna la wadaajinna cibaadada Rabbigiis cidna.' "[50]



""Alla … ilaah kale ma jiro isaga mooyee. Magacyada ugu quruxda badan isagaa iska leh."[51]

"Anigu waxaan ahay Alla Ilaah (kalana) ma jiro Ani mooyee (oo cibaadada xaq u leh) i Caabud, Oogna Salaadda Xuskayga."[52]

""Ilaahigiina waa Alla keliya … Ilaah kale ma jiro isaga mooyee. Wax walbana wuxuu ku koobay aqoontiisa."[53]

47. 9/Tawbah, 31
48. 13/Racad, 30
49. 16/Naxl, 51-52
50. 18/Kahf, 110
51. 20/Dhaaha, 8
52. 20/Dhaaha, 14
53. 20/Dhaaha, 98

"Waxaad dhahdaa waxaa lay waxyooday in Ilaahiinnu yahay Ilaah keliya. "Ma ka mid noqon doontaan Muslimiinta/ Addoomada ka taga Shirkiga ee Tawxiidka Alla ula noqda?' "[54]

"… Ilaahiinna waa Ilaah keliya ee u Hoggaansama una Bishaaree, kuwa qalbi Xasilloon ee (Alla isu dhiibay)"[55]

"Allahiina waa Ilaaha isaga mooyee aan Ilaah kale Jirin, Mahad buu mutaa Adduun iyo Aakhiraba, Xukunkana isagaa iska leh Xaggiisaana loo Noqon."[56]

""Ha baryin ilaah kale oo Alla la jira. Ilaah kale ma jiro isaga mooyee. Wax kastoo isaga ka soo hadhayna way halaagsami. Xukunka isagaa iska leh. Xaggiisaana laydiin soo celin."[57]



"Dadow xusuusnaada nicmada Alla korkiina ah, abuure kale ma jiraa oo Alla ka soo haday oo idinka arsaaqa samada iyo dhulka, Alla mooyee ilaah kale majiro (Haddaba) sidee uga leexanaysaan (Towxiidka oo aad u noqotaan kuwa u shariik yeela)?"[58]

"Wuxuu idinka abuurey naf keliya (Nebi aadam) markaasuu Alla ka yeeley (ka abuurey) xagga aadam haweeneydiisi (Xaawo) wuxuuna Alla idiin soo dajiyey xoolaha siddeed nooc oo ka mid ah, wuxuuna idinku abuurey uurka hooyadin abuurid ka dambeyso abuurid saddex mugdi dhexdooda saasna waxaa yeela Rabbigiin idin barbaariya, isagaana iska leh xukunka, Alla mooyee ilaah kale majiro, sidee uga leexanaysaan (Towxiidka oo aad u noqotaan kuwa u shariik yeela)!"[59]

54. 21/Anbiyaa, 108
55. 22/Xaj, 34
56. 28/Qasas, 70
57. 28/Qasas, 88
58. 35/Faadhir, 3
59. 39/Zumar, 6

"Allaha Al xayyi ah (nool oo wax walbana noolal siiyaa), ilaah aan isaga ahaynna ma jiro ee barya (caabudana) idinkoo u keliyeeli Diinta, mahadna waxaa iska leh Rabbiga Caalamka."[60]

"Alla waa macbuudka Samada iyo macbuudka Dhulka,Waa Al-Xakiim (oo leh xukun iyo xikmad), waana Al-caliim (wax walbana og)."[61]

"Ilaahay mooyee Alla kalane ma jiro, isagaa wax nooleeya waxna dila, waana Rabbigiina iyo Rabbiga Aabbayaalkiinii horreeyey."[62]

"Ogow (kuna sugnow Nebiyow) inaan Alla mooyeen Ilaah kale jirin, una dembi dhaaf waydii naftaada iyo mu'miniinta, Allana waa ogyahay dhaqdhaqaaqiinna iyo nagaadigiinnaba."[63]

"Alla mooyee Ilaah kale ma jiro, waxa maqan iyo waxa joogaba waa ogyahay, waa Ar-Raxmaan (nuxurka naxriista iska leh) iyo Er-Raxiim (oo u naxariista addoomadiisa). Waa Alla; Ilaah kale jirin isaga mooyee. Waa Al-Maalik (waa kan leh xukun buuxda, mulkigiisa siduu doono u tasarruf gareeyo). Waa Al-Qudduus oo aan cillad lahayn). Isagu waa As-Salaam (oo ka fog ceebaha oo dhan, nabadna siiya addoomadiisa). Waa Al-Mu'min (ka siiya iimaanka iyo kalsoonida quluubta). Waa Al-Muhaymin (ka wax walba gacanta ku haya oo leh awood iyo xukun dhammaystiran). Waa Al-Caziiz (waa mid caziiz ah, oo wax walbana ka adag). Waa Al-Jabbaar (Kaa qalbi jabka ka saara, wax walbana hoos u dhiga). waa



60. 40/Mu'min (Gafir), 65
61. 43/Zukhruf, 84
62. 44/Dukhaan, 8
63. 47/Muxammed, 19

Al-Mutakabbir (Kan ugu weyn, oo kibir iska leh) waana ka nasahan yahay waxay Cibaadada kula wadaajinayaan. Waa Alla; Al-Khaaliq waa kan wax walba ka abuura waxba. Al-Baari (oo wax u abuura si aan cillad lahayn oo is waafaqsan). Waa Al-Muwassir (u sawira qaabka uu rabo abuurkiisa). Magacyada ugu fiican isagaa iska leh. Waxaa u tasbiixsada waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan. Waa Al-Caziiz (kan wax walba ka adkaada), waana Al-Xakiim (xukunka iska leh iyo xikmad badane ah)."[64]

"Alla … Ilaah kale ma jiro isaga mooyee (oo mudan in la caabudo). (Marka) Mu'miniintu ha tala Saarteen Alla keliya."[65]

"İsagu waa Rabbiga Qorrax ka soobax iyo u Dhacid, isaga Mooyee ilaah kalena ma jiro ee ka yeelo wakiil (la cuskado)."[66]



Qofkii si fiican u akhriyaa, oo u fiirsada aayadahan, arrinta ah in Alla (swt) loo aqbalo ilaah keliya, yacnii "Laa'ilaaha illallah", waxaa la fahmayaa dhammaan tafaasiilkeeda.

## D. Kuwa Kasoo Horjeesta ugu yeerida ilaaha keliga ah ee xaqa ah (Laa'ilaaha illallah)

Sidaan horay u soo sheegnayba, ma jirin wax dood ah oo ku saabsan jiritaanka iyo ilaahnimada Alla. Dooddu waxay ku saabsan tahay isaga (swt) inuu yahay ilaah keliya. Rususha markii ay bulshada ugu yeereen inay caabudaan Alla oo keliya, doodda ayaa bilaabatay, waxaana ka falceliyay qayb ka mid ah bulshada:

64. 59/Xashr, 22-24
65. 64/Tegabun, 13
66. 73/Muzzammil, 9

**Nebi Nuux** (cs) **markuu ugu yeeray qoomkiisii si ay u aqbalaan Alla** (swt) **inuu yahay ilaah keliya, qoomkiisii waxay yiraahdeen:**

"Waxay ku yiraahdeen: Haddaadan joojin kan Nuuxow waxaad ka mid noqon doontaa kuwa la dhagxiyey oo la eryay.' "[67]

**Waxay ku** yiraahdeen **Shucayb** (cs)**:**

"Waxay dheheen Madaxdii Iskibrisay oo Qoomkiisii ah waxaannu kaa Bixin Shucaybow adiga iyo kuwa ku Rumeeyey Magaaladeena ama waxaad kusoo Noqoneysaan Diinteena, wuxuuna yiri oo haddaan doonayn?' "[68]

**Waxay ku** yiraahdeen **Ibraahiim** (cs)**:**

"(Aabihiis) wuxuu yiri ma waxaad ka jeedsanaysaa ilaah-yadayda Ibraahimow? Haddaadan joojin (xaaladdan), waan ku dhagaxyeyn doonaa. Iga tag wakhti dheer."[69]

**Waxay Rasuulka** (scw) **ku** yiraahdeen:

"Ma wuxuu ka dhigay ilaahyadii ilaah keliya, arrintaasi waa wax lala yaabo. Wuu kala tagay shirkii (madaxdii) kamidka ahayd, waxayna isu dhahen war socda oo ku samra (kusug-naada) Ilaahyaalkiina, arrintaani waa wax la idinka rabo.' "[70]

**Waxaa jira laba qodob o o ka dhan ah falcelintan oo soo jiidanaya dareenkayaga:**



67. 26/Shucara, 116
68. 7/Acraaf, 88
69. 19/Maryama, 46
70. 38/Saad, 5-6

a. İnay si adag uga soo horjeestaan dacwada iyagoon dhegeysan tafaasiilkeeda.

b. Kuwa kasoo horjeesta ma aha dad caadi ah ee waa dadka bulshada maamula oo mansab ku leh bulshada dhexdeeda.

Haddaba waa maxay sababtu?

Haddaad doonaysaan, aan dib ugu fikirno aayadaha lagu soo sheegay qaybta "Tafaafiisha ku saabsan ilaahnimada Alla ee Qur'aanka kariimka ah": Sida ku cad aayadahaan, in Alla keliya ilaah laga yeeshto; Waa in isaga uun la caabudo oo aan loo shariik yeelin, lagana hor yimaado dhammaan dhawaaqiinta la caabudo isaga ka sokow.



Alla (swt) oo ilaah laga yeesho waa in la aqbalo inuu ka nasahan yahay ceebaha oo dhan, lammaana lahayn; in wax walba u hoggaansamaan xukunkiisa iyo go'aankiisa; inuu yahay kan maamula dhulka iyo samooyinka; in qofna uusan u shafeeci karin idankiisa mooye; in wax kasta oo dhulka iyo samada ku sugani ay u hoggaansamaan cilmigiisa iyo inuu yahay ka keliya ee ilaaliya dhulka iyo cirka, iyo waxa ku sugan.

Alla oo ilaah laga yeesho; Micnaheedu waa in loo hoggaansamo Alla (swt) xukunkiisa iyo in la ictiqaado mulkiga inuu isagu leeyahay, oo la ictiqaado isaga keliya inuu ka taliyo.

Alla (swt) oo ilaah laga yeesho; Waa inaan isaga u aqbalno inuu wakiil noo yahay, arrin kasta oo aan isaga

u wakiilano; Waa inaan isaga oo keliya baryino xilliyada barwaaqada iyo cidhiidhigaba; In la ictiqaado inay dheefta iyo dhibtuba ay gacantiisa ku jiraan; Waa in ducada iyo Alla bariga, nolasha iyo geeridaba laga dhigo mid isaga u gaar ah.

Alla (swt) oo ilaah laga yeesho; Waa in la aqbalo inuu addoomadiisa u dhow yahay, inaan loo baahnayn dhex dhexaadiye, inuu addoomadiisa u soo diray rususha jacayl iyo naxariis awgeed, iyo in isha keliya ee diintu tahay waxyi iyo rususha.

Waa waxa cabsi geliyaa dhawaaqiinta isla weyn. Sababtoo ah "Laa'illaaha illallah" dadka ayey soo toosisaa. Waxa ay kasoo saartaa shirkiga, taas oo ka dhigaysaa mid u nugleyn in la gumeysto, oo waxay u soo saartaa tawxiidka, yacnii caabudida hal ilaah oo keliya. Waxa ay kusoo uruurisaa shucuurta dadka iyo fikirkooda hal "Ilaah keliya". Dabcan tani waa wax aan jeclaan doonin Dhawaaqiinta isla weyn.



Yacnii; Kuwa soo xukumayay bulshada taariikhda oo dhan, waxay ahaayeen koox laga tiro badan yahay. Kooxdan, oo guud ahaan ka kooban qoys sare (!) Waxay gumeystaan bulshada iyagoo kala qaybiya:

**Waxay kala qaybiyaan diinta:**[71] Waxay samada ku ekeysiyaan Allahii abuuray iyaga. Waxayna ka yeelaan dhulka ilaahyo ku hadla magaca Alla, una gudbiya waxyaabaha ay dadka rabaan. ilaahyadaani waa no-

71. "Kuwa ku kala tagay Diintooda oo noqday Kooxo, ka mid ma tahid, Amarkoodana Alla umbaa iska leh markaasuu uga warrami waxay Falayeen.." (6/Ancaam, 159)

ole aan waxba arkayn, maqali karin, oo hadli karin. Mar sanam, marna taallo, marna xabaalo… Sababtaa awgeed waxay u baahan yihiin af-hayeen u gudbiya rabitaankooda iyo amarkooda. Haddaba yay u hadlayaan ilaahyadan? Kuwii u magacaabay ilaahyo, yacnii dhawaaqiinta. Sababo aan la garanayn awgood, ilaahyadaani had iyo jeer waxay ka hadlaan danaha dadkani. Dadkaasi waa hadhkii Alla (swt) ee dhulka. Iyaga dartood ayaa midnimo siyaasadeed iyo nabad lagu gaaray. Waa inaan dhammaanteen addeecno, oo aan taageernaa si shuruud la'aan ah. Dadkaas ayaa Alla agtiisa aad ugu qiimo badan, waxaa la inoogu irzaaqaya, oo la inoogu deeqaya nimcooyinkiisa iyaga dartood; Sidaa darteed waa inaan addoomo iyo adeegayaal u noqonno iyaga, oo aan isu dhiibno sidii qofka dhintay marka la dhaqaayo isu dhiibo oo kale!



**Waxay kala qaybiyaan bulshada: Mid waa Banaadiri, ka kalena waa Reer Koonfur Galbeed, mid waa Reer Hirshabeelle, ka kelena waa Reer Galmudug, mid waa Reer Khaatumo, kuwa kelena waa Soomaaliland iyo Puntland… Mid waa taajir, ka kalena waa sabool. Mid wuxuu taageeraa kooxdaas kubbadda cagta, ka kalena koox kale. Mid waa laandheere, ka kalena waa laan gaab. Mid waa reer magaal, midna waa reer baadiyo… Waxay bulshada u kala qaybiyaan koox koox dhinac walba ah, khilaafaadkii u dhexeeyayna waxay u beddelaan cadaawad, iyagoo u adeegsanaya warbaahinta. Haddii warbaahinta guud aysan ku fil-**

**neyn, ururo gaar ah ayaa la sameeyaa. Kuwaas; waxay noqon kartaa "Waaxda Dagaalka Gaarka ah", waxay noqon kartaa "Ururka Qorshaynta iwm".**

**Waxay kala qaybiyaan qofka iyo nafsadiisa: Xitaa arrimaha maalinlaha ah, qofku wuxuu ku jahware-eraya Wuxuu ku lebbisan lahaa; Kuwa faashiyoon-ka waxa ay rabaan way ka duwan yihiin iyo waxa ku habboon way ka duwan yihiin, iyo waxa xaaladdiisa dhaqaale u saamaxdo way ka duwan yihiin dhamma-antood. Musalsalka TV-ga ee uu daawado waa kala geddisan yihiin caadooyinka iyo dhaqanka deega-anka uu ku nool yahay… Markuu doono inuu xog ka helo arrimaha siyaasadda; Wargeysyada iyo TV-yada, iyo baraha bulshada… qof walba wax kale buu sheegayaa. Qofkaana waxa uu ku wareerayaa wuxuu rumaysan lahaa.**



Qofka diintiisa iyo qaab-dhismeedkiisa bulsheed, iyo adduunkiisa la kala qaybiyey, waxuu u furan yahay dhammaan noocyada hagidda iyo gumaysiga, iyo ade-egsiga. Kani waa nooca qofka lakabka sare/Eliteska ay rabaan inay helaan.

Dhanka kale, Laa'ilaaha illallah waxa loola jeedaa mi-dnimada Alla (swt) oo la dhigo udub dhexaadka nolosha. Laa'ilaaha illallah waa wax alla wixii ay burburiyaan gu-masytaha; In loo midoobo jihada ilahaay, oo meesha laga saaro dhammmaan asbaabaha la isku dulleysto. Qofka yiraahda "Laa'ilaaha illallah" noloshu ujeeddo cad bay u leedahay, sababta uu u dhimanayo wuu ga-

ranayaa, xaqana cabbirkeeda ayuu bartay. Qofkaas oo kale wuxuu ka fogyahay in la gumeysto. Si kasta oo qof wax ugu sheego, halka uu u soo jeesan doono, oo weydiin doono xukunkeeda waa Alla oo ah Ilaaha keliya. Dhawaaqiinta, waxay aad uga soo horjeedaan dacwada tawxiidka, maxaa yeelay waxay og yihiin inaanay gumeysan karin kuwa si dhab ah u yiraahda "Laa'ilaaha illallah", iyo waxay kale ay og yihiin inay waayi doonan waxyaabo badan, maxaa yeelay qof kasta wuxuu u sinnaaday bulshada.

## IV. Sida Khaldan ee loo sharraxo kelime tawxiidka



Markii wax laga weydiiyo micnaha Kelime Tawxiidka, dad badan waxay dhahaan "Ilaah kale ma jiro oon Alla ahayn". Haddaba, "Ilaah kale ma jiro oon Alla ahayn" maxaa loola jeedaa? Haddi aad waydiiso jawaabtu inta badan waa: " isagaa na abuuray, isagaa na arsaaqa."

Si kastaba ha ahaatee, sidaan horay u soo sheegnayba, tani ma aha micnaha Kelime Tawxiidka. Mushrikiintii reer Maka waxay ka loo ogaayeen inuu Alla yahay abuure iyo arsaaqe, laakiinsee taasi may keenin inay soo galaan xayndaabka Islaamka, kamay hor istaagin Rasuulka (scw) inuu la dagaalamo iyaga.

Waxa aayadahan soo socda lagu sheegay in mushrikiintu aqbalayaan Alla (swt) inuu abuuraha iyo arzaaqe yahay:

"haddaad waydiiso yaa abuuray samooyinka iyo dhulka oo sakhiray Qoraxda iyo Dayaxa, waxay odhan ilaahay, marka

sidee tawxiidka ugu jeesanayaan oo shirkiga kaga doorbidayaan. Allaa u waasiciya rizqiga ruuxuu doono oo addoomihiisa ah, kuna cidhiidhya (kuu doono), Allana wax walba waa ogyahay. Haddaad waydiiso yaa ka soo dajiya Samada Biyo oo ku nooleeya dhulka intuu dhintay (abaaroobay) kaddib waxay odhan Alla, waxaad dhahdaa mahad Alla iska leh, badankooduse wax ma kasayaan"[72]

"waxaad dhahdaa yaa idinka Arsaaqa Samada iyo dhulka, yaana hanta maqalka, Aragyada, yaana kasoo bixiya wax Nool wax dhintay, kana soo bixiya wax Dhintay wax Nool, yaana Maamula Amarka (koonka) waxay ku odhan Alla, waxaad dhahdaa miyeydaan Dhawrsanayn?' "[73]

Mushrikiinta reer Maka kuma ekeyn arrintaas uun; Waxay kaloo ahaayeen kuwo tukan jiray oo soomi jiray, oo xajin jiray, oo quudin jiray dadka xajka yimaada, oo dadka akhlaaqda wanaagsan ku mahadin jiray.



Sida laga fahmi karo aayadaha, in qofku ogyahay Alla (swt) inuu yahay abuuraha, arsaaqe, wax walba maamula, wax nooleeya oo wax dila; qofkaasi masoo gelineyso xayndaabka Islaamka. Hadday sidaas tahay micnaha Kelime Tawxiidka,wax micno ah kuma fidhin lahayn in Mushrikiinta Maka loogu yeero Kalime Tawxiidka. Sidaan kor ku soo xusnay, micnaha iyo nuxurka Kelime Tawxiid waa; in Alla lagu mideeyo cibaadada iyo in lagu gaaloobo ilaahyada beenta ah ee la caabudo isaga ka sokow, oo la yiraahdo "La".

72. 29/Cankabuut, 61-63
73. 10/Yuunus, 31

Waxaan la yaabanahay dadka maanta yiraahda "Laa'ilaaha illallah" oo kelmeddaan keliya ka fahmaya in kan keliya ee wax abuuray uu yahay Alla (swt), ma soo galaan xayndaabka Islaamka? Haddii dadkaasi ay soo geli karaan xayndaabka Islaamka fahamkooda khaldan awgood, maxay ahayd mushrikiintii reer Maka waxa ka saaray xayndaabka Islaamka?

Maxaa yeelay, dhibaatadu ma ahayn inay aqbalin Alla (swt) inuu yahay abuuraha. Dhibkoodu wuxuu ahaa inay cibaadada u jeediyaan Alla ka sokow waxyaabo kale. Tusaale ahaan, markay baryootamayaan, waxay ku baryootami jireen sanamyada dadka ay u rumaysan yihiin inay saalixiin yihiin, maxaa yeelay waxay ahaayeen dambiilayaal. Waxa hubaal ah inay u baahnaayeen cid dhex dhexaadisa iyaga iyo ilaahay oo u shafeecda…



Sida shalay la mid tahay maanta! Dadka u fahamsan kelmedda "Laa'illaaha illallah" inay micnaheedu keliya tahay; inuu Alla keliya yahay abuuraha, waxay rajeeyaan inay kaalmeyn doonaan dad geeriyooday ee ay u aaminsan yihiin inay saalixiin yihiin. Xitaa sababahoodu waa isku mid: "Yaan nahay? Waxaan nahay dad dambi badan oo tabar yar, laakiinsee Awliyadu waa dad qiimo ku leh iyo saalixiin ka ah Alla agtiisa. Dadkaasna waa noo shafeecayaal."

"Diinta khaaliska ahna waxay u sugnaatey Alla, kuwa ka yeesha Alla ka sokow awliyo waxay odhan uma caabudno inay Alla noo dhaweeyaan mooyee, Allana kala xukumi

dhexdooda waxay isku khilaafeen, Allana ma hanuuniyo ruux beenaale iyo gaal ah."[74]

Hase yeeshee, qur'aanka, ducada waxaa loo adeegsaday micnaha cibaadada. Maalintaas dadku cibaadadooda (ducadoodu) waxay u jiheyn jireen dhagaxyada, waxayna noqdeen kuwo gaalo ah. Inkastoo ay Alla garteen, oo ay rumeeyeen jiritaankiisa, haddana waxay noqdeen kuwo gaalo ah. Waxa aan la yaabanahay waa maxay xukunka dadka maanta ducada u jiheeya cid aan Alla ahayn, oo Alla u aqoonsan inuu yahay abuuraha, oo u haysta inay arrinkaani kusoo galeen xayndaabka Islaamka?



Haddana mushrikiintii waagaas waxay garanayeen Alla oo rumaysteen, laakiinsee intay xukunka Ilaahay siin lahaayeen, waxay siiyeen madaxda ama ugaasyada beesha. Markay sidaas yeeleen, garashadooda iyo rumayntooda Alla may soo gelin xayndaabka Islaamka.

Maanta, dadka qaar oo ka fahma kelime tawxiid inuu Alla keliya yahay abuuraha, waxay awoodda maamulidda codad ku siiyaan madaxda, xisbiyada iyo xildhibaannada, iyo ugaasyada beesha. Waxaan la yaabanahay yaa u oofiyey tan? Sidoo kale Yuhuuddu waxay ku kaceen wax kasta oo shirki ah iyo xaaraan ah, waxayna dhaheen waxaan nahay addoomo uu Alla jecel yahay iyo wiilashiisa, naartana mana taabanayso ayaamo tirsan uun mooye, laakiin tuhunnadan ma badbaadin iyaga:

74. 39/Zumar, 3

"Waxay dhaheen yuhuud nama taabanayso naarta waxaan ayaamo tirsan ahayn, waxaad dhahdaa: " ma ballan baad ka qaadateen Alla agtiisa (Arrintan)? (Hadday saas tahay) Alla ma ka baxo ballankiisa. Mise waxad Alla ka sheegaysaan wax aydaan ogayn?' Saas ma'aha ee ruuxii kasbada xumaan oo uu koobo gafkiisu ciddaasi waa asaxaabta naarta, wayna ku waari dhexdeeda."[75]

Sida laga fahami karo oo aan soo sheegnayba, si qofku wax ugu tarto kelime Tawxiid, oo u soo galo xayndaabka Islaamka, waa inuu fahmaa oo ku dhaqmaa waxa ay ka dhigan yihiin "Ilaah" iyo "Cibaadada", kuwaas oo kala ah nuxurka kelmeddaan. Dabcan arrimahaani waa in loo fahmaa oo loogu noolaadaa sida Qur'aanka iyo sunnada lagu sheegay, kuwaas oo ah tilmaamaha hanuunka, oo aan ahayn sidii diintii awoowyaasheen oo kale.



75. 2/Baqarah, 80-81

# SHURUUDAHA KELİME TAWXİİD

Qaybtaan waxaan kaga hadli doonnaa shuruudaha Kelime Tawxiid. In la ogaado shuruudaha Kalime Tawxiidku waxay la mid tahay in la ogaado micnaheeda. Sida aynu hoos ku sharxi doonno, in wax ay shardi ku xiran yihiin waa wax lama huraan ah. Si la mid ah sida ay weysadu shardi ugu tahay salaadda. Salaad bilaa weyso la'aan ah ma aha mid Alla (swt) agtiisa ka ansaxmeyso. Sidoo kale haddii laga tago mid ka mid ah Shuruudaha "Laa'ilaaha illallah", qofka waxba uma tarayso.

Faa'iidooyinka Kelime Tawxiidka ay leedahay waxaan u kala qaadi karnaa labo:

Faa'iidooyinka adduunka ee ay leedahay

Faa'iidooyinka aakhiro ee ay leedahay

Faa'iidada adduunka ee ay leedahay; Waxa ay qofka ku dartaa mid ka mid ah ummadda Islaamka, kana dhigaysaa inuu ka faa'iidaysto dhammaan xuquuqaha diineed ee u yaalla Muslimiinta.

Faa'iidada aakhiro ee ay leedahay; Waa inay qofka ka ilaaliso Naar lagu waarayo oo ay u sahlayso inuu galo janno lagu waarayo.

Si ay qofka salaadda wax ugu tarto waa inuu buuxiyaa shuruudaheeda sida inuu weyseysto, qiblada u jahaysto, iyo inuu asturo cawradiisa oo kale, si la mid ah si ay qofka wax ugu tarto kelime tawxiid, waa inuu buuxiyaa shuruudaheeda. Haddii kale "Laa'ilaaha illallah" la odhanayo, iyadoo aan shuruudaheeda la buuxin waxay la mid noqonaysaa salaad bilaa weyso la'aan la tukaday oo kale.

**Shareecada Islaamka, shuruud waxaa lagu qeexay sidatan:**



"Markii aysan iyadu ahayn, buriya shuruudii lagu xiray; markii ay meesha ka baxdo shuruudii lagu xiray ka dhigta mid baabada."'[1]

Qofku hadduu salaadda bilaabo isagoon weyseysan, salaaddaasi ma'aha mid ansaxayso. Sidoo kale haddii weysada ka burto goorta uu tukanayo, salaaddiisu way burtay, maxaa yeelay waxaa meesha ka maqan shardigii salaadda ku ansaxi lahayd.

Sidaa darteed ka hor inta aanay camal la samayn, shuruudo waa in la helaa lana ilaaliyaa ilaa ficilkaas laga dhammeynayo. Shuruudaha "Laa'ilaaha illallah" ay leedahay: waa in loo hoggaansamaa lana ilaaliyaa shuruudaheeda ilaa neefta u dambeyso, maxaa yeelay

1. Usûlu'l Fıkhi'l İslâmî, eeg.104

waa lama huraan si ay u noqoto mid sugan oo ansax ka ah Alla (swt) agtiisa.

Arrin kale oo muhiimka ah oo ku saabsan shuruudaha Kalime Tawxiidku waa tan: Shalay, Dhawaaqiintu waxay isku dayayeen inay bulshada ka fogeeyaan oo ka hor istaagan "Laa'ilaaha illallah":

"Ma wuxuu ka dhigay ilaahyadii ilaah keliya, arrintaasi waa wax lala yaabo. waxayna isu dhahen war socda oo ku samra (kusugnaada) Ilaahyaalkiina, arrintaani waa wax laynala dooni."[2]

"Waxayna ahaayeen marka lagu dhaho Laa'ilaaha illallah (Alla mooyee ilaah kale majiro) kuwa iskibriya. Oo waxay dhahayeen ma waxaan uga tagaynaa ilaahyadeena gabayaa waalan?' "[3]



Dhawaaqiinta waxay muddo kooban kaddib ku ogaadeen in dadaalkoodu aanu faa'iido lahayn. Sababtoo ah "Laa'ilaaha illallah" waa mid si toos ah u durayso dabeecadda (fidhrada). Qof kastoo dhegeystay wuxuu dareemayey wax qalbigiisa ku sii qulqulaya. Markii darbiyadii u dhexeeyay dadka iyo baaqa tawxiidka ay dumeen, ayaa bulshooyinku waxay koox koox u soo galayeen diinta Islaamka ... Waxay garwaaqsadeen inaanay hor istaagi karin kalime tawxiidka. Markii ay dadka ka hor istaagi waayeen, waxay isku dayeen inay hadafkooda ku gaaraan iyagoo gudaheeda faaruqinaya, wayna ku guulaysteen. Waxay qalloociyeen, oo illow-

2. 38/Saad, 5-6
3. 37/Saafaad, 35-36

siiyeen saddexdii aasaas ee nuxurka kelime Tawxiid ay soo koobeysay.

Marka hore, micnaheedi ayey qalloociyeen. Waxay illowsiiyeen micnihii ahaa "Alla (swt) in lagu mideeyo cibaadada, inaan loo shariik yeelin, oo lagu gaaloobo Dhawaaqiinta la caabudo Alla ka sokow". kelmeddaani waxay kusoo koobeen micno sidaan oo kale ah "Alla waa abuuraha." Waxayna la simeen iimaankii mushrikiinta Maka oo kale.

Midda labaad, waxay illowsiyeen shuruudaheeda. "Qofkii 'Laa'ilaaha illallah yiraahda jannada ayuu gelayaa", ayey yiraahdeen. Waa run, laakiin si'aan dhammaystirnayn ayay u sheegeen. "Laa'ilaaha illallah" waxay qofka geysaa jannada, laakiinsee goortii shuruudaheeda la buuxiyo uun… Haddii kale, waxay la mid tahay salaad shardigeedu aan la buuxin oo kale, qofkeedana wax faa'iido ah uma keenayso.



Midda saddexaad, waxay illowsiiyeen canaasiirtii burinaysay. Waxay ku khaldameen in haddii mar la yiraahdo "Laa'ilaaha illallah" aanu buri doonin oo ay dadka anfici doonto xaalad kasta.

Saddexdan taxriif ayay Laa'ilaaha illallah ku sameeyeen, waxay u roggeen micno kale. Shalay, Rususha waxa ay bulshada kusoo nooleeyeen kelmeddaan, maantase Dhawaaqiintu, waxay bulshada ku kabuubinayaan kelmeddaan! Shalay, kuwii kelmeddaan lahaa qarawgii Dhawaaqiintu ayey ahaayeen, laakiin maanta kuwa

kelmeddaan yiraahda, addoomada Dhawaaqiintu ayey yihiin!

Waajibka aasaasiga ah ee saaran daaciga dadka ugu yeeraya Tawxiidka, waa dhaqdhaqaaq saddex jibaaran oo soo noolayn ah oo ka dhan ah taxriifyadaan (qalloocan) saddex-geesoodka ah. Waa in basharka la baro micnaha Laa'ilaaha illallah, shuruudaheeda iyo waxyaabaha burinaya.

## I. I. In Lagu Gaaloobo Dhaaquut

In lagu Kufriyo Dhaaquut waa arrin aan laga maarmi karin oo iimaanka ka mid ah, iyo shardiga koo'waad ee Laa'ilaaha illallah ay leedahay. Waxaana daliil u ah aayaddan:



فَمَنْ يَكْفُرْ بِالطَّاغُوتِ وَيُؤْمِنْ بِاللّٰهِ فَقَدِ اسْتَمْسَكَ بِالْعُرْوَةِ الْوُثْقٰى لَا انْفِصَامَ لَهَاۜ وَاللّٰهُ سَم۪يعٌ عَل۪يمٌ

"... Qofkii ku Gaaloobo (ka bari noqdo) Dhaaquut ee rumeeya Alla, wuxuu qabsaday xadhig (guntay) sugan oo adag **(Laa'ilaahaillallah)** iyo wuxuuna soo galay (İslaamka). Alla waa maqle oo ducada ajiiba), iyo waa mid wax walba og."[4]

Af-Carabiga, "مَنْ/Man" waa qayb ka mid ah shuruuda. Alla (swt) waxa uu sheegay laba shardi si loo qabsado xariga adag:

In lagu Gaaloobo Dhaaquut

In la Rumeeyo Alla (swt)

4. 2/Baqarah, 256

Haddaba, waa maxay xadhiga adag oo sugan?

Mujaahid (Allaha u naxriistee) oo ka mid ah muffassiriinta, ayaa yiri xariga sugan waa "iimaanka"; Suddi (Allaha u naxriistee) xariga sugan micneheedu waa "Islaamka" ayuu yiri; Ibni Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) iyo Saciid ibnu Jubeyr (Allaha u naxriistee) waxay caddeeyeen inay tahay kelmedda "Laa'ilaaha illallah". Anas (Allaha ka raalli noqdee) waxa uu sheegay in xariga adag oo sugan uu yahay "Quraanka".[5]

Haa, xariga adag oo sugan waa iimaanka, Islaamka, iyo kelime Tawxiidka. Si loo soo galo wareegyadaas, waa inuu qofku buuxiyaa shuruudaha ah in lagu Gaaloobo Dhaaquut iyo rumaynta Alla, kuwaas oo lagu sheegay qaybta shardiga ah ee bilowga aayadda. Sida Alla (swt) u go'aamiyey siday dadku diinta kusoo geli karaan, ayuu sidoo kale u go'aamiyey shuruudaha kelmeddaan. Marka dadku xaq uma laha inay doortaan. Haddii uu qofku doonayo inay kelmeddaan wax u tarto, oo rabo in camalkiisa laga aqbalo, waa inuu buuxiyaa shuruudaheeda.

Markaan sharraxeynay shardi, waxaan siinay tusaalaha salaadda. Sida aanay salaad bilaa weyso la'aan u ansixin, sidoo kale qofku diinta Islaamka ma soo geli karo isagoon Dhaaquut ku Gaaloobin oo ka bari noqon.

Rasuulku (scw)wuxuu in badan tilmaamay shardiga ah in lagu Gaaloobo Dhaaquut:

مَنْ قَالَ لَا اِلٰهَ إِلَّا اللهُ وَكَفَرَ بِمَا يُعْبَدُ مِنْ دُونِ اللهِ

5. Tefsîru'l Kur'âni'l Azîm, 1/523, Suuradda Baqarah Tafsiirka aayadda 256'aad

حَرُمَ مَالُهُ وَدَمُهُ وَحِسَابُهُ عَلَى اللّٰهِ

"Qofkii yidraahda 'Laa'ilaaha illallah' oo ku Gaaloobo Alla ka sokow waxa la caabudo, naftiisa iyo maalkiisuba xaaraan bay noqdeen. Xisaabtiisuna Alla ayaa iska leh."[6]

"Xadiisyada tilmaamaya "Islaamku wuxuu ku dhisan yahay shan rukun." Tan koowaad waa Ashahaadka. Xadiis uu soo saaray Imaam Muslim, Rasuulku (scw) wuxuu yiri sidatan, isagoo aad mooddo inuu micnihii Kelime Shahaadah ku micneeyey:

""Islaamku waxa uu ku dhisan yahay shan Tiirar: in Alla la caabudo iyo in lagu Gaaloobo isaga ka sokow waxa la caabudo, oogidda salaadda, bixinta sakada, xajka iyo soonka bisha Ramadaan"".[7]

In lagu Gaaloobo Dhaaquutka, waxa ay ka horaysa in la rumeeyo Alla (swt):

Markaynu Ashahaadanayno, waxaynu marka hore nidhaahnaa "Laa ilaaha". Alla ka sokow Waxaan diidnay dhammaan ilaahyada beenta ah ee la caabudo, tani waxay ka dhigan tahay inaan inkirnay dhammaan Dhawaaqiinta oo dhan, dabadeedna nidhaahna "illaa Allaah", waxaan caddaynaynaa ilaahnimada Alla, waxaanan sheegeynaa inaan isaga oo keliya aan caabudeyno, yacnii marka hore waxaan inkirnaa Dhaaquutka, kaddibna Alla ayaan rumaynaa.

6. Muslim, 23
7. Bukhaari, 8; Muslim, 16

Waxaan ku arkeynaa isla qaabkan aayadda 256-aad ee suuradda Baqarah. Shardiga in lagu Gaaloobo Dhaaqu-utka waxa la sheegay ka hor shardiga rumaynta Alla. Shaki la'aan, taasi waxay ku tusinaysaa qiimaha iyo mu-himadda ay Alla (swt) aktiisa ka leedahay arrinka ah in lagu Gaaloobo, oo laga bari ahaado Dhaaquut. Marka laga soo tago muhiimadda ay ka leedahay Alla agtiisa, waxaan kaloo ka xusi karnaa laba sababood oo kale:

In la rumeeyo Alla (swt) iyadoo aan lagu Gaaloobiin Dhaaquut waa wax baadil ah. Sababtoo ah iimaan-kaasi waa iimaan ku wasakhoobay shirki iyo dulmi. Si iimaankaasi u noqdo mid ansax ah, waxaa lagama maarmaan ah in laga daahiriyo shirkiga. Dhaaquut waa waxa la caabudo, yacnii waa waxa Alla lala wadaajiyo. Haddii xitaa qof isagoo inkirin uu rumeeyo jiritaanka Alla, qofkaasi ma rumaysna midnimada Alla, iyo in isaga keliya uu mudan yahay cibaadada. Waxa uu u kala qaybiyey xaqa cibaado, yacnii ilaahnimo, Alla (swt) iyo Dhaaquut...



Marka la eego Taariikhda, dadku, in la rumeeyo Alla (swt) waxay uun u fahmeen rumaynta jiritaankiisa; Wuxuu rumaysnaa inuu jiro, uu yahay abuuraha, laakiinsee wuu aqbali waayay inuu isagu yahay ka keliya ee mu-dan cibaadada, sidaa darteed cid kale ayey iyaga iyo Alla (swt) dhaxdooda soo geliyeen. Rususha markii ay u yimaadeen, oo ay ugu yeereen si ay ugu Gaaloobaan Dhawaaqiinta, oo ay Alla uun u rumeeyaan way diideen.

Sababtaas awgeed ayuu Alla (swt) u soo hormariyey

dhibka dhabta ah ee jira. Si sax ah ha u fahmaan dacwada rususha; Rasusha inaysan dadka ugu yeerin jiritaanka Alla uun, balse uu yahay ka keliya ee mudan cibaadada ayuu Alla rabay. Mar haddii inkirida Dhaaquut laga horreysiiyey rumeynta Alla, mushrikiintu markay maqleenba way ka soo horjeesteen dacwadaas, oo xitaa ma jeclayn inay dhegeystaan ama fahmaan.

### A. Waa maxay Dhaaquut oo ah shardiga koo'waad ee kelime Tawxiidka oo aan la soo geli karin diinta iyadoon lagu Gaaloobin?

Micnaha Dhaaquut ee qaamuuska waa in xadka la dhaafo, si la mid ah, diintana micno u dhow ayaa loo adeegsadaa:

Imaam Tabari (Allaha u naxriistee) wuxuu tafsiirka aayadda 256-aad ee suuradda Baqarah si kooban ugu qeexay Dhaaquut, oo wuxuu yiri:



"Muffassiriinta way isku khilaafeen micnaha Dhaaquut.

Qaar baa yiri waa "Shaydaanka". Taasna waxaa laga weriyey; Cumar (Allaha ka raalli noqdee), Mujaahid, Qataadah, Daxaak, iyo Suddi (Dhammaantood Allaha u naxriistee).

Qaar baa yiri "waa saaxirka". Sidaas waxaa laga soo wariyey Abuul Caliye (Allaha ka raalli noqdee)

Qaar ayaa sidoo kale yiri "waa kaahinka". Sidaas waxaa laga soo weriyey Saciid ibni Jubeyr, Abuul Caliy, iyo Ibnu Jurayj (Dhammaantood Allaha u naxriistee)."

Aragtidaas kaddib imaam Tabari (Allaha ha u naxriistee) waxuu yiri:

"Aniga sida aan qabo, Dhaaquut waa wax kasta oo xadkooda dhaafa oo Alla (swt) ka dhan ah, Dhaaquut waa wax kasta oo Alla ka sokow la caabudo, ha ahaato inuu Dhaaquutka ku qasbo ama ha ahaato rabitaanka dadka. Ma jiro Wax farqi ah oo u kala dhaxeeya waxyaabaha la caabudo Alla ka sokow inay yihiin dad, shaydaan, sanam iyo wax kale."[8]

Ibnul Jawzi (Allaha u naxriistee) waxa uu Zaduul Masiir kusoo qaatay aragtidaan soo socota ee uu Mujaahid (Allaha u naxriistee) yiri: "Dhaaquut waa Kuwa asnaamta hortooda istaaga oo ku hadla magaca asnaamta si ay dadka u dhumiyaan."[9]



Ibnu kathiir (Allaha u naxriistee) waxa uu kasoo xigtay Ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee): "Dhaaquut waa shaydaanka insiga ah. Dadku (haddii la is khilaafo) isaga ayey u xukun doontaan. Waa hoggaamiyaha danahooda haaya."[10]

Ibni Qayyim Al-Jawzi (Allaha u naxriistee) waxa uu Dhaaquut ku qeexay sidatan: "Dhaaquut waxa loola jeedaa waa addoonka xadkiisa dhaafa, la caabudo, lagu xiran yahay, oo la addeecayo. Alla (swt) ka sokow iyo Rasuulkiisa (scw), Waxa ay ummad kasta ugu xukun tagto, oo caabudo, oo raacdo, iyada oo aanay jirin daliil xagga Alla ka yimid waa Dhaaquutkooda. Kuwaani waa Dhawaaqiin-

8. Tefsîru't Taberî, 5/417-419, Tafsiirka Suuradda Baqarah ee aayadda 256'aad
9. Zâdu'l Mesîr, 1/419, Tafsiirka Suuradda Nisâ aayadda, 51'aad
10. Tefsîru'l Kur'âni'l Azîm, Tafsiirka Suuradda Nisa aayadda 51'aad

ta caalamka. Haddii aad ka fakarto Dhawaaqiinta iyo xaalada dadka, waxaad arkaysaa in dadka badankiis ay caabudaan Dhaaquutka ee aanay caabudin Alla. Waxay u xukun tagi Dhaaquutka ee ma'aha Alla iyo Rasuulkiisa. Waxay caabudaan oo raacaan Dhaaquutka ee ma caabudaan Alla …"[11]

Maxaan ka fahannay qeexitaannadan? Dhaaquutku waa wax kasta oo xadkiisa dhaafa, illoobay inuu addoon yahay, oo sifooyinkii Ilaahayna isku arka. Ama waa wax kasta oo ay dadku xadkooda ku dhaafaan, oo ay sifooyinka ilaah ugu nisbeeyaan oo ay ilaah ka yeeshtaan.

Shaydaanka waxaa la yiri waa Dhaaquut, sababtoo ah wuxuu dadka ugu yeeraa inay caabudaan makhluuqyada, ilaahyada baadilka ah, sidaa darteed Isagaa sabab u ah dhammaan noocyada shirkiga, caasinimada iyo xad dhaafka.

Kaahinka waxa la yiri waa Dhaaquut, sababtoo ah wuxuu sheeganayaa inuu yaqaan waxa aan la arkin ee soo socda. Ogaanshaha waxa maqan waa sifo Alla (swt) u khaalis ah.

Saaxirka waxa la yiri waa Dhaaquut, maxaa yeelay waxa uu ku andacoonayaa inuu dadka wax u tari karo iyo waxna u dhimi karo, wixii jirana uu dumin karo, oo wax aan jirinna uu abuuri karo. Dhammaan waxyaalahaas oo dhan waa sifooyinkii Alla (swt).

Waxyaabaha la caabudo sida dhagxaanta, geedaha,

11. İ'lâmu'l Muwakkiîn, 1/40

asnaamta iyo qubuuraha dadka, waxaa la yiri waa Dhaaquut, sababtoo ah cibaadada waxaa loo sameeyaa Alla (swt) oo keliya.

Kuwa diinta ka beecmushtara ee magaca asnaamta ku hadla, dadkana marin habaabiya waxaa la yiri waa Dhawaaqiin, sababtoo ah waxay ku hadlaan iyagoon waxyi ku tiirsanayn, dadkana way lumiyaan, oo magaca Alla ayey ku xalaalaystaan asnaamta.

Shakhsiyaadka iyo hay'adaha dadka xukuma, iyagoo aan ku tiirsanayn shareecada Islaamka waxaa la yiri waa Dhawaaqiin, maxaa yeelay wax xukumid waa Sifo Alla (swt).



Sida la arki karo, salafka, halkii ay ka qeexi lahaayeen Dhaaquutka, waxa ay soo bandhigeen Dhawaaqiinta aadka u muuqday ee xilligooda jiray. Tusaale ahaan, "Kaahinku waa Dhaaquut" ayey yiraahdeen, waa qasab inaan tan ogaanno, haddii kale qofku wuxuu aqbalayaa in kaahiniintu ay Dhawaaqiin yihiin; laakiin waxaa laga yaabaa inuusan fahmin faaliyaasha, ama qaar ka mid ah kuwa jinniga saara aanu Dhawaqiin ahayn. Sababta uu kaahinku u yahay Dhaaquut waa inuu sheeganayo inuu yaqaan waxa maqan. Sababtuna waxa ay tahay waa inuu xadkiisii dhaafay, oo uu naftiisa ku arkay sifada Alla (swt). Haddii xitaa magacyada, meelaha iyo qaababka ay isbeddelaan, qof kasta oo sheeganaya inuu wax ka yaqaan waxa maqan wuxuu noqonayaa mid Dhaaquut ah. Maanta, Dadka qaar ee ka hadla oo keliya hal dhinac oo ka mid ah Dhaaquutka, sida inaan lagu

xukumin waxa Alla soo dejiyay, waxaan nasiib darro ah inaan aragnay in dadkaas aysan si buuxda u beenin karin Dhaaquutka, tusaale ahaan mar aan la kulmay qof daaci ah oo arrinta Dhaaquut aan ka hadalnay, waxa ugu horeeyo ee maankiisa ku soo dhacay waa madaxda mushrikiinta ah ee maanta ummadda Islaamka ku habsatay ee magacyadeena sita, oo afkeennana ku hadla. Markii aan si fiican isku-barannay, waxaan arkay inaanu saaxiibkani ku Gaaloobin waxyaabo badan oo la caabudo, oo aan madaxda keliya ahayn. Waagaas waxa aan su'aal ka keenay sababta keentay arrintan oo aan gartay inay arrinka Dhaaquut ku soo rogeen hal qeexitaan iyo inaanay ka war hayn Dhawaaqiin badan oo ka baxsan qeexiddooda. Run ahaantii inuu inkiro dhinac iska dhig, xitaa wuu difaaci jiray!



Sababtaan awgeed waxaan raaci doonnaa hab ka duwan. Waxaan ka hadli doonnaa aayadaha Quraanka kariimka ah ee arrinka Dhaaquut mid mid loogu xusay. Waxaan isku dayi doonnaa inaan fahanno sifooyinka Dhaaquutka iyo sababta loogu yeero Dhaaquut. Dabadeed waxaynu tooshka ku ifin doonnaa makhluuqyada maanta ku habboon sifadaas, kuwaas oo Dhaaqudoobay.

Sidaa darteed waxaan isku dayi doonnaa inaan fahanno Dhaaquutka micneheeda ugu ballaaran, intii aan ku xaddidi lahayn micno xadidan. Dadaal waa xaggeena, guushuna waa xagga Alla (swt).

## 1. Dhaaquut waa kan naga jiidaya iftiinka waxyiga oo nagu riixaya mugdiga kufriga

اَللّٰهُ وَلِيُّ الَّذٖينَ اٰمَنُوا يُخْرِجُهُمْ مِنَ الظُّلُمَاتِ اِلَى النُّورِۜ وَالَّذٖينَ كَفَرُٓوا اَوْلِيَٓاؤُ۬هُمُ الطَّاغُوتُ يُخْرِجُونَهُمْ مِنَ النُّورِ اِلَى الظُّلُمَاتِۜ اُو۬لٰٓئِكَ اَصْحَابُ النَّارِۚ هُمْ فٖيهَا خَالِدُونَ

"Alla waa u gargaaraha / saaxiibka kuwa rumeeyey. (muujisnimada saaxiibtinimadan) wuxuu kasoo saara mugdiga (Gaalnimada iyo Shirkiga) una soo saara iftiinka (Tawxiidka iyo iimaanka). kuwa Gaaloobayna gargaarahoodu /saaxibadoodu waa Dhawaaqiin Waxayna ka soo saarayaan intiinka (Imaanka iyo Tawxiidka) una soo saarayaan mugdiga (Gaalnimada iyo Shirkiga). kuwaasina waa ehelka Naarta wayna ku waari dhexdeeda."[12]



Imaam Dhabari (Allaha u naxriistee) annagoo soo koobeyno wuxuu tafsiirka aayaddaani ka yiri: "Alla waa saaxiibka iyo gargaaraha kuwa rumeeyey. Wuxuu ka dhigtay saaxiibo isagoo ka dhigay kuwo guulaysta oo caawiya. Wuxuu kasoo saaraa mugdiga kufriga oo u soo saara iftiinka iimaanka. Gaalada saaxiibadoodu waa asnaamta ay caabudaan Alla ka sokow, iwm. Waxay kasoo saarayaan iftiinka iimaanka oo usoo saarayaan mugdiga kufriga."[13]

12. 2/Baqarah, 257
13. eeg. Tefsiru't Taberi, 5/424-425 tafsiirka suuradda Baqarah ee aayadda 257'aad

Ibnu Kathiir (Allaha u naxriistee) tafsiirka aayaddani, markuu wax ku dhaw imaam Dhabari oo kale xusay wuxuu yiri:

"Sidaa darteed kelmedda infiinka waxaa loo adeegsaday mid keli ah, laakiin kelmedda mugdiga (dulumaad) waxaa loo adeegsaday qaab jamac ah, maxaa yeelay xaqu markuu yahay hal, waxaa jira noocyo badan oo gaalnimo ah, dhammaantoodna waa baadil."[14]

Tani waa sifada ugu horreysa ee Dhaaquut: in laga soo saaro iftiinka waxyiga oo loo saaro mugdiga Gaalnimada. Dhaaquut: Wuxuu mar walba ka fogeeya dadka isaga raaca iftiinka waxyiga oo kala ah Qur'aanka, Sunnada iyo tawxiidka, wuxuuna geeyaa mugdiga gaalnimada iyo shirkiga.



Waxyigu wuxuu leeyahay xeerar cad, adag oo iftiimaya. Wax kastoo inoogu yeera wax aan ahayn xeerarka (axkaamta) waxyiga ah waa dhaaquut, maxaa yeelay Alla ayaa wax walba og, waana Al-Caliim. Cid kastoo soo go'aamisa manhaj (xeerar) cusub, waxa uu ka gudbay xadkii Alla (swt) oo wuxuu noqday dhaaquut.

Haddaba, aan eegno shaqsiyaadka iyo hay'adaha sifadaas leh oo dhaaqudoobay:

### a. Shaydaanka

Cumar (Allaha ka raalli noqdee) wuxuu dhaaquut ku micneeyay shaydaan, maxaa yeelay Shaydaanku waa isha xummo oo dhan ee dhulka ku sugan. Alla (swt) ayuu ka dalbaday in muddo la siiyo, muddadaas gudaheedna

14. eeg. Tefsîru'l Kur'âni'l Azîm, 1/524, tafsiirka suuradda Baqarah ee aayadda 257'aad

inu dadka badankiisa marin habaabin doono, oo ugu yeerayo waddooyin aan waxyiga ahayn:

"(Alla) wuxuu yiri maxaa kaa reebay inaad Sujuuddo markaan ku faray, wuxuu yiri anaa ka Khayr roon, waxaad iga Abuurtay Naar isagana waxaad ka Abuurtay Dhoobo. (Alla) wuxuu yiri ka Dag halkaasi Xaq uma lehid inaad is Kibrisid, Bax waxaad ka mid tahay kuwa Dullaysane. Wuxuu yiri ii sug tan iyo Maalinta la soo Bixin. (Alla) wuxuu yiri waxaad ka mid tahay kuwa la sugi. Wuxuu yiri Ibaadiyeyntaada Darteed waxaan u Fadhiisan Jidkaaga Toosan (waan Dhumin). Waxaana kaga iman hortooda, Gadaashooda, Midigta iyo Bidixda mana helaysid badankooda oo ku Shukriya. (Alla) Wuxuu yiri ka bax halkaasi adoo Caayan oo la Dheereeyey, Ciddii ku raacdana waxaa laga Buuxin Jahannamo Dhammaantiin.' "[15]



Jidka Allaha sare waa hal. Taasina waa Islaamka, yacnii waxyiga. Waddooyinka kasoo haray waa mugdiyada. Sidaynu ka baranay Rasuulka (scw), waddo kasta bilawgeeda waxaa jooga shaydaan, wuxuuna noogu yeeraa waddooyin baadil ah/mugdi ah:

"Kaasina waa Jidkayga toosan ee Raaca, hana Raacina waddooyinka aan taas ahayn Haddii kale waxay kaa dhuminayaan (dariiqa toosan) Saasaana Alla idin faray inaad Dhawrsataan."[16]

Waxaa laga wariyey Ibnu Mascuud (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"Maalin ayuu Rasuulku (scw) gacantiisa wuxuu ku xa-

15. 7/Acraaf, 12-18
16. 6/Ancaam, 153

riiqay xariiq, markaas ayuu yiri: "Tani waa jidkii Alla (swt) ee toosan.'

Markaas kaddibna, xariiqdaas midig iyo bidix ayuu xariiqo kale ka jeexay, wuxuuna yiri: kuwaani waa waddooyin, mid walbana shaydaan ku sugan yahay,uguna yeeraya waddooyinkaas.'

Rasuulku (scw) ayaa markaas akhriyay aayaddan:

'Kaasina waa Jidkayga toosan ee Raaca, hana Raacina waddooyinka aan taas ahayn Haddii kale waxay kaa dhuminayaan (dariiqa toosan) Saasaana Alla idin faray inaad Dhawrsataan.'[17] "[18]

Haddii aynu u fiirsano aayadaha, waxaynu arkaynaa in dariiqa Alla (swt) iyo rasuulkiisa (scw) loo adeegsaday qaab keli ah: Waxaana la yiraahda "Iftiin", "wado", cagsigeedana waa ereyo loo adeegsaday jamac ahaan waxaa loo yaqaannaa, "mugdiyo", "waddooyin", maxaa yeelay dariiqa xaqa ah waa xaga Alla. Isha ay ka timid waa mid. Sababtaa awgeed waa hal. Baadilku waxay ka yimaadeen dhanka shaydaanka. Shayaadiintu way badan yihiin wayna kala duwan yihiin.



## Sidee Looga Soo Baxaa Mugdiyada?

Waxaa jirta hal waddo oo mugdiyada loogaga baxo xagga nuurka: Taasna waa in loo hoggaansamo waxyiga. Alla (swt) si uu addoomadiisa uga soo saaro mugdiyada, wuxuu soo dejiyey kutubyo, si ay u sharxaan kutubtaas, wuxuuna u soo direy rusullo:

17. 6/Ancaam, 153
18. Axmad, 4437

"Alif Lam Ra kanna waa Kitaab aannu kugu soo dejinnay inaad kaga bixisid dadka mugdiyada xagga Nuurka idanka Rabbigood iyo jidka Allaha Al- Caziizka (adkaada) ah iyo Al- Xamiidka ah (ee la Mahadiyo)."[19]

"(Alla) waa kan kusoo dejiyey addoonkiisa aayado cad cad si uu idiinka bixiyo mugdiyada, Nuurna idiinku bixiyo. Shaki la'aan Alla waa mid idin naxariis badan."[20]

"(Wuxuu idin soo diray) Rasuul idiinku akhrin aayaadka Alla oo cad cad si uu mugdiyada xagga Nuurka ugu bixiyo kuwa rumeeyey ee camal fiican falaya. Ruuxii Alla rumeeya camal wanaagsanna fala wuxuu gelin Jannooyin ay dareerayso dhexdeeda Wabiyaal wayna ku waari waligood, shaki la'aan Alla wuxuu siiyey rizqi wanaagsan."[21]



**Qodobkii ugu horreeyay uu Nebi Aadam (cs) maqlay markii jannada laga soo saaray ee dhulka la keenay waa:**

"Wuxuu yiri (Alla) ka hoobta halkaas ee xagga (dhulka) idinkoo col isu ah. Hanuun baa xaggayga idiinkaga iman doonaa. Ruuxii raaca hanuunkayga ma dhumi doono, mana xumaan (murgoon)doono. "Ruuxii ka jeedsada xuskayga (kutubta aan soo diri doono) waxaa u sugnaaday nolol ciriiri ah, waxaana soo bixinaynaa maalinta qiyaame isagoo arag la." "[22]

**Ciddii raacda hanuunka, waxyiga iyo Rasuulka xagga Alla (swt) ka yimid ma dhumayaan, oo ma xumaan doonaan, hase yeehee kuwa raaca shaydaanka oo ka**

19. 14/İbraahim, 1
20. 57/Xadiid, 9
21. 65/Dhalaq, 11
22. 20/Dhaaha, 123-124

jeedsada waxyiga iyo rasuulka, oo u leexda jidad kala duwan, waxay ahaan doonaan kuwo dhummi oo murugoon doono.

## Ka digtoonow Shayaadiinta Insiga ah!

Waan garaneynaa shaydaanka/Ibliiska naarta laga abuuray, oo aynaan arki karin, oo dadkana waswaasiya. Tan Ka sokow, waxaa sidoo kale jira dad Shaydaamooway. Kuwaasna waa Shayaadiinta insiga ah:

"Saasaan ugu Yeelnay Nebi Kasta Col Shaydaan Insi iyo Jinniba leh, oo Qarkood qaarka kale u Waxyoon (u Sheegi) Hadal la Dhoob-Dhoobay si'ay u dhumiyaan Darteed. Hadduu Rabbigaaga Doonana mayna Faleen ee Iskaga Tag iyaga iyo waxay Been-Abuuran."[23]



Shayaadiinta insiga ah: innaga ayey innagu dhexnool yihiin, innaga oo kale ayey u hadlaan, innaga ayey inoo egyihiin. Waxay gutaan waajibaad la mid ah kan shaydaanka. Waxay dadka ugu yeeraan waddooyin aan waxyiga ahayn, oo waxay kaloo qurxiyaan baadilka. Waxay kasoo muuqdaan Telefishinada, wargeysyada, fagaarayaasha, iyo xitaa masaajidyada.

Sida lagu garan karo dhawaaqiintan oo loogana fogaan karo waa in si faahfaahsan loo akhriyo waxyiga, oo la barto sunnaha/siirada Rasuulka (scw). Kii xaqa yaqaana si dhib yar buu u gartaa baadilka, sababtoo ah waxaa jira hal xaq oo keliya. Waa sahlan yahay, waa wax la fahmi karo, oo iska cad, oo iftiin ah. Waxay ahaadanba ha

23. 6/Ancaam, 112

noqdaane, Wax kasta oo aan waxyiga waafaqsaneyn waa baadil, waa mugdiyo, iyo waa wax aan la fahmi karin. Ruuxii dadka ugu yeeraya waa shaydaan insi iyo jinni ah, oo dhaaquut ah, oo dadka ka soo saaraya iftiinka waxyiga oo u soo jiidaya mugdiyada gaalnimada.

### b. Dimoqraadiyiinta ku baaqaya (Xisbiyada Siyaasadeed)

Hal maamul oo keliya ayaa Alla agtiisa ansax ka ah: Waa Maamul Islaami ah, oo dadka oo dhami u hoggaansamaan, oo ay u hoggaansamaan axkaamtiisa, xukunkana si shuruud la'aan ah loo siiyo Alla (swt).

Dastuurka maamulkaas ku dhaqma oo tixraac u yahay waa Qur'aanka kariimka ah iyo sunnada oo ah dhaqankii Rasuulka (scw):



"... İska jira! Alla ayaa Abuuridda iyo Amarkaba iska leh, waxaana waynaaday, oo Khayrbatay Allaha barbaariya Caalamka."[24]

"Kuwa (Xaqa) Rumeeyow Addeeca Alla iyo Rasuulka, iyo madaxda idiinka mid ah (muslimiinta ah/kuwa ka tagay shirkiga ee Alla ula noqday tawxiid). Haddaad isku khilaaftaan arrin u celiya Alla iyo Rasuulka (si loo xalliyo arrinkaas) haddaad tihiin kuwo Rumeeyey Alla iyo Maalinta aakhiro saasaana ka khayr roon oo ka Wanaag badan Xagga natiijada."[25]

Rabbigeen (swt) sidaas buu yiri, oo wuxuu noo sheegay inay tani tahay diinta ugu toosan iyo wadada ugu saxan:

24. 7/Acraaf, 54
25. 4/Nisa, 59

"… Xukunka waxaa iska leh Alla oo keliya Wuxuuna idin faray inaydaan caabudin cid aan isaga ahayn Saasaana diinta toosan ah, laakiin dadka badankiisu ma yaqaaniin."[26]

Taariikhda oo dhan, waxaa soo baxay madax aan raalli ka ahayn xukunkaan rabbaaniga ah, kuwaas oo ka hor yimid Shareecada Alla (swt) oo ah Ilaaha iyo Rabbiga keliya.

Fircoon baa ka mid ah, sababtoo ah wuxuu ogaa in maamulka ay ka dhigan tahay ilaahnimo iyo Rabbinimo, wuxuu si cad ah u sheegtay ilaahnimo iyo Rabbinimo:

"Wuxuu yiri Fircoon Madaxeey Idiinma Ogi ilaah aan anniga ahayn.' "[27]

"Wuxuu yiri: 'Anigu waxaan ahay Rabbigiina ugu sarreeya." [28]



Dabcan, isaga u lama jeedo ilaahnimada iyo rabbinimada ah abuuraha, arzaaqaha, ama abuuraha wax aan jirin, sababtoo ah isaga laftiisa waa qof la abuuray, oo dhimanaya. Waxa uu ula jeedo waa iclaameynta ilaahnimada iyo rabbinimada xukumidda, tarbiyeynta, dejinta sharciyada, iyo haysashada maamulka.

Maantana kuwa aan raalli ka ahayn xukunka Alla (swt) oo ka hor imaanaya arrinka ah: "Xukunka waxaa iska leh Alla oo keliya". Taasi badelkeeda ka doorbidayaa dimoqraadiyad tiraahda "Xukunka shuruud la'aan waxaa iska leh shacabka."

26. 12/Yuusuf, 40
27. 28/Qasas, 38
28. 79/Naazicaat, 24

Dimoqraadiyiintu waxay noogu yeeraan fahamka ah xukunka shacabka/ aqlabiyadda. Dhanka kale, siduu waxyigu na baray Islaamka wuxuu noogu yeeraya maamul Islaami ah.

Marka ay sidaas sameeyeen waxa ay ku xad gudbeen Alla (swt) oo waxay noqonayaan dhawaaqiin.[29]

## c. Machadyada (Ururada) Bixiya Waxbarasho Kasoo Horjeeda Habka Islaamka

Waxyigu wuxuu leeyahay hab waxbarasho. Fahamkaas waxbarasho, waxaa lagu bilaabaa in la weyneeyo nuxurka Alla iyo in la xuso magaciisa oo keliya:

"Wax ku akhri magaca Rabbigaaga ee abuuray!"[30]



Taas micneheedu waa: Waxbarashadani waxay ogolaansho ka heysataa Alla (swt). Waxaa la isku barayaa uun waxyaalihii uu xaqa u aqbalay ee uu ogolaaday, jeclaystay ee uu raalli ka yahay.

Ujeeddada waxbarashadu waa inay ahaato mid rabbaani ah:

"...U noqda kuwo rabbaani ah ee waxaad barteen oo aad ka barateen Kitaabka."[31]

Rabbaani waxaa loola jeedo waa kan Rabbi (swt) ku xidhan. Waa qof u heellan oo ku dhaqma habka waxbarasho ee Alla (swt) raalli ka yahay, aqoonna u leh diinta, oo dadkana diinta bara.

29. Macluumaad faahfaahsan, eeg majaladda Tawxiid, "Maamulka" Arrin Gaar ah
30. 96/Alak, 1
31. 3/Âl-i İmran, 79

Habka waxbarasho ee Islaamku waxaa sal u ah waa saddex arrimood oo kala ah: Marka hore iimaanka ayaa la bartaa, kaddibna quraanka, kaddibna sunnada.

Waxaa laga weriyey Jundub ibnu Cabdullaahi (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri: "Waxaan la joognay Nebiga (scw) annagoo wali qaangaarin. Waxaan barannay iimaanka ka hor intaanan quraanka baran, Kaddibna waxaan barannay quraanka. Qur'aanka dartiiisa, iimaankeennu wuu kordhay oo wuu xoogaystay"."[32]

Waxaa laga weriyey Xudheyfa (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"... Rasuulku (scw) waxa uu noo sheegay in ammaanadu ay si qoto dheer ah u gaarto quluubta dadka saalixiinta ah, kaddibna waxay cilmiga ka barteen quraanka,kaddibna sunnaha ..."[33]



Taas micneheedu waa in goob waxbarasho aanay noqon karin goob waxbarasho oo Islaami ah, haddii aanay ku bilaaban magaca Alla, haddii aanay ujeeddada waxbarashadu aanay ahayn mid Rabbaani ah, iyo haddii aanay dadka siin waxbarasho ku sallaysan iimaanka/tawxiidka, quraanka kariimka, iyo Sunnada. Haddii ay dhinac marto mabaadi'da waxyiga, oo ka doorbido hab waxbarasho kale, dadkana ugu yeerto shirki ama wax aan kitaabka iyo sunnada ahayn, waa machad (urur) dhuqyaani ah oo xadkeeda dhaaftay.

Waxaan tusaale ahaan usoo qaadan karnaa machad-

32. İbni Majje, 61
33. Buhari, 6497; Muslim, 143

yada (ururada) waxbarashada rasmiga ah ee arrintaan la xiriira:

Sharciga Waxbarashada Qaranka, Qodobka 2: "Ujeeddada guud ee Waxbarashada Qaranka Turkiga waxay ku salaysan tahay inqilaabkii Ataturk iyo waddaninimada Turkiga ee lagu muujiyey bilowga Dastuurka; Wuxuu kor u qaadaa, ilaaliyaa oo horumariyaa ahdaafta qaranka, akhlaaqda aadanaha mid ruuxi iyo dhaqanba ee Qaranka Turkiga; Waxaa lagu korinayaa muwaadin jecel qoyskiisa, dalkiisa, qarankiisa oo mar walba isku daya inuu qaddariyo; "In la koriyo oo ladhiso muwadiniinta garanaya waajibaadka iyo waajibaadka ka saaran Jamhuuriyadda Turkiga, oo dawlad qaran iyo dimoqraadi ah, iyo cilmaani ah, iyo sharci bulsho oo ku dhisan xuquuqul insaanka iyo mabaadi'da aasaasiga ah ee bilowga dastuurka, kuwaas oo u dhigay qodobadan si ay ugu dhaqmaan..."



Sida la arki karo, iskuulada ku xiran nidaamkaan oo kale, ayaa si cad u muujiyay sababta ay dadka wax u baraan. Waxa la isku baro iskuladaan, ayaa sidoo kale la socda ujeeddooyinkaan.

Ujeeddadoodu waa inay ubadka ku beeraan afkaaro, oo ay ubadka ku barbaariyaan si waafaqsan afkaarta Kemaalistiga ah, hase yeeshee ujeeddadoodu ma'ahan inay baraan xisaab, saynis, Af-Turki... Tani waa ujeeddo la iska fahmi karo sida Islaamka oo kale; Ujeeddada Islaamku waa in la barbaariyo mu'miniin, muwaaxidiin, iyo shakhsiyaad Rabbaani ah oo Alla ku

xiran, dhanka kale maamulada aan islaamiga ahaynna, waxay rabaan inay dhisaan, oo barbaariyaan jiilal xambaarsan afkaartooda.

Midda aan la fahmi karin ayaa ah, dadku inay ubadkooda ku dhex tuuraan dabkan iyagoo adeegsanaya magaca Islaamka. Fidhradoodu daahirka ahayd waxay ku wasakheeyaan shirki, gaalnimo iyo munaafiqnimo.[34]

## d. Diyanet

Hay'ad kasta oo dadka kasoo saarto iftiinka waxyiga una soo saarto mugdiga kufriga iyo shirkiga waa machad dhaaquudi ah. Xaqiiqda isma beddeleyso magacyada ay sitaan inay yihiin magacyo Islaami ah, sida diinta iyo awqaafta, iyo diyaanet…

Sida la og yahay, Wazaaradda Arrimaha Diinta ee Turkiga (Diyanet) waa mashruuc Jamhuuriyadda la timid. Runtii waa arrin loo baahan yahay in laga fikiro in aasaas-yaashii Jamhuuriyadu ay ka dhiseen urur diimeed deegaan ay mamnuuc ka tahay wax kasta oo diinta Islaamka ka mid ah, sida Qur'aanka kariimka, aadaanka, madaariista, dharka Islaamka. Xitaa waxaa la mamnuucay Af- Carabiga. Waa maxay sababta keentay kuwo ku dhawaaqay dagaal ka dhan ah wax kastoo Islaami ah inuu aasaaso urur diimeed? Sidee buu nidaam ku dhisan aasaaska calmaaniyaddu u dhisi karaa urur-diimeed ku xiran dawladda, halkii la kala saari lahaa diinta iyo dawladda? annaga ma'ahee ha ka



34. Macluumaad faahfaahsan, eeg "Macbadyada Casriga ah ee u Adeegga dhawaqiinta, Daabacaada iyo Baahinta Tawxiidka

jawaabaan kuwa aasaasay Jamhuuriyadda Turkiga iyo wazaarada arrimaha diinta (Diyanet):

Axmad Xamdi Bashar, oo ahaa lataliye Ataturk, wuxuu leeyahay:

"Annaga, diinta ma'ahan inaan ka saarno bulshada, taa cagsigeeda waxaan rabnaa inaan sii nooleyno, annagoo ku hageyno awoodda kacaanka. Maku gaari karno hadafkeena inaan duminno masaajidda oo dadka ka saarno, hase yeeshee waxaan kuu gaari karnaa inaan dhisno xaruumo bulshada ku kulanto, si'aan codkeena u maqalsiino dadka had iyo jeer ku soo uruura masaajidda. Sidoo kale si ay u beddelaan goobahaas xarumaha bulshada casriga ah; Waa suurtogal in meesha laga saaro Culimmada ku hadla afka diinta, oo lagu beddelo in qof kastaa ku hadlo magaca diinta iyo danaha adduunka."[35]



Haddaba, maxay ujeeddadu ahayd? Ujeeddadu waxay ahayd in diinta u adeegto dawladda iyo in masaajidda loo isticmaalo sida xarumaha bulshada ku kulanto oo kale.

Ali Bardakoglu oo ahaa waziirka arrimaha diinta ayaa wareysi uu bixiyay ku yiri:

"Diyanet waa hay'ad dastuuri ah, oo mashruuc jamhuuriyadda ah… Waajibka dastuurku na faray waa cad yahay. "Waxaan isku dayeynaa inaan gudanno waajibkeena, annagoo aan wax dhibaato ah kala kul-

35. Atatürk'le Üç Ay ve 1930'dan Sonra Türkiye, eeg. 47

min mabaadi'da aasaasiga ah ee Jamhuuriyaddeena iyo Calmaaniyadda Marxuum Atatürk, annagoo ka duulayna is-afgaradka guud ee bulshada, aqoonta saxda ah ee diinteena, sidoo kale annagoo tixgelinayno waxa casriga ah ee dunida ay soo saartay."[36]

Diyanet waa hay'ad dastuuri ah oo ujeeddada loo aasaasay tahay inay diin ahaan u sharciyeyso mabaadi'da Ataturk iyo inqilaabka, wax dhib ahna kuma qabin mabaadi'da iyo inqilaabka.

Mid ka mid ah ujeeddooyinkeeda ugu waa weyn waa in laga hortago tacassub diimeed iyo in laga dhigo diinta nidaam ruuxi ah oo loogu talagalay bulshada.[37]

Haa, Diyanet waa mashruuc. Masaajidadu waa mashruuc. mimbarka waa qalab iyo mashruuc lagu soo jiito dadka, iyo in lagu sharciyeeyo dawladda, iyadoo loo adeegsanayo magaca diinta.



Marka bulshada loogu yeero Tawxiidka, waxay si daran uga hor yimaadaan dacwada tawxiidka, waxayna kugu odhanayaan "Waxaan aadayay masaajidka sannadahan oo dhan, laakiin weligay waxyaabahan oo kale kama maqal culimmada." Waxay si xeel-dheer u qariyeen tawxiidka oo ah ujeeddada loo abuuray dadka, iyo sidoo kale midka cabsiya maamullada baadilka ah. Taas oo ay bulshadu u malaynayso tawxiidku inuu yahay mid baadil ah oo aan diin ahayn. Jiritaanka Di-

36. https://www.yenisafak.com/roportaj/bardakoglu-din-hicbir-iliskiye-mal-edilmemeli-13514 (E.T: 24.03.2022)

37. bk. Anayasa Mahkemesi, Esas no 1970/53, Karar sayısı 1971/76, 21/10/1971

yanet wuxuu abuuraa gidaaryo u dhexeeya bulshada iyo dacwada Tawxiidka.

Maamullada baadilka ah waxay gudanayaan waajibaadkooda, iyagoo ka gudbaya xadka Alla (swt), waxayna dadka ka hor istaagayaan dariiqa Alla, iyagoo sitaa mashruuc ah "Diin diinta kasoo horjeeda".

Muwaaxidiintana waa inay furaan masaajido magaca Alla lagu xuso, oo lagu mideeyo, laguna barto tawxiidka, dhawaqiintana lagu gaaloobayo, oo ka mid ah arrimaha aasaasiga ah ee diinta. Sidoo kale waa inay ka fogaadaan masaajidda ah "masjidul diraar".

### e. Telefishinka/Internetka/Shaashooyinka Dijitalka ah



Marka hore aan tilmaanno tan; Qalabka isgaarsiinta sida telefishinka/ aaladda internetka asal ahaan mamnuuc ma'ahan. Kuwaani shaki la'aan waa nimco, waa haddii loo isticmaalo arrimooyinka waxtarka leh iyo in loogu adeego diinta. Waxaana jira meelo dhanka wanaagsan loogu adeegsado, laakiinsee waxa aan rabo inaan tilmaamo waa isticmaalka guud ee telefishinka/ internetka ee dunnida maanta.

Marka laga eego xagga waxyiga, waalid kastaa wuxuu mas'uul ka yahay ehelkiisa. Waa inuu ku barbaariyo tarbiyad Islaami ah, oo uu ku tarbiyadeeyo sida Alla (swt) raalli ka yahay, laakiin maalmahaan sabab aan la garaneyn ayaa waalidiintu ka tageen mas'uuliyaddaas uu Alla saaray. Waxay gacanta ka saareen shaashada-

ha digital-ka ah, iyadoo la xadidin oo ka mid ah asnaamta qarnigaan, oo ay cadawga Alla u adeegsanayaan sidii ay u fasahaadin lahaayeen jiilka. Shaashadahaan, ku dhawaad baahin kasta oo kasoo horjeeda diinta Islaamka, waxay la dhigtaa koonaha qolka, waxayna farayaan jihaynta nolosha, iyo midda ugu muhiimsan barbaarinta caruurta.

Waa waxa ugu horreeyo ee ay tahay in waaga lagu bariisto in la dhahay oo kale, ayaa subaxdii lagu bilaawaa. Sidoo kale Subaxda yaan lagu bilaabin "Bismillah" ee waa in lagu bilaabo waxyaabahaas in la dhahay oo kale, ayaa subaxdii lagu bilaawaa, yacnii sidii inay barakada guriga tahay oo kale ayaa loogu waabariistaa. Waxaa intaa dheer, dadku waxay u habeyn noloshooda si waafaqsan barnaamijyadooda, Salaaddu waxay leedahay qalo, laakiin filimku malaha, markaa waa inuusan ku dhaafin. Maalinta martida la qaabilo waa maalinta aanay jirin musalsalka waagaas la xiiseeyo. Waxaa marar badan lagu ceshtaa aflaanta. Dhab ahaantii, haddii ay jiraan dad la socdo laba kanaal oo kala duwan ee guriga, si loogu hortago isku dhaca, telefishan cusub ayaa isla markiiba loo soo iibinayaa, laakiinsee waa wax iska caadi ah haddii laba walaalo ah ay isku xanaaqsan yihiin bilo ama waalidka iyo caruurtu aysan isla hadlin.



Waxa la yaab leh waa waalidiinta aan la hadlay inay qiraan saamaynta xun ee shaashadaha dhijitaalka ah ee carruurta ku yeelato. Maadaama ay dhibaatadu caddahay, natiijadu shaybaarkana la ogaaday, oo cudurkuna

uu yahay mid dilaa ah, markaa waa in la daaweeyaa. Alla baa mahad iska leh, daawayntiisu waa sahlan tahay, laakiin weli tallaabo lagama qaadin. Inkastoo isha dhibaatada la ogyahay, sababta tallaabo loo qaadayn ayaa mar kale ah qabatinka dhijitaalka, sababtoo ah waalidku waxay u tahay balwad. Sidoo kale Carruurtu waxay ku dayadaan waalidkood.

Haddaba, maxay qabtaan shaashadahaan keena cudurrada dilaaga ah?

Waxay dadka u horseedaan inay hilmaamaan ujeeddadii loo abuuray, oo waxay ku mashquuliyaan ciyaaraha iyo maaweelada:



"Dadka waxaa ka mid ah kuwo gadan hadal madhan si uu uga dhumiyo (Dadka) Jidka Alla iyagoon wax ogayn, uguna jees jeeso (Aayadihiisa), kuwaasi waxay mudan Cadaab Dulleeya."[38]

"Kuwii Gaaloobay waxay ku Bixin Xoolahooda inay ka Celiyaan Dadka Jidka Alla way Bixin doonaan, markaasay waxay bixin waxay u noqon Qoomamo markaasaa laga Adkaan, kuwa Gaaloobayna Xaga Jahannamaa Loo kulmin."[39]

Waxay maalin iyo habeen si joogto ah u dhigaan dabin, iyagoo bulshada ugu yeeraya gaalnimada iyo shirkiga:

Halkan waxaa ah muuqaal ka mid ah muuqaallada qiyaamaha! Bulshooyinka la daciifiyey waxay la murmayaan dadka iskibriyay ee dhumay:

38. 31/Luqmaan, 6
39. 8/Anfaal, 36

"Kuwa la daciifiyey waxay ku dhahaan kuwa iskibriyay (madaxdii), saas ma aha ee waxaa hooshiinu ahayd inaad habeen iyo maalin dhagar dejisaan … (sababtoo ah) waxaad na farayseen inaan ka gaalowno Alla una yeelno shariigyo, Waxayna qariyaan qoomadooda markay arkaan ciqaabta. Waxaana yeelnay kuwii gaaloobay luquntooda Biro Naar ah. Miyaa laga abaalmarinin gaaladu waxay camal faleen mooyee?"[40]

Waxaa shaashadaha dhijitaallada laga baranayaa aragti nolosha ku saabsan ee kasoo horjeeda waxyiga:

Sida waxyigu sheegay, mulkiga/maamulka/xukunka samooyinka iyo dhulka waxaa iska leh Alla (swt) uun. Sidoo kale Bani'aadamku waa mulki Alla, nolosha oo dhammi waa inuu isu dhiibaa maaligiisa, yacnii noloshiisa, dhimashadiisa, iyo cibaadadiisa waa inay ahaato mid Alla u kaliyeelayo:



"Waxaad Dhadaa Salaaddayda, waxaan Gawraci, Noloshayda iyo Geeridaydaba Allaha barbaariya Caalamka ayaa iska leh. Wax la Wadaagana ma jiro, Saasaana lay faray Anigaana ugu Horreeya Muslimiinta/Addoomada ka tagay shirkiga oo Alla ula noqday tawxiid.' "[41]

Marka loo eego araktida shaashadaha dhijitaalka ah laga sheego, waxa muhiimka ah waa nolosha adduunka. Waxbarasho wanaagsan, shaqo wanaagsan, mushahar roon, qoys faraxsan, cimri sida la rabo loogu tasarrufayo… Micnaha nolosha waa sidan. Taasna waa nolosha ay bulshada la rabaan dhawaaqiinta…

40. 34/Saba, 33
41. 6/Ancaam, 162-163

Sidoo kale midda aakhirona, waxaa jiraa ducaad shaashadaha soo hor fadhiista. Waxay kuwaasi dadku faraan, oo ku yiraahdaan "Qosla, oo mararka qaar sadaqo bixiya, "Qalbigaygu waa daahir." dhaha, oo mararka qaarkood soo siyaarta qubuuraha! Muslim kaa fiican ma jiro!

Tawxiidka, Xadka Alla, Xaaraanta, Xalaasha, Dulmiga oo laga hor yimaado… Waa arrimo qoto dheer, ha quusan, ka bixi maysiin!

Marka shaashadaha dhijitaalka ah loo adeegsado nuxurka ay diyaariyeen dhawaaqiinta, waxay noqdaan dhaaquut jiilasha kasoo saara iftiinka waxyiga una gudbiya mugdiga gaalnimada. Muwaaxid kastana waxaa ku waajib ah waa inuu qoyskiisa iyo naftiisa ka ilaaliyo khatartaas.



## f. Hawada, Rabitaanka iyo Shahwaadka (Damaca) Adduunka

Hawada iyo Damaca waa dhaaquutka ugu waaweyn ee ka hor istaaga aadamaha jidka toosan ee Alla (swt). Xitaa mararka qaarkood waxay gaartaa heer laga yeeshto ilaah:

"ka waran ruux ka yeeshay ilaahiisa hawadiisa, oo Alla dhumiyey isagoo cilmi leh, oo daboolay maqalkiisa iyo qalbigiisa, yelayna aragiisa dabool, yaa hanuunin Alla kaddib, miyaydaan ku waantoomayn?"[42]

"Waa maxay qeexidda hawada iyo damaca ee aadanaha ka horjoogsanaya iftiinka waxyiga oo u jiidaya mugdiga gaalnimada iyo shirkiga?" Waxa jawaabta su'aashan lagu sheegay Qur'aanka:

42. 45/Jaasiya, 23

"waxaana ku yeellay shareeco ku degsan amar (ilaah), ee raac, hana raacin hawada kuwaan wax ogayn."[43]

Alla (swt) wuxuu nebiga (scw) u caddeeyey inay jiraan laba waddo. Mid waa shareecada Alla ka timid, midda kalena hawada kuwaan wax ogayn.

Sayid Qutb (Allaha u naxriistee) wuxuu tafsiirka aayaddan ka yiri:

""Sidaa darteed arrintu si cad ayaa loo sheegay. Ama shareecada ilaahay ama rabitaanka kuwa aan wax ogayn… Door saddexaad ma jiro. Ma jirto meel dhexe oo u dhaxayso shareecada isku dheellitiran, oo sugan, iyo rabitaanka isbeddelka ah. Qofku markuu shareecada ilaahay dhinac iska dhigo, hubaal wuxuu ku xukumi doonaa siduu doonayo. Maxaa yeelay, dhammaan nidaamyada nolosha ee aan sharciga Alla ahayn waa maxsuul ka yimid rabitaanka iyo hammiga kuwa aan wax ogeyn… Waxaa jirta hal shareeco oo u qalanta sifooyinkaas. Awaamiirta nololeed ee aan shareecada ahayn waa rabitaan iyo hami ka dhashay jahliga. Qofka daaciga ah (mas'uulka ah) waa inuu u hoggaansamaa oo keliya shareecada oo ka tagaa wax kasta uu doonayo, oo hamminayo. Waa inaan marnaba ka leexan shareecada Alla, oo aan raacin rabitaanka iyo hammiga, xitaa arrinka ugu yar. Sababtoo ah kuwa rabitaankooda iyo hammigooda raacayo, waa kuwo aad u daciif ah oo xitaa awood u lahayn inay diinta Alla caawiyaan ama cadowga ka difaacaan, ilaahaas oo ah mulkiilaha



43. 45/Jaasiye, 18

Shareecada. Ku-dhaqanka nidaamyada nolosha ee ka dhasha hawada iyo rabitaanka ayaa ah weji midaysan oo midba midka kale caawiya. Waxay ku sugan yihiin midnimo iyo is xog dhaafsi ka dhan ah mulkiilaha shareecada. Sababtaas awgeed, qofka shareecada doorbida waa inaanu dadka qaarkiis u janjeerin si ay u kaalmeeyaan, sidoo kale waa inaanu u u janjeerin waxa ay jecel yihiin iyo waxa isku xidho oo ah hawadoodu iyo rabitaankoodu. Waxaa intaa dheer, aad bay u tabar darran yihiin, oo ma awoodaan inay jirdilaan ama ay waxyeeleeyaan qofka dacwada xambaarsan. Sababtoo ah kuwa dhawrsada saaxiibkoodu waa Alla. Haddaba, saaxiibtinimada Alla maa mid la mid ah kuwa ku dhaqma rabitaankooda iyo hawadooda? Ma isku mid baa dadkii tabarta yaraa ee jaahiliinta ahaa ee fududaa ee asxaabta ahaa iyo saaxiibkii kuwa dhawrsada ahaa, iyo kuwii Alla saaxiib ka dhigtay ee shareecada iyaga hageysay?"[44]



Alla (swt) wax buu naga doonayaa, dhanka kale waxaa jira rabitaanka nafta iyo shayaadiinta insiga iyo jinniga. Waxaa laga yaabaa inay doonistaan la xiriiraan dacwadeena iyo nolosha bulshada, iyo waxaan aaminsanahay iyo heerarkeena (cabbiradeena).

Wax kastoo kasoo horjeeda doonista Alla (swt) waa hawada iyo rabitaanka kuwa aan wax ogeyn. Qof kastoo inaga mid ah waxaa hubaal ah in lagu imtixaamayo doonista Alla iyo doonista kuwa aan wax ogeyn.

44. Fî Zılal-il Kur'ân, 13/278-301, Tafsiirka Suuradda Jaasiye, aayadda 18, oo kooban

Waxa aan doorano waa muhiim, sababtoo ah qofka had iyo jeer doorta rabitaanka, wuxuu muddo kaddib ku noolaan doonaa nolol waafaqsan hawada. Taas micneheedu waa in hawada laga dhigto ilaahyo oo ay noqdaan dhaaquut.

## 2. Dhaaquut waa sharciyada aan kuwa Alla ahayn iyo kuwa sameeya Sharciyadaas

اَلَمْ تَرَ اِلَى الَّذ۪ينَ يَزْعُمُونَ اَنَّهُمْ اٰمَنُوا بِمَٓا اُنْزِلَ
اِلَيْكَ وَمَٓا اُنْزِلَ مِنْ قَبْلِكَ يُر۪يدُونَ اَنْ يَتَحَاكَمُٓوا اِلَى
الطَّاغُوتِ وَقَدْ اُمِرُٓوا اَنْ يَكْفُرُوا بِه۪ۜ وَيُر۪يدُ الشَّيْطَانُ
اَنْ يُضِلَّهُمْ ضَلَالًا بَع۪يدًا

"Miyeydaan arag kuwa u malaynaya inay rumeeyeen waxa lagugu soo dejiyey (Quraanka) iyo waxa lagu soo Dejiyey kuwii kaa horreeyay (Kutubta)? In kastoo la faray inay beeniyaan oo ku kufriyaan, haddana waxay rabaan in dhaaquutka ku xukuntamaan. Shaydaanku wuxuu rabaa inuu Baadiyeeyo Baadi Fog (oo ay adagtahay in xaqa lagu soo noqdo)."[45]

Dhammaan sharciyada aan kuwa Alla (swt) ahayn iyo kuwa sharciyadaas dejiya waa dhaaquut. Tani waa sifada labaad ee dhaaquut lagu garan karo. Sida xaqiiqada ah, sababta aayaddu u soo degtay ayaa sidaasi tilmaameysaa:

Ibnu Kathiir (Allaha u naxriistee) waxa uu tafsiirka Aayaddan ka yiri:

45. 4/Nisâ, 60

"Aayaddani waxa Alla dhankiisa laga inkiray kuwa sheeganaya inay rumeeyeen wixii Rasuulka iyo kuwii ka horreeyey lagu soo dejiyey, balse doonaya inay khilaafkoodu ku xaliyaan, oo ku xukuntamaan wax aan kitaabka Alla iyo sunnada ahayn. Waxaa lasoo weriyey in sababta aayadu ay u soo degtay ay ahayd in nin yahuudi ah iyo nin reer Ansaar ah ay is khilaafeen, markaasaa yahuudkii yiri: Maxamad ha noo garqaado dhexdeenna, kii Ansaarna Kacab ibni Ashraf ayuu yiri.

Waxaa kaloo la sheegay in aayaddani ay kusoo degtay kooxo munaafiqiin ah. Waxay rabeen inay muslimiin iska dhigaan oo haddana u xukuntamaan xaakimmada jahliga ah. Waxaa ka loo lasoo weriyey in riyaawo kale ay sabab u tahay nuzuusha aayadda, hase yeeshee aayaddu intaa way ka sii guud tahay. Aayaddani waxay naqdinaysaa kuwa ka taga kitaabka iyo sunnada, oo doonaya inay ku xukuntamaan wax aan waxyiga ahayn. Tani waa waxa aayadda loola jeedo dhaaquut."[46]



Siduu Ibnu-kathir (Allaha u naxriistee) sheegay, waxaa lagu sheegay aayadan sababo kala duwan oo loo soo dejiyay, hase yeeshee waxaa jira qodob ay ka siman yihiin dhammaan riwaayadaha oo dhan: In laga tago xukunka Alla (swt) iyo Rasuulkiisa (scw) oo loo xukun tago maamullada kale, sidoo kale in laga dalbado xukun aan shareecada ahayn.

46. Tefsîru'l Kur'âni'l Azîm, 2/305, Tafsiirka Suuradda Nisaa ee aayadda, 60'aad "Tani waa waxa loola jeedo dhaaquut." Waxa uu ula jeedaa waa sharci kasta oo aan kitaabka iyo sunnada ahayn.

Anagoo ka duulayna aayaddan, waxaynu odhanaynaa: Dhammaan sharciyada aan kuwa Alla (swt) ahayn iyo kuwa dejinaya sharciyadaas waa dhaaquut. Qofku inuu kuwaas ku gaaloobo, oo uu ka fogaado mooyaane, masoo geli karo Diinta Islaamka.

Haddaba, aan bixinno tusaalayaal ku saabsan shaqsiyaad iyo hay'ado (ururo) leh sifadan:

### a. Madaxda (Maamulayaasha) iyo Xubnaha Golaha Barlamaanka

Sida aayaddu sheegtay Madaxda maanta talada haysaa waa dhawaaqiin, maxaa yeelay waxay sameeyaan sharciyo ka hor imaanaya sharciga Alla (swt) waxayna dadka ku xukumaan dastuurka kufriga ah. Kuwa madaxdaas ku gaaloobin, oo aan ka fogaan, oo sharcigoodu diidin ma'aha kuwa ku gaaloobay dhaaquut. Xitaa haddii ay tukadaan, oo soomaan, ama ay u maleeyaan inay rumeeyeen, sababtoo ah iimaankoodu waa male Alla agtiisa. Iimaankooduna wax faa'iido ah uma laha iyaga, maxaa yeelay awoodda sharci dejinta iyo maamulka waxaa iska leh Alla (swt). Dadka ayuu u taliyaa, oo xukumaa, oo wuxuu soo rogaa sharciyo ilaahnimadiisa iyo rabbinimadiisa waafaqsan. Taasina waxay ku caddahay Qur'aanka kariimka ah. Kuwa aan fahmin arrinkaas sida uu caalimkii Islaamku sheegayba waa dad Alla ka indho-tiray iftiinka waxyiga:

"Mise waxay leeyihiin shurako oo u Jideeyey diin (xukun) aan Alla idmin?"[47]

47. 42/Shuura, 21

"… Isagu cidna ka yeeli maayo inuu la wadaago xukunkiisa (Isaga ayaa ah kan keliya ee awoodda leh, kan sharci-dejiya oo go'aamiya xaqa iyo baadilka.)"[48]

"… Xukunka waxaa iska leh Alla oo keliya. Wuxuu idin faray inaydaan caabudin cid aan isaga ahayn. Tani waa diinta toosan, laakiin dadka badankiisu ma yaqaaniin."[49]

"waxay ka yeesheen culimadoodii iyo suufiyadoodii Rabbiyaal ilaahay ka sokow iyo ciise ibnu maryama …"[50]

Sidaan tafsiirka aayaddan hore ugu soo sheegnayba, Rasuulku (scw) wuxuu yiri:

"… Caadiy wuxuu yimid Madiina. Waxa uu ahaa hogaamiyihii Qabiilka Dhaay. Asigoo qoorta istallaal qalin ah ugu jirta ayuu u galay Rasuulka (scw). Rasuulku (scw) waxa uu markaasi akhrinayay aayadda 31-aad ee suuradda At-Tawbah. Caadiy wuxuu Nebiga (scw) ku yiri: 'Ma caabudin culimmada!' Rasuulku (scw) wuxuu ku yiri: Haa, laakiin culimmadu xalaashii xaaran, xaarantiina xalaal bay ka dhigeen, oo iyaguna way ugu hoggaansameen. "Tani waa cibaadada ay culimadoodu u sameeyen," ayuu yiri."[51]

Haa, kuwa aan ku gaaloobin, oo aan ka bari noqon dadkii wax ka beddelay sharcigii Alla (swt) ama kuwa iyaga taabacsan ee iyaga u codaynaya, Alla ka sokow waxay ilaahyo ka yeeshteen kuwii sharcigaas u sameeyey. Haddii halkan la yiraahdo, "laakiin kuwaani waa



48. 18/Kahf, 26
49. 12/Yuusuf, 40
50. 9/Tawbah, 31
51. Tirmiidi, 3095; Tefsîru ibni Ebî Hâtim, 2/1784, riwaayadda 10057-10058

dad tukada, sooma, oo ashhaata." Annaguna waxaan ku leenahay:

Sida ku cad aayadda 60-aad ee suuradda Nisa ee aan ku xusnay bilowga mawduuceena, ma aha dad rumee-yey, laakiin waa dad u malaynaya inay rumeeyeen. Alla (swt) ayaa xukunkaas ku riday. Xukunka Alla ee arrinka-ani waa sidaan. Ciddii aan xukunka Alla ku raacsanayn ama u aragta inay xad-dhaaf tahay (!) waxay naftooda u raadsan karaan diin kale, oo ay dooran karaan ilaah kale oo xukunkiisu ku habboon yahay casrigaan, maxaa yeelay xukunka Alla waa ansax ilaa maalinta qiyaame mana isbeddeli doono.

### b. Maxkamadaha Kufriga iyo shirkiga ah

Maanta, maxkamadaha ay dadku u xukuntamaan khilaafkooda, xukunkoodana ay aqbalaan, waxay max-kamadahaasi qaataan go'aanno ka baxsan shareecada Alla (swt), xitaa sharciyo gebi ahaanba iska soo horjee-da. Kuwa isku daya inay mashaakilkooda ku xalliyaan maxkamadahaas, intay u xukuntumi lahaayeen share-ecada Alla, waa dad aan ku gaaloobin, oo inkirin dha-aquutkii lagu amray inay ka bari noqdaan. Dadkaasi iimaankoodu waa mala awaal uun.

Qaar baa leh: "Maanta, ma jiraan maxkamado dadka ku kala xukunta sida shareecada farayso. "Waxaan ku xallin karnaa dhibaatooyinkeena maxkamadahaan." hase yeeshe xaqiiqdu sidaas ma'aha. Qofka muslimka ah ee qalbigiisa imaan ku jiro, oo ku gaaloobo dhaquutka

iyo qawaaniintiisa si kale ayuu u xallin karaa mushaakilkiisa. Tusaale ahaan, haddii laba qof oo Muslim ah ay is khilaafaan, waxay u tagi karaan caalim, waxayna ku xallin karaan mushaakilkooda si waafaqsan diinta Islaamka.

### c. Caadooyinka, Dhaqanka iyo Diinta Awoowayaasha

Maanta, bulshooyin badan, caadooyinka iyo dhaqanka liddi ku ah kitaabka Alla iyo Sunnada Rasuulkiisa ayaa nolosha ka taliya. Dadka intiisa badan marka ay wax qabanayaan ma is weydiiyaan oo maka fikiraan "Islaamku sidee buu u eegayaa arrintan?" ama "Alla (swt) raalli maka yahay camalkaani? Waxa iyaga u muhiimsan waa waxa ay dhaqankooda iyo caadooyinkoodu ka sheegaan arrintan. Tusaalaha ugu cad waa marka aad dadka intooda badan ku tiraahdid kani waa xaaraan aysan dheg jalaq u siin, oo xitaa kaftan ka dhigtaan, laakiin "Tani waa ceeb." Markaad ku tiraahdo, way joogsadaan oo fikiraan.



Dadka intiisa badan, marka ay isku dhacaan ma is weydiiyaan oo ma daneeyaan "Alla iyo Rasuulkiisu maxay ka yiraahdeen arrintan?" Hase yeeshee, waxay u tagaan odayada bulshada oo weydiiyaan, "Maxay dhaqankeenna iyo caadooyinkeenu ka qabaan arrintan?" Kuwaasi waa dadka doonaya inay ku xukuntamaan dhaaquutka, sidaa darteed iimaankoodu waa maleawaal uun, maxaa yeelay waxay ka tageen qur'aanka oo ah dastuurkii Alla (swt) iyo sunnadii sharraxaadda u

ahayd, waxayna ku dhaqaaqaan caadooyinkooda iyo dhaqankooda arrimaha khuseeya noloshooda. Dadkaas markaad ku tiraahdid, "Sidaas ayuu Islaamku u xukumayaa arrintan." Waxay isla markiiba dood ka keenayaan, oo kugu odhanayaan, "laakiin taas kamaynaan maqal aabayaasheena ee ma adigaa saxan, oo aabayaasheena baa khaldan?"

"Markay ku kacaan xumaan (sida inay ku dawaafaan Kacbada iyagoo qaawan) waxay dhahaan waxaan sidaan ka helnay aabayaalkeena. Allana ina faray sidaan. waxaad Dhahdaa Alla ma faro Xumaan ma waxaad ku Dhahaysaan Alla waxaydaan Ogayn?' "[52]

"Marka lagu dhaho raaca waxa Alla soo dejiyey waxay dhahaan: (Maya) waxaynu raacaynaa dhaqankii aan ka helnay Aabayaalkeena (iyo dhaqankii aan caadaysanay). ' Xitaa hadday aabbayaashood waxba fahmin, oo dariiqa toosan waayaan (miyey raaci)?"[53]



## d. Caqliga Ka Baxsan Xadkiisa

Shaki la'aan, caqligu waa mid ka mid ah nimcooyinka ugu waaweyn ee Alla (swt) aadanaha siiyey.

Alla (swt) wuxuu doonayo waa in la isticmaalo nimcadaas. Alla (swt) wuxuu marar badan ku tilmaamay qur'aanka; isagoo leh "Miyeynan fahmeyn?", "Miyeynan ka fikireyn?" Wuxuu dadka ugu yeeraya inay adeegsadaan caqligooda.

52. 7/Acraaf, 28
53. 2/Baqarah, 170

Hase yeeshee, Alla (swt) oo wax walba xadiday, ayaa sidoo kale xadiday caqliga.

Caqligu wuxuu isu dhiibaa wixii Alla (swt) ka yimid. Wuxuu isku dayaa inuu fahmo oo noloshiisa kasoo muuqato waxa waxyigu lagu aasaasay. waxyiga maku miisaamo caqliga, oo dood ma ka keeno.

Caqligu waa u xor arrimaha adduunyada la xariiro. Wuu fakaraa, ka hadlaa, isbarbardhigaa, oo eegaa aayadaha afafka iyo gudahaba, oo wuu daah-fura…

Caqligu hadduu xadkiisa dhaafo oo wixii waxyigu lagu aasaasay dood ka keeno, wuxuu ku xadgudbaya xadkii Alla (swt) oo wuxuu noqonayaa mid dhaaquudoobay.



Nasiib darro, kuwa maanta caqligoodu ilaah ka yeeshta ee ahmiyadda weyn siiya, waxay caqligoodu u rogeen dhaaquut. Marka mid ka mid ah axkaamta Islaamka loo caddeeyo, waxay si toos ah ugu cabbiraan caqligooda, iyadoo u fiirsan inay yihiin Qur'aan iyo Sunno. Hadday caqligoodu ku habboonaato way aqbalaan, hadday ku habboonayn way diidaan. Xilliyadaani dambe, dadka noocan oo kale ah ayaa tiradoodu kor u kacay. Inkastoo lagu akhriyo boqollaal aayado iyo axaadiis, haddana waxay yiraahdaan "Hagaag, sheekhow, aniga caqligeygu kama dhaadhicin."

Qofka caqligiisu waa inuu u adeegsadaa inuu ka fakaro aayadaha afafka iyo gudaha, si'uu u garwaaqsado weynaanta iyo awoodda Alla (swt), iyo si'uu u kordhiyo

iimaankiisa, iyo sidoo kale inuu sameeyo daahfuryo waxtar u leh aadanaha.

Caqligu howshiisu ma'ahan in su'aal laga keeno shareecada Alla (swt) soo dejiyay, oo la aqbalo ama la diido, iyadoo la marayo shaandhaynta caqliga. Sidoo kale waa inaan la iloobin in dadka maanta jooga aysan lahayn caqli dabiici ah oo saafi ah. Caqligiisa waxaa qaabeeyey nidaamka "waxbarasho" ee dhawaaqiinta ay dejiyeen. Waxaa sidoo kale lagu qaabeeyey fayrasyada dhawaaqiinta ay ku faafiyeen shaashadaha dhijitaalka ah, kuwaas oo iimaanka iyo qiyamka akhlaaqda burburinaya. Wuxuu caqligaas oo kale u baahan yahay in lagu sifeeyo iimaanka iyo akhlaaqda wanaagsan, iyo in la helo jiho leh daliilka dhabta ah ee waxyiga, intii la miisaami lahaa oo wax la qiyaasi lahaa.



Ku miisaamidda caqliga ee amarrada rabbaaniga ah waa hool Shaydaan. Markii uu ka hor imaaneyey amarka Alla ee ah "U sujuuda Aadam." Caqligiisa ayuu adeegsaday, wuxuuna yiri:

"Wuxuu yiri (Alla) maxaa kaa reebay inaad Sujuuddo markaan ku faray, wuxuu yiri anaa ka Khayr roon, waxaad iga Abuurtay Dab isagana waxaad ka Abuurtay Dhoobo.' "[54]

In caqliga loo adeegsado awaamiirta rabbaaniga ah, waxay qofka ku ridaa xaalad bahdil ah oo lagu qoslo. Alla (swt) oo abuuray dab iyo dhoobo waxay meesha ka saareysaa inuu caqligiisa u adeegsado labadaas midkee sarreeya.

54. 7/Acraaf, 12

Shaki la'aan, kuwa caqligooda hor dhiga waxyiga, waxay la kulmi doonaan natiijadii sida imaamkii Ibliis oo kale:

"(Alla) wuxuu yiri: "Ka bax meeshaas adigoo Caayan (dulleysan) oo la Dheereeyey. "Cid kasta oo iyaga ka mid ah oo ku raacda, waxaan idinka buuxin doonaa Jahannamo.' "[55]

## 3. Dhaaquut waa waddo kastoo aan jidka Alla loogu dagaallamin iyo ciidamada loo dhisay ujeedadaas

ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ يُقَـٰتِلُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۖ وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ يُقَـٰتِلُونَ فِى سَبِيلِ ٱلطَّـٰغُوتِ فَقَـٰتِلُوٓا۟ أَوْلِيَآءَ ٱلشَّيْطَـٰنِ ۖ إِنَّ كَيْدَ ٱلشَّيْطَـٰنِ كَانَ ضَعِيفًا



"Kuwa (Xaqa) rumeeyey waxay ku Dagaallami Jidka Alla, kuwa Gaaloobayna waxay ku Dagaallami Jidka dhaaquutka, ee la dagaallama asxaabta Shaydaanka. Hubaal khiyaanada Ibliisku aad bay u daciif tahay."[56]

Alla (swt) waxuu aayaddani ku sheegay inay jiraan laba waddo iyo laba kooxood oo ku kala dagaallamaya waddooyinkaas. Ciidanka koo'waad waa mu'miniinta Alla (swt) rumeeyey, oo jidkiisa ku dagaallama; Ciidanka labaadna waa Gaalada dhawaaqiinta rumeeyey, oo jidkii dhaaquutka ku dagaallama. Alla aktiisa ciidamadu waa labo uun, ma jiro mid saddexaad. Ciidanku waa ciidankii Alla ama ciidankii dhaaquut. Tani waa sifada

55. 7/Acraaf, 18
56. 4/Nisaa, 76

kale ee dhaaquutku leeyahay. Ciidan kastoo ciidamada Alla (swt) la wejihiyo waa kuwo dhaaquudi ah, askartiisuna waa kuwo gaalo ah.

Ciidanka lagu dhisay jidkii dhaaquut; Waxaa soo galaya dhammaan noocyada ciidan ee aan sharcigooda (jiritaankoodu) ka helin Alla (swt) oo aan u dagaallamin Iclaa-i Kelimetullah, ujeeddadooduna ay tahay inay ilaaliyaan amarrada dhawaaqiinta.

Haa, qofka doonaya inuu Muslim noqdo waa inuu ku gaaloobo, oo ka bari noqdo ciidamadaas. Waa inuu ku gaaloobo iyaga, si uu u guto shardiga ugu horreeya ee iimaanka oo ah "ku gaaloobida dhaaquut". Waxaana shardiga ugu horreeyo ee diidmadaas ku jirta in ciidamadaas lagu tilmaamo inay yihiin gaalo, oo sidoo kalena laga bari ahaado.



Ciidanka aan sharcigooda Alla (swt) ka helin, waxaa ka mid ah ciidankii Fircoon.

Fircoon waa cadow Alla, oo aan sharcinimadiisa ka soo qaadan Alla (swt) oo ku dhawaaqay dagaal ka dhan ah tawxiidka.

Waxaa jira xog faahfaahsan oo ku saabsan isaga iyo ciidankiisa oo ku sugan Quraanka.

Kaalaya aan qodob qodob u akhrinno ciidankii Fircoon, xaqiiqdoodu iyo halkay ku dambeeyeen.

Fircoon waa dhaaquutkii waqtigiisii:

اِذْهَبْ اِلٰى فِرْعَوْنَ اِنَّهُ طَغٰىۜ ع

"Fircoon u tag! Xadkii ayuu dhaafay/wuxuu noqday dha-aquut." [57]

Waxa uu bulshada u kala qaybiyay kooxo, sidaas darte-edna uu ka dhigay kuwa daciif ah. Dadkii uu daciifiyey ayuu ka dhigtay askar isaga u adeegto:

اِنَّ فِرْعَوْنَ عَلَا فِى الْاَرْضِ وَجَعَلَ اَهْلَهَا شِيَعًا
يَسْتَضْعِفُ طَٓائِفَةً مِنْهُمْ يُذَبِّحُ اَبْنَٓاءَهُمْ وَيَسْتَحْيٖ
نِسَٓاءَهُمْۜ اِنَّهُ كَانَ مِنَ الْمُفْسِدٖينَ



"Runtii Fircoon wuu Isku Kibriyey Dhulka wuxuuna u kala qaybiyey Ehelkeedi Kooxo, Isagoo daciifiyey Koox ka Mid ah Gawracaya Wiilashooda oo Daynaya Haweenkooda wuxuuna ka mid ahaa kuwa wax Fasaadiya." [58]

Alla (swt) marka uu xusayo isaga iyo askartiisa ma kala sa-arin, wuxuuna dhammaantood ku soo rogay hal xukun:

وَنُمَكِّنَ لَهُمْ فِى الْأَرْضِ وَنُرِىَ فِرْعَوْنَ وَهَامَانَ
وَجُنُودَهُمَا مِنْهُمْ مَا كَانُوا يَحْذَرُونَ

""Oo (waxaan rabnaa) inaan ka dhigno kuwa awood ku leh dhulka. (Waxaan rabnaa inaan) tusno Fircoon, Haamaan iyo ciidammadooda inay la kulmaan waxay ka cabsanayaan." [59]

57. 20/Dhaaha, 24
58. 28/Qasas, 4
59. 28/Qasas, 6

وَاسْتَكْبَرَ هُوَ وَجُنُودُهُ فِى الْاَرْضِ بِغَيْرِ الْحَقِّ وَظَنُّٓوا اَنَّهُمْ اِلَيْنَا لَا يُرْجَعُونَ

**"Isaga iyo askartiisii waxay ahaayeen kuwo dhulka isku kibriya xaqdarro. Waxayna u malaynayeen in aanay nagu soo noqonayn."**[60]

اِنَّ فِرْعَوْنَ وَهَامَانَ وَجُنُودَهُمَا كَانُوا خَاطِـٔينَ

"… Xaqiiqdii Fircoon, Haamaan iyo askartooduba way qaldanaayeen."[61]

Haddii saddexdaa aayadood ee aynu soo sheegnay si fiican loo baaro, waxa la arkayaa in Alla (swt) uu Fircoon iyo askartiisii aan kala saarin, oo dhammaantood hal xukun ku riday.



Isaga iyo askartiisii ma kala tagin goortii cadaabku yimid. Dhammaantood waxay ku wada hallaagmeen adduunka:

فَاَخَذْنَاهُ وَجُنُودَهُ فَنَبَذْنَاهُمْ فِى الْيَمِّۚ فَانْظُرْ كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الظَّالِمِينَ

"Sidaas daraaddeed isaga iyo askartiisiiba waannu qabannay oo badda ku tuurnay ee day Siday Noqotay Cidhibtii Daalimiinta!"[62]

60. 28/Qasas, 39
61. 28/Qasas, 8
62. 28/Qasas, 40

Isaga iyo askartiisii, iyagoon la kala saarin, waxay muteysteen cadaab adduun iyo aakhiro, oo waana la naclady:

وَجَعَلْنَاهُمْ اَئِمَّةً يَدْعُونَ اِلَى النَّارِۚ وَيَوْمَ الْقِيٰمَةِ لَا يُنْصَرُونَ

وَاَتْبَعْنَاهُمْ فٖى هٰذِهِ الدُّنْيَا لَعْنَةًۚ وَيَوْمَ الْقِيٰمَةِ هُمْ مِنَ الْمَقْبُوحٖينَ

"Waxaan ka dhignay imaamyo/hoggaamiyeyaal ku casuuma Naarta. Maalinta qiyaame looma gargaarayo. Adduunyada waan lacnadnay. (Mu'miniintu way lacnadi markay xusaan, maalinta qiyaamena waxay noqon kuwa la dheereeyey (la halaagay)."[63]



Sida muuqata fircoon waa hoggaamiye dhulka ku kibray, oo dadkiina ka dhigay kuwo daciif ah, oo u kala qaybiyay. Dadkii uu daciifiyeyna ciidamo ka dhigtay.

Alla (swt) isaga iyo ciidankiisiiba isku heer ayuu ku xukumay. Had iyo jeer hal aayad ayuu ku xusay markuu magac u-bixinayey, cambaareynayey, halaagayey, oo uu ku xukumayey cadaabka aakhiro.

Sababtoo ah Fircoon waa qof caadi ah. Waxa ka dhigaya inuu awood leeyahay waa ciidankiisa. Ciidamadaas awgeed, wuxuu ku dhawaaqi karaa dagaal ka dhan ah Alla iyo Rasuulkiisa, wuxuuna ku dulman karaa ad-

63. 28/Qasas, 41-42

doomada Alla, wuxuuna ka faa'ideysan karaa tacabka dadka. Waxa isaga "Fircoon" ka dhiga waa ciidankiisa, sidaa darteed isaga iyo ciidankiisa wax farqi ah uma dhaxeeyo.

Aan tusaale kasoo qaadanno noloshii Rasuulka (scw):

إِنَّ الَّذِينَ تَوَفّٰيهُمُ الْمَلٰٓئِكَةُ ظَالِمٖٓي اَنْفُسِهِمْ قَالُوا فٖيمَ كُنْتُمْۜ قَالُوا كُنَّا مُسْتَضْعَفٖينَ فِي الْاَرْضِۜ قَالُٓوا اَلَمْ تَكُنْ اَرْضُ اللّٰهِ وَاسِعَةً فَتُهَاجِرُوا فٖيهَاۜ فَاُو۬لٰٓئِكَ مَأْوٰيهُمْ جَهَنَّمُۜ وَسَٓاءَتْ مَصٖيرًاۙ

"Markay Malaa'igtu nafta ka qaaddo kuwii dulmiyay naftooda, waxay dhahaan xaggee joogteen? Waxay dhahaan: 'Waxaan ahayn dad aan tabar lahayn oo dhulka ku nool (oo ah kuwa ku qasbanaaday inay la saftaan mushrikiinta). waxayna dhahaan (Malaa'igtii) miyeyna ahayn Dhulka Alla Wasaac ood ku Hijrootaan dhexdeeda?' kuwaas Hooygoodu waa Jahannamo. Maxay tahay sariir xun!"[64]

Cabdullaahi ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) waxa uu nuzuusha aayaddani ka yiri:

"Muslimiinta qaarkood waxay mushrikiinta la joogeen (Maka) (iyagoo qarsanaya iimaankooda). Waxay kasoo qayb galeen Dagaalkii Badar ee la galay xilligii Nebiga, iyagoo sabab u noqday inay kor u qaadaan tiradoodu. Fallaaro ayaa la gamayey dagaalka. Fallaarahaani waxay ku dhacayeen muslimiintii mushrikiinta

64. 4/Nisaa, 97

ku dhex jiray oo dileysay. Mararka qaarkoodna iyaga ayaa (Muslimiinta dilayey). Marna waxay u dhinteen seefaha la iskula tagey. Markaasaa Alla (swt) soo dejiyey aayaddan."[65]

Ibnu Abii Xaatim (Allaha ka raalli noqdee) waxa uu sidaani kasoo xigtay Ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"Waxay ahaayeen koox ku Muslimay Maka, oo qarsaday Islaamnimadooda. Mushrikiinta ayey dagaalkii Badar kala soo qayb galeen, oo qaarkood ay ku dhinteen dagaalkaas.

Muslimiintu waxay yiraahdeen, 'Kuwaani waxay ahaayeen asxaabteena. Waxay ku qasbanaadeen inay dagaallamaan, wayna dhinteen. Alla ayey dambi dhaaf u weydiyeen. Markaas bay aayadahaani soo degeen."[66]



Waxaa ka loo lagu sheegay aayaddani inay sabab kale u soo degtay, laakiinsee guud ahaan markii la eego riwaayaadka oo dhan, dadkii aan Maka ka haajirin, oo Mushrikiinta kusoo qasbay dagaalkii badar, markii la waydiiyo arrinkaas maalinta qiyaame waxay odhan doonaan, "waxaan ahayn dad daciif ah." Laakiinse Alla (swt) ma ka aqbalin cudurdaarkoodii, oo wuxuu sheegay inay Jahannamo galayaan. Waxa xusid mudan in dadkani aanay hijroon, oo ay sii joogeen Maka inkastoo ay fursad u heleen. Muddo kaddibna, mushrikiintii waxay xoog kusoo geliyeen ciidankooda. Laakiinsee mar haddii aanay hijroon markii ay u suurto gashay,

65. Bukhaari, 4596

66. Tefsîru'l Kur'âni'l Azîm, 2/343, Tafsiirka Suuradda Nisaa ee aayadda, 97'aad

waxay la kulmeen ciqaabtii ay gacmahooda ku kasbadeen, cudurdaarkoodiina lagama aqbalin. Aayad kaddib wuxuu Alla (swt) ka reebay carruurta, haweenka iyo kuwa aan waxba haysan ee fursadda u heysan inay hijroodaan, oo aan awoodin. Taasi waxay ku tusinaysaa dambiilayaasha inay yihiin kuwa aan hijroon inkastoo ay fursad u heleen.

Aayaddan waxay kusoo degtay kuwii naftooda ku waayey, iyagoo ka tirsan ciidankii Mushrikiinta. Kuwa nolosha lagu qabtay waxaa loola dhaqmay sidii mushrikiin, inkastoo ay sheegteen inay yihiin muslimiin. Dadkii maalintaas la qafaashay waxaa ka mid ahaa Cabbaas oo Rasuulka adeer u ahaa. Qaar ka mid ah raggii Ansaar ma rabin inay madax furasho ka qaataan Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) maxaa yeelay waxay isaga dhow yihiin. hadalkaan ayaa dhex maray iyaga iyo Rasuulka (scw):



Waxaa laga weriyey Anas ibnu Maalik inuu yiri:

“Qaar ka mid ah ragga Ansaar ayaa Rasuulka (scw) ka idan weydiistay, oo ku yiraahdeen: ‘noo idan si aynaan uga qaadan madax furashada wiilka walaasheen ee Cabbaas.

Rasuulku (scw) wuxuu yiri: “Ilaah baan ku dhaartaye inaadan ka tegin xitaa dirham ka mid ah madax furashadiisa.”[67]

67. Bukhaari, 4018

Hase ahaatee, Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) waa lagu soo qasbay dagaalka. Waxaa laga soo weriyey Cabdullaahi ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"Rasuulku (scw) markuu madax furasho ka dalbaday (Aabahay) Cabbaas maalintii Badar, Cabbaas wuxuu ku yiri: Rasuulkii Allow waxaan ahay Muslim, laakiinsee reer Maka ayaa igu soo qasbay inaan dagaalka soo aado.'

Markaas ayuu Rasuulku (scw) ku yiri: "Alla ayaa ah midka og waxa aad sheegeyso runtooda. Haddi aad run sheegayso ilaahay ayaa kaa abaal marin doono, laakiin sida muuqata waad nala dagaalamaysay," ayuu ku yiri."[68]



Muslimku waa addoon Alla (swt). Noloshiisa iyo dhimashadiisaba, cibaadadiisa iyo siyaasadiisa, iyo halgankiisaba waa qayb ka mid ah addoonnimada. Hase yeeshee, wuxuu ka qayb qaadan karaa uun qaab dhismeed ka yimid sharcinimadiisa xagga Alla, oo ujeeddadiisu tahay Iclaa-i Kelimetullah.

Qofka Muslimka ah Kama qayb qaato dhismo/xisbi/koox/ciidan/bulsho/jameeco aan jidkii Alla (swt) ku socon, oo ku halgamin. Sidoo kale kama qayb qaadan karo ahdaafyo aan islaamku baneyn ee difaacaya diimaha baadilka ah, sida dimoqraadiyadda iyo calmaaniyadda oo kale, kuwaas oo ilaalinaya, difaacaya, waynaynaya, oo qadarinaya shirkiga. Hadduu ka qayb qaato, maku gaaloobin dhaaquut. Wuxuu sidoo kale ka mid noqonaya kuwa khasaaray, oo ku halgama wadada dhaaquut.

68. Axmad, 3310

## 4. Dhaaquut waa wax kastoo Alla ka sokow la caabudo

وَالَّذِينَ اجْتَنَبُوا الطَّاغُوتَ اَنْ يَعْبُدُوهَا وَاَنَابُوا اِلَى اللّٰهِ لَهُمُ الْبُشْرٰىۚ فَبَشِّرْ عِبَادِۙ

"Kuwa ka fogaaday inay caabudaan dhaaquut, oo Alla u noqday waxaa usugnaaday Bishaaro ee u bishaaree addoomadayda."[69]

Sida Aayaddan laga fahmayo, Dhaaquutku waa wax kastoo Alla (swt) ka sokow la caabudo. Tusaalooyinka soo socda ayaa laga sheegi karaa dhawaaqiinta xilligeena:

Hay'adaha iyo Barlamaanka awoodda loo siiyey inay dejiyaan sharciyo. Madaxda iyo xisbiyada loo ogolaaday inay wax ka beddelaan xalaasha iyo xaaraanta Alla; Dhagxaanta faa'iido iyo waxyeello laga filayo; In la baryo kuwii dhintay, oo gargaar la weydiisto wakhtiyada dhibaatadu jirto; Dadka loo sameeyo acmaasha ay ka mid yihiin nadarka ama allabariga, kuwaas oo lagu sheegay Quraanka iyo sunnada inay ka mid yihiin cibaadada ; Makhluuqyada la siiyey sifooyinkii Alla ha ahaadaan kuwo nool mise kuwo dhintay; Nidaamada aan Islaamiga ahayn ee go'aamiya cidda saaxiibka ah iyo cadowga ah, iyo dagaallada iyo nabadda; Tallaabooyinka iyo afkaarta aan islaamiga ahayn ee wax ka yiraahda fahamaka nolosha iyo jiritaanka ...[70]



69. 39/Zumar, 17
70. . Macluumaad faahfaahsan oo arrintan ku saabsan, eeg. bogga 42-51

## B. Sidee loogu Gaaloobaa Dhaaquut?

"Dhaaquut" waa masalo diini ah. Waxa inagu waajib ah inaynu shareecada ka baranno waxa loola jeedo iyo sida aynu ula macaamili lahayn. Allaha sare wuxuu soo diray rusullo si ay diinta dadka u gaarsiiyaan, oo u sharraxaan:

"(waxaana lala soo dirray) xujooyin iyo Kutub waxaana kugu soo dejinay Qur'aanka inaad u caddayso Dadka waxa loo soo dejiyey, waxaa la rajeynayaa inay fikiraan."[71]

Rasuulladu waxay noogu yeereen inaan Alla (swt) caabudno oo aan ka fogaano dhawaaqiinta:

"Waxaa hubaal ah inaan u soo dirnay ummad kasta Rasuul inuu gaarsiiyo farriinta ah: Caabuda Alla Dhaaqutna ka fogaada. Allana wuu hanuuniyey qaarkood, qaarna waxaa xaq ku noqday baadinimo. Dhulka ku socda oo arka siday noqotay cidhibtii kuwii beeniyey."[72]



Su'aasha kor ku xusan waxaan weydiineynaa rususha, waxaana isku dayi doonnaa inaan ka barano sunnahooda iyo sida aan ula macaamili lahayn dhaaquutka.

Waxaynu eegi doonnaa Nebi Ibraahiim (cs) oo ahaa awowgii nebiyada, oo xitaa Rasuulka (swt) lagu amray inuu jidkiisa raaco, Sababtoo ah Alla (swt) wuxuu tusaale inoogu yeelay isaga iyo halgankiisii, wuxuuna caddeeyay inuu imaam uga yeelay bani'aadamka:

71. 16/Naxl, 44
72. 16/Naxl, 36

"Waxaa idiin sugnaaday tusaale wanaagsan Ibraahim iyo inta la jirta. Markay ku dhaheen qoomkoodii anagu waa idinka bari nahay idinka iyo waxaad Alla ka sokow caabudaysaan. Waan idin Takfiireysiney (waanu diidnay idinka iyo dariiqii aad ku taagan tihiin). Annaga iyo idinka waxaa ina dhex maray cadaawad weligeed ah ilaa aad ka rumaysaaan Alla oo keliya: laakiin Nebi Ibraahim wuxuu u dambi dhaaf weydiiyey Aabihiis, isagoon waxba u hanankarin (intaan laga reebin Arrintaas). Alla yeynnu talo saaran, isagaan u toobad keenaynaa, isagaana loo noqon (Aakhiro)."[73]

"(Nabi) Ibraahim wuxuu ahaa kaligiis Umad. Wuxuu ahaa xaniif (mid ka tagay shirkiga oo diinta Alla u go'ay) oo Alla si kal iyo laab ah u caabuda, mana ka mid ahayn Mushrikiinta. Waxa uu ahaa qof ku shukriya nimcooyinka (Alla). (Alla) wuu doortay oo ku hanuuniyey jidka toosan. waxaana siinay Adduunka wanaag, aakhirana wuxuu ka mid noqon kuwa Suuban. markaas waxaan kuu waxyoonay Nebiyow raac Ummadda (Diinta) (Nebi) Ibraahim ee xaniifka ah (ee toosan) kama mid ahayn Mushriikiinta."[74]



**Siduu Rabbigeen inoo faray inaan raacno Nebi Ibraahiim (cs), sidoo kale wuxuu aad u cambaareeyay ka leexashada jidkiisa:**

"Yaa ka jeedsan kara Ummadda (Diinta) Ibraahiim kuwa maangaabka ah (xun mooyee)?"[75]

73. 60/Mumtaxina, 4
74. 16/Naxl, 120-123
75. 2/Baqarah, 130

## 1. Halgankii Ibraahim ee Dhaaquutka Ka Dhanka Ahaa

قَدْ كَانَتْ لَكُمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ فِىٓ إِبْرَٰهِيمَ وَٱلَّذِينَ مَعَهُۥٓ
إِذْ قَالُوا لِقَوْمِهِمْ إِنَّا بُرَءَٰٓؤُا مِنكُمْ وَمِمَّا تَعْبُدُونَ مِن
دُونِ ٱللَّهِ كَفَرْنَا بِكُمْ وَبَدَا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمُ ٱلْعَدَٰوَةُ
وَٱلْبَغْضَآءُ أَبَدًا حَتَّىٰ تُؤْمِنُوا بِٱللَّهِ وَحْدَهُۥٓ إِلَّا قَوْلَ
إِبْرَٰهِيمَ لِأَبِيهِ لَأَسْتَغْفِرَنَّ لَكَ وَمَآ أَمْلِكُ لَكَ مِنَ ٱللَّهِ
مِن شَىْءٍ ۖ رَّبَّنَا عَلَيْكَ تَوَكَّلْنَا وَإِلَيْكَ أَنَبْنَا وَإِلَيْكَ
ٱلْمَصِيرُ



"Waxaa idiin sugnaaday tusaale wanaagsan Ibraahim iyo inta la jirta. Markay ku dhaheen qoomkoodii anagu waa idinka bari nahay idinka iyo waxaad Alla ka sokow caabudaysaan. Waan idin takfiireysiney (waanu diidnay idinka iyo dariiqa aad ku taagan tihiin). Annaga iyo idinka waxaa ina dhex maray cadaawad weligeed ah ilaa aad ka rumaysaan Alla kaliya, laakiin Nebi Ibraahim wuxuu u dambi dhaaf weydiiyey Aabihiis, isagoon waxba u hanankarin (intaan laga reebin Arrintaas). Alla yeynnu talo saaran, isagaan u toobad keenaynaa, isagaana loo noqon (Aakhiro)."[76]

Haddaba, waxaynu si tallaabo tallaabo ah u eegi doonnaa halgankii Ibraahim (cs), inagoo ka duulayna aayadda 4-aad ee suuradda Mumtaxinah:

76. 60/Mumtaxina, 4

## a. In laga bari ahaado kuwa Caabuda Dhaaquut ee u adeega

"waa idinka bari nahay."

Ibraahiim (cs) markii koo'waad wuxuu ka bari noqday addoommadii Dhaaquut. Runtii tani waa dareen soo jiidasho leh, sidoo kale Rasuulku (scw) ayaa sunnadiisa ka mid ah in Dhaaquutka ka hor addoommadiisii laga bari ahaado oo laga fogaado:

"Waxaad dhahdaa, Gaalooy. Ma caabudayo waxaad caabudaysaan. Idinkana ma caabudaysaan (Rabbiga) caabudi. Mana caabudin waxaad caabuddeen. Idinkuna ma caabudaysaan (Rabbiga) caabudayo. Idinkana Diintiina yaad leedihiin, Anna Diintaydaan leeyahay.' "[77]



Intaanu Rasuulka (scw) ka bari noqon dhaaquutkii ay caabudayeen, cibaadadooda, iyo diintoodi, waxaa uu marka hore ka bari noqday iyaga, isagoo ku yiri: "Galooy". Dabcan, waa inay xikmado badan ka dambeeyaan arrintaan. Waxaan jecelnahay inaan xusno laba xikmad oo aan awoodnay inaan ogaanno:

Midda koo'waad ayaa ah; kuwa sii wada jiritaanka dhaaquut waa addoommadiisii. Haddii aanu jirin mushrik, oo cid dhaaquutka caabudo jirin, shirkigu ma jiro. Waxa Dhagxaanta iyo geedaha, Afkaarta iyo Qubuuraha ka dhigo dhaaquut waa dadka. Ibraahiim (cs) wuxuu marka hore u jeestay isha xumaanta, oo wuxuu ka bari ahaaday kuwii abuuray shirkiga iyo dhaaquutka.

77. 109/kaafiruun, 1-6

Midda adagi waa in dadka laga bari ahaado. Way fududahay in laga bari ahaado dhagxaanta iyo geedaha, qubuuraha iyo asnaamta, iyo diimaha baadilka ah. Kuwaasi faa'iido iyo dhibaato midna ma laha, hase yeeshee way adag tahay in laga bari noqdo qofka caabuda isaga. Sababtoo ah waa qaraabo, waa saaxiib, wuxuu awood u leeyahay inuu wax yeeleeyo, iyo waxaa jira faa'iidooyin uu ka helo isaga… Sababtaas awgeed, imaamyadii Tawxiidku waxay marka hore ka bilaabeen inay ka bari noqdaan meelaha dadka ay ku adag tahay ama ku adkaan doonto.

### b. Ka fogaanshaha Dhaaquut

"…Waxaan ka bari nahay waxaad Alla ka sokow caabudaysaan…"[78]



Dhawaaqiinta inaan ka fogaanno waa mas'uuliyad diineed oo naga saaran iyaga. Magaca kale ee mas'uuliyaddan ayaa ah "In dhinac laga taagnaado Dhaaquutka".

Allaha sare wuxuu yiri:

"Waxaa hubaal ah inaan u soo dirnay ummad kasta Rasuul inuu gaarsiiyo farriinta ah: Caabuda Alla Dhaaqutna ka fogaada. Allana wuu hanuuniyey qaarkood, qaarna waxaa xaq ku noqday baadinimo. Dhulka ku socda oo arka siday noqotay ciribtii kuwii beeniyey."[79]

Dhaaquut kasta waxa uu leeyahay meelo uu ka noqdo dhaaquut, oo uu dadka kaga dhigo inay isaga caabudaan. Qofka mu'minka ahi waa inuu ka bari ahaado

78. 60/Mumtaxina, 4
79. 16/Naxl, 36

oo dhinac ka taagnaado dhaaquutka iyo waxyaalaha lagu caabudo.

İjtinaab waxay ka soo burqantay “Jenb”. Waxay leedahay micnooyin sida dhinac ama gees. Inaad dhinac ka taagnaato dhaaquutka waa inaad dhinac nolosha ka dhigto naftaada, dhaaquutna dhinaca kale. Taasna waa kala fogaansho cad oo waddooyinka iyo khadadka ah.

Haddaynaan ka fogaan ururada iyo hay’adaha isaga ka yeeleyso dhaaquut, sidoo kale haddaynaan jeexin waddooyinka iyo khadadka, ma dhici doonto inaynu ka fogaano, oo dhinac ka ahaano dhaaquutka. Kuma eka oo keliya in Dhaaquut fikir ahaan la diido, oo la takfiireysiyo (lagu sheego inuu gaaloobay). Tani waa qayb ka mid ah mas’uuliyadda, sababtaas awgeed waa inay odhaahda ka bari ahaanshaha la bar-bar socoto ka bari ahaansho ficili ah, oo la raaco dariiqii rususha.



### c. In La Takfiireysiyo Dhaaquut iyo Addoomadiisa

“…Waan idin Takfiireysiney…”[80]

Dhawaaqiinta iyo kuwa isaga u adeega, Alla agtiisa waxay ka yihiin gaalo. Waa Alla kan u arkay in magacaani ku habboon yihiin iyaga… Micnaha İslaamku waa u hoggaansanaan buuxda ee axkaamta Alla (swt). Sidaa darteed magaca Alla u bixiyey iyaga, sidoo kale muslimiintuna waa inay magacaasi siiyaan.

Dhawaaqiinta waxay si xasaasi ah diiradda u saaraan arrintaan. Waxay abaabuleen qalimaan la soo kiraystay,

80. 60/Mumtaxina, 4

culimmo, iyo wadaaddo la iibsaday si ay u milmaan axkaamta takfiirka iyo inay dadka uga digaan takfiir diimeed. Haddii tani ay ku filnaan weydo, waxay adeegsanayaan sharci fulinta iyo garsoorka. Waxaa jira laba sababood oo muhiim ah:

Midda kowaad, in lagu gaaloobo dhaaquut; Waa talaabadii ugu horaysay ee lagula halgamo iyaga, lagana horyimaado nidaamkooda shirkiga, dulmiga iyo gumeysiga ah. Waxay ogyihiin dadku markay bartaan xukunka Alla inaysan iyaga addeeceyn, oo aysan u hoggaansami doonin nidaamkooda shirkiga, dulmiga iyo isticmaarka ah. Yaa jeclaan lahaa oo addeeci lahaa gaal?



Midda labaad, jiritaanka dhaaquut, waxay ka dhigan tahay koox dad ahi inay addoomo noqdaan, koox kalena ay noqdaan ilaahyo. Kooxda laga yeeshtay ilaah; Mudnaan bay leeyihiin, waxay doonaan bay sameeyaan, sharciga ay dejisteen ma qabto iyaga iyo asxaabtooda. Dhaaquut iyo taageerayaashiisa ma rabaan inay lumiyaan mudnaantaas.

Sababtaas awgeed, waxay adeegsadaan dhammaan awoodaha sida siyaasadda, diinta iyo ciidanka.

In la Takfiireysiyo Dhaaquut waa muhiim, sababtoo ah in la Takfiireysiyo dhaaquut waxay la mid tahay in la xidho galuuska kowaad ama in la dhiso aasaaska guriga. Marka galuuska ugu horreeyo si khaldan loo xiro oo dhibaato aasaasi ah dhacdo, khaladaadkani waxay soo noqnoqon doonaan ilaa dhamaadka. La halganka

daalimka waxay ku xiran tahay in lagu gaaloobo isaga iyo asxaabtiisa. Dhanka kale, haddii dariiqa loo maraa la garan waayo, waxaa soo ifbaxaya faham qalloocan oo halganka ku saabsan.

Bal aan sii faahfaahino dadaalka gaar ah ee ay wadaan Dhawaaqiinta sidii arrintaan loo leexin lahaa iyo sidoo kale tuhunka xooggan ee ay wadaan dadka qaswadeyaasha ah ee la soo kiraystay:

## Waajibnimada ah in la Takfiireysiyo Dhaaquutka

## In la Takfiireysiyo Dhaaquut waa Shuruuda Kelime Tawxiidka/Iimanka

"Qasab ma aha Diinta galideedu, Hanuunkii waa ka cadaaday (soocanyahay) Baadida Qofkii ku gaaloobo (takfiireysiyo, ka bari noqda) Dhaaquut ee rumeeya Alla, wuxuu qabsaday xarig (guntay) sugan oo adag (Kelime Tawxiid) iyo wuxuuna soo galay (İslaamka) Allana waa maqle og."[81]



Shardiga lagu xajinayo Kelime Tawxiid/Curwatul Wusqaa waa in la inkiro oo lagu gaaloobo dhaaquut. Sida asalka ah ee aayaddaba, in lagu kufriyo dhaaquut waa caqiidada ah "Al Kufru Bi Dhaaquut". "Kufriga" waxa loola jeedaa in wax dushiisa la daboolo ama la iska indho tiro. Taasi diinta islaamku waxay u dhigantaa in la iska indho tiro caqiidadiisa, oo sidoo kale loogu yeedho magaca gaalnimo ee Alla (swt) siiyey.

Muhiimmadaas awgeed, in lagu gaaloobo dhaaquutka ayaa la sheegay ka hor inta aan la rumayn Alla (swt).

81. 2/Baqarah, 256

Waxaan isla habkaas ku aragnaa ashhaadka. Marka hore,waxaa la yiraahda "لا/La", waxaa la inkiraa ilaahyada baadilka ah ee dhawaaqiinta ah, kuwaas oo Alla ka sokow la caabudo. Markaas kaddib ayaa la yiraahdaa "Illa Allah", oo micnaheedu yahay in Alla keliya la rumeeyo.

Markii Rabbigeen Ahlu-Kitaabka ugu yeeray Islaamka, wuxuu ugu yeeray afar asal. Wuxuuna caddeeyay aqoonsiga Islaamka, iyadoo kuwa ka leexda mid ka mid ah afartaasi ku tilmaamay inay yihiin gaalo:

"Waxaad dhahdaa Nabiyow Ahlu Kitaabow u kaalaya kalimo (odhaah) aan u simannahay aniga iyo adinkaba oo ah inaynaan caabudin Alla mooyee, oynaan lana wadaajin waxba, kana yeelan qaarkeen qaar Rabbiyaal, Hadday ka jeedsadaanna waxaad dhahdaa marag ka noqda inaan Muslimiin nahay (kuwa ka taga shirkiga oo Alla ula noqda tawxiid).' "[82]



Alla (swt) waxa uu afar asal ku caddeeyay kelmedda loo siman yahay. Alla oo la caabudo, iyadoo aan loo shariik yeeleyn, inaan qaarkeen qaarka kale ilaahyo ka yeeshan, iyo kuwa ka leexda mabda'aas in lagu yiraahdo, "Marqaati ka noqda inaan nahay Muslimiin…" In la yiraahdo " Muslim baan ahay." Waxay ka dhigan tahay in la caddeeyo in kan ka jeestay uusan Muslim ahayn. Shaki la'aan, dhaaquutku wuu ka weecday dhammaan mabaadi'daas. Wuxuu dadka ugu yeeray inay isaga caabudaan, oo ay isaga ka dhigtaan Rabbigooda. Sida kelmedda loo siman yahayba sheegeyso, qofka ugu

82. 3/Cali Cimraan, 64

horreeya ee lagala hor tago aqoonsiga Islaamka waa dhaaquut.

## Si loogu bari noqdo Shirkiga waxaa lagama maaarmaan ah in la Takfiireysiyo Dhawaaqiinta

Qofku ma noqon karo Muslim ilaa uu ka toobad keeno shirkiga, oo ka bari noqdo mooyee, sababtoo ah Islaamka waa in laga daahiro shirkiga, oo diinta loo khaalis yeelo Alla. Qofkii u shariik yeelo Alla, waxa uu isu dhiibay ilaah kale, mana fulin inuu u hoggaansamo Ilaah keliya.

Sababtaas awgeed ayuu Alla (swt) shardi uga dhigay ciddii doonaysa inay ka baxdo mushriknimada, ay marka hore ka bari noqoto shirkiga:



"Hadday ka toobad keenaan (shirkiga), oo oogaan salaadda, oo bixiyaan sakada, waa walaalihiinna diinta. Waana u caddaynay aayaadka qoomkii wax garan."[83]

Goorma ayuu qofku ka toobad keenaa shirkiga? Ma ku filan tahay in la yiraahdo "Waan ka toobad keenay shirkiga?"

Su'aashan aan waydiino Rasuulka (scw) oo aan ka maqalno jawaabta uu ka yiri:

Waxaa laga weriyey Fafra ibni Nawfal (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"Waxaan u imid Rasuulka (scw) oo aan ku idhi: Rasulkii Allow! I bar wax aan akhriyo; 'Si aan u akhriyo markaan sariirta tago.'

83. 9/Tawbah, 11

Rasuulkuna wuxuu yiri: Akhri suuradda Kaafirun! Maxaa yeelay, iyadaa lagaga bari noqdaa shirkiga.' "[84]

Suuratul Kafiruun xitaa kuma jirto hal kelmed oo u dhaceysa sidatan, "Waxaan ka bari noqday shirkiga". Taas beddelkeeda, waxaa ku sugan in laga bari ahaado gaalka iyo shirkigiisa, iyo in laga bari ahaado Alla ka sokow waxa ay caabudayaan iyo diinta ay taabacsan yihiin.

Si looga bari noqdo shirkiga, waxaa lagama maarmaan ah in laga bari noqdo arrimahaas oo dhan. Afartan baraa ee lagu soo oogay ayaa sidoo kale waxaa ka mid ah Dhaaquutka.

## In la Takfiireysiyo Dhaaquut; Waxay ka dhigan tahay In raalli lagu noqdo xukunka Alla iyo in la aqbalo magaca uu bixiyay



Waxaa xaqiiqo ah; Takfiirku waa xukun diineed, sidoo kale Xaqa ah in wax lagu soo rogo axkaamta diinta Alla baa iska leh. Waxaynu Mu'minin/Muslim noqonaynaa marka aynu si shuruud la'aan ah u rumayno, oo aynu isu dhiibno dhammaan axkaamta Alla (swt) oo dhan:

"Mu'miniinta Hadalkoodu marka loogu yeero Alla iyo Rasuulkiisu inuu kala Xukumo Dhexdooda waa uun Inay Dhahaan waan Maqalnay Waana Addeecnay kuwaasuna waa uun kuwa Liibaanay."[85]

"Umana banaana nin Mu'min ah iyo Haweenay Mu'minad ah Marka Alla iyo Rasuulkiisu wax xukumayaan Inay khiyaar

84. Tirmiidi, 3403; Abu Dawuud, 5055
85. 24/Nuur, 51

u yeeshaan amarkooda, ruuxiise caasiya Alla iyo Rasuulkiisa wuxuu dhumay baadi Cad."[86]

Alla (swt) wuxuu u soo jeediyey xukunkiisii ugu dambeeyay ee uu ku tilmaamay arrinkaas: Wuxuu ku xukumay dhawaaqiinta aan ku xukumin wuxuu soo dejiyey ee ka leexday jidkiisa, iyo dadkana ugu yeera inay iyaga caabudaan inay yihiin gaalo.

## Sida aan ula dhaqmi doonno Dhaaquut waxay ku xiran tahay xukunkiisa

Waxaa jirtaa laba tallaabo oo aasaasi ah oo lagula macaamilo dhaquutka: In la inkiro, oo dhinac laga taagnaado. Labadan ficilba waa shuruudaha aasaasiga ah ee kelime Tawxiidka.

Diinta Islaamku waxa dadka iyo mas'uuliyadda naga saaran lagu qeexay magacyada loo bixiyay. Haddii qof lagu magacaabo Mu'min/Muslim, waa walaalkeen; Waanu jecelnahay, markuu wax na waydiisto waanu kaalmaynaa, waanu u nikaaxi karnaa, waxaanu noqon karnaa waalidkiisa, waxaanu qaadi karnaa masuuliyaddiisa, haddii uu hoggaamiye noqdo, waanu addeecnaa, hadduu taliye noqdo, ciidankiisa ayaanu ku biireynaa.

Dhinaca kale, hadduu magaca gaal u bixiyo, diinta walaal ka yeeli mayno, gabadhna ma siin karno, oo ma guursan karno; Hadduu madax yahay, ma addeeci karno, mana ka noqon karno mas'uul, gadaashiisa kuma tukan karno, markuu dhinto dambi dhaaf uma weydiin karno, maku tukan karno salaadda janaasada ...

86. 33/Axzaab, 36

Haddii qof uu yahay mu'min ama gaal, waxay saameeyneysaa boqolaal axkaam oo adduunka ah. Haddaan magaca saxda ah loo bixin dhaaquutka, waxaa meesha ka baxaya dhammaan qodobbadii ku saabsanaa isaga, waxaana la tallaabsanayaa xudduudaha Alla (swt) uu dhigay, markaasna wasakh ah iyo nadiif ayaa la isku dari doonnaa.

Qofka mu'minka ah ee akhriya qur'aanka kariimka ah, waxa uu og yahay inuu qur'aanka ka akhriyey qodobadan bog kasta. Aynu isla wada akhrino qaar ka mid ah:

Alla (swt) markuu dadka abuuray wuxuu u kala qaybiyay laba qaybood, oo ku kala xukumay Mu'min iyo Gaal:



"Isagaa idin abuuray. Qaarkiin waa gaalo, qaarna mu'min. Allana waa arkaa waxaad falaysaan."[87]

Alla (swt) wuxuu u kala qaybiyay dadkii laba qaybood, wuxuuna mu'miniinta ku magacaabay kuwa xaqa ku taagan inay yihiin, gaaladana wuxuu ku magacaabay kuwa baadida ku sugan inay yihiin:

"...Waxaana ka mida dadka Cid Alla Hanuuniyay, Waxaana ka Mida ciday ku sugnaatay Baadinimo, Ee socda dhulka oo Eega siday Noqotay Cidhibtii Beeniyayaasha."[88]

Kuwa wanaagsan iyo kuwa xun oo la kala saaro, waa fal soo jiidanaya raalli ahaanshiyaha Alla (swt). Mu'miniintu waa daahir, gaaladuna waa nijaas. Haddaba, labadan kooxood waa in la kala saaraa:

87. 64/Taghabun, 2
88. 16/Naxl, 36

"In Alla kala Bixiyo Xumaanta iyo Wanaagga (Mu'minka iyo Gaalka, waxa jidka Alla lagu bixiyo iyo waxa aan lagu bixin), Yeelana Xumaanta Qaarkeed tan Kale Korkeeda uuna Kulmin Dhammaan uuna Yeeli Jahannamo kuwaasuna waa uun kuwa Khasaaray."[89]

"Ma Muslimiinta yaanu kala mid dhigaynaa Dambiilayaasha. Maxaa idinku dhacaya, sideed u xukumi kartaan saas?"[90]

"Ahlu naarka iyo Ahlu Jannaha isku mid ma'aha. Ahlu jannaha waa kuwa badbaadada helay."[91]

Haddii loo fiirsado aayadahan, Alla (swt) wuu kala saaray xumaanta iyo wanaaga, mu'minka iyo gaalka, ahlu jannaha iyo ahlu naarka. Kuwii aan yeelinna wuxuu ku yiri, Maxaa idinku dhacaya? Xukun caynkee ah ayaad gaareysaan?



Sayid Qutb (Allaha u naxriistee) aan u dhaafno hadalka ugu danbeeyo ee arinkaan ku saabsan oo aan soo xirno arrinka.

"Saasaanu u kala caddaynay aayaadkeena si ay u caddaato waddooyinka dembiilayaasha."[92]

Sayid Qutb (Allaha u naxriistee) wuxuu tafsiirka aayaddan ka yiri:

"Wax aad u xiiso badan ... Tani waxay daaha ka qaadaysaa xeeladda habka Qur'aanka ee ku saabsan İimaanka iyo ku-dhaqanka caqiidada. Shaki la'aan, habkani

89. 8/Anfaal, 37
90. 68/Qalam, 35-36
91. 59/Xashr, 20
92. 6/Ancaam, 55

ujeedku ma aha in la sharaxo oo la muujiyo runta oo kaliya, sidoo kale si loo caddeeyo dariiqa Mu'miniinta saalixiinta ah. Intaa waxaa dheer, waxay sidoo kale ujeedadeedu tahay in la sharraxo oo la muujiyo baadilka si ay u caddaato dariiqa kuwa lumay ee dembiilayaasha ah, maxaa yeelay waxaa lama huraan ah in dariiqa dembiilayaasha iyo mu'miniinta si cad u kala caddaato. Xeerkani waa xeer kala go'aaminaya waddooyinka. Kufriga, xumaanta, iyo dembiga oo la muujiyo, waxay lagama maarmaan u tahay caddaynta iimaanka, wanaagga, iyo kheyrka. Mid ka mid ah ujeeddooyinka Alla ee ku sharraxayo aayadaha waa in la caddeeyo dariiqa dambiilayaasha. Sababtoo ah dhibaato kasta oo mugdi ah iyo shaki kasta oo kasoo baxa mawqifyada iyo dariiqyada dembiilayaasha waxay ka muuqdaan mawqifyada iyo waddooyinka mu'miniinta. Sababtoo ah kuwani waa laba bog oo iska soo horjeeda, waa laba waddo oo iska soo horjeeda, sidaa darteed waa lama huraan in midabada iyo khadadka ay noqdaan kuwo cad.



Sidaasi awgeed, dhaq-dhaqaaq kasta oo Islaami ah, waa inuu marka hore ka bilaabaa go'aaminta dariiqa mu'miniinta iyo dariiqa dambiilayaasha. Waa inay ka bilaabataa in la qeexo dariiqa mu'miniinta iyo dariiqa dambiilayaasha, iyo in la ogaado astaamaha lagu garto mu'miniinta iyo astaamaha lagu garto dambiilayaasha, laakiin adduunka xaqiiqooyinka ee ma'aha adduunka aragtiyaha… Sidaasi darteed, xubnaha dacwada Islaamka: Waddooyinku isku mid noqon maayaan, dari-

iqa iyo tilmaamayaasha, iyo calamadaha mu'miniinta iyo dariiqa iyo habka dhaqdhaqaaqa iyo calamadaha dambiilayaasha. Waxaa la go'aamiyaa si calamadaha iyo xaduudaha u dhexeeya mu'miniinta iyo dambiilayaasha aysan isu dhexgalin, waxay ogaan doonaan dadka ku xeeran midka uu yahay mushrikiga dembiilaha ah.

Islaamka; Waagii uu la kulmay shirkiga iyo sanamcaabudsiga, garasho la'aanta Alla iyo diin guracan, in kastoo aasaas samadu ka yimid yahay, haddana ay beddeleen, oo leexiyeen dad lunsan… Haa, waagii uu Islaamku la kulmay kooxahaas iyo xarakaadkaas, waxaa si cad u kala cadaa dariiqii mu'miniinta saalixiinta ah iyo dariiqii gaalada iyo mushrikiinta dambiilayaasha ah. Suurta gal ma'aheyn inay is dhexgalaan.



Lakiinsee, midna kuwaani ma'aha dhibka maanta haysta dhaq-dhaqaaqyada islaamiga ah ee dhabta ah, hase yeeshee dhibaatadu waa ummadaha kasoo farcamay Muslimiintii hore, ee degan dhuulkii İslaamka ee shareecada Alla lagu xukumi jiray. Markaa waddamadaas iyo ummadahaasi waxay nolosha ka saarayaan oo ka foogaanayaan Islaamka dhabta ah oo ay magac ahaan ugu dhawaaqaan. In kastoo u malaynayaan inay diinta Islaamka caqiido ahaan u qaateen, haddana waxay inkireen mabaadi'da Islaamka oo ah caqiido iyo xaqiiqo, maxaa yeelay Islaamku micnihiisu waa ka maragfurka in Alla ka sokow aan ilaah kale jirin. Waxayna taasi ka dhigan tahay in Alla weyne uu yahay kan koonka abuuray, oo siduu doono u maamulo; Waxaa iimaanka ka

mid ah inay addoomadu u hoggaansami doonaan isaga oo keliya falalkooda ku wajahan cibaadada iyo falalka nolosha la xariira. Waxa sidoo kale ka mid ah inay addoomadu ka qaadan doonaan sharciga xaggiisa oo keliya, yacnii arrimaha la xiriira nolosha inay u hoggaansami doonaan xukunkiisa oo keliya. Marka qofkii aan ka marag furin in Alla ka sokow aan ilaah kale jirin waligiis maka marag furin, mana islaamin. Magaciisa iyo naanaystiisa, iyo abtirkiisaba waxay doonaan ha noqdaane. Marka sidaas loo eego, deegaan kasta oo aan laga dhabayn xaqiiqada dhabta ah ee ka marag kacaysa inaan Alla mooyee ilaah kale jirin, deegaankaas weligii lagama qaadan diintii Alla, mana islaamin.



Maanta waxaa dunida ka jira ummado magacyadoodu Muslim yihiin, oo iyaga laftoodu ay kasoo jeedaan farac Muslim ah. Waxa kale oo jira wadamo hore u ahaan jiray hoygii Islaamka, hase yeeshee sida ummadihii hore oo kale aysan uga marag furin in Alla mooyaane ilaah kale uusan jirin, oo diinta islaamka sidii la faray ugu hoggaansamin…

Tani waa caqabada weyn ee dhaq-dhaqaaqyada islaamiga ah ee dhabta ah kala kulmaan ummadahaas ku nool dalalkan. Caqabadda ugu weyn ee dhaq-dhaqaaqyadaasi wajahayaan ayaa ah hubanti la'aanta iyo jaahwareerka ku xeeran mabda'a ah 'Alla ka sokow ilaah kale ma jiro' iyo sidoo kale micnaha Islaamka iyo micnaha shirkiga iyo jahliga.

Caqabadda ugu weyn ee dhaq-dhaqaaqyadaasi wa-

jahayaan ayaa sidoo kale ah inay kala caddayn Dariiqa Mu'miniinta suuban iyo dariiqa Mushrikiinta dambiilayaasha, sababtoo ah calaamadihii iyo sifooyinkii kala saarayey way isku darsameen, magacyadii iyo tifaftirihiina way isku dhex yaaceen, waxaana xoog batay jahawareerka, kaasoo xitaa gaaray inaan la kala saari karin meelaha waddooyinka ku kala leexdaan.

Cadawga ka dhanka ah xarakaadka islaamiga ah aad bay u yaqaanaan dulleylkaas. Taasi waa sababta ay aad ugu dadaalayaan inay farqiga sii ballaariyaan, si ay dhibka uga dhigaan mid dabacsan oo dhib badan. Haddaba, in xaqa si bareer ah loo sheego, waxay qofka ka dhigeysaa mid eedeysan, oo laga xirayo foolkiisa iyo cagihiisa. sababtoo ah: 'Waxay gaaleysiinayaan Muslimiinta.' Kala saaridda Islaamka iyo kufriga, waxay noqonaysaa arrin laga raadinayo dadka dhaqankooda iyo corfigooda ee ma aha hadalka Allaha sare iyo Nebigiisa sallallaahu caleyhi wasallam…



Taasi waa caqabadda ugu weyn ee jiil kasta wajahaan. Taasina waa caqabad ay waajib ku tahay inay ka gudbaan dadka u hoggaansan diinta Alla.

Kuwa dadka ugu yeera dariiqa Alla, waa inaanay isku dayin tanaasul iyo sasabasho marka ay timaaddo caddaynta xaqa. Waa inaysan dareemin wax cabsi ah ama walaac. Waa inaysan saameynin kuwa iyaga cambaareynaya ama kuwa ka daba qeylinaya oo odhanaya 'bal eegaa, Muslimiintii ayey gaaleysiinayaan."[93]

93. Fî Zılâl-il Kur'ân, 5/231-236, Tafsiirka Suuradda Ancaam, aayadda 55-aad (waa la soo koobay)

## d. Nacayb iyo cadaawad weligeed ah

"… Annaga iyo idinka waxaa ina dhex maray cadaawad weligeed ah ilaa aad ka rumeysaan Alla oo keliya …"[94]

Markaas kaddib, Ahlu tawxiidku waxay u qaadi doonaan nacayb iyo cadaawad ilaa ay ka ruumeeyaan Alla oo keliya. kelmedda Carabiga ee "bada'a" Waxa lagu adeegsaday aayadda. Taasoo loola jeedo soo muuqasho ama bilaabasho. Haddana, aayaddu waxay kala saartaa nacaybka iyo cadaawada, sababtoo ah Nacaybku waa dareen gudaha ah oo qalbiga ku jira; Cadaawadu waa fal dibadda ah, yacnii qofka Muwaaxidka ahi ma aha oo keliya qof qalbiga ka nacayb, sidoo kale si muuqda ayuu u colaadiyaa.



Sababta nacaybkaas iyo cadaawadaas keenay ma aha dhibaato adduun iyo mid shakhsi toona, hase yeeshee waxa keenay oo sababay waa İimaanka iyo Kufriga. Taasna waxay sii soconeysaa ilaa ay mushrikiinta ka rumeeyaan Alla (swt) oo keliya, oo aysan ula shariik yeelin …

Maxaa yeelay micnaha tawxiidku waa in dhammaan ficillada iyo hadallada oo ay ku jiraan dareenka qalbiga, loo jeediyo xagga Alla oo keliya, loona sameeyo Alla (swt) dartiisa uun.

Alla (swt) ayaa ah midka go'aamiya jacaylka iyo nacaybka, saaxiibtinimada iyo cadaawada qofka mu'minka ah ee Ahlu tawxiidka ahi.

94. 60/Mumtaxina, 4

Saaxibkiisu waa Alla (swt), Rasuulkiisa (scw), iyo mu'miniinta. Cadawgiisu waa dhaaquut iyo addoomadiisi.

Hadday shirkiga ka tawbad keenaan, oo Alla ula noqdaan tawxiid, waxay la walaaloobaan mu'miniinta. Xitaa haddii ay dileen boqollaal mu'miniinta ah, oo guryahooda ka eryeen, una jirdileen siyaalo kala duwan… Maku jiraan buuggiisa wax xisaabaad ah oo la soo dhaafay ama dareen shakhsi ah oo ku saabsan aargoosiga, hase yeeshee Qalbigiisa waxaa ku sugan kuwa midnimada Alla u hoggaansamay iyo kuwa u shariik yeelay…

## 2. Halgankii ficiliga Ahaa ee Ibraahim ee Dhawaaqiinta

Ibraahiim (cs) halgankii u lagalay dhawaaqiinta kuma aysan ekeyn mid afka ah oo keliya , sidoo kale wuxuu la galay halgan ficilli ah: 

"Dhammaantood wuu wada burburiyey sanamkii weynaa mooyaane. Laga yaabaa inay kala tashadaan (Sanamkii weynaa) wixii dhacay…"[95]

Dhaaquut waa munkarka ugu weyn ee diinta islaamka. Sida munkarada oo dhan, waxa ugu weyn waa in meesha laga saaro oo dhuulka laga tirtiro.

Waxaa laga weriyay Abuu Saciid Al-Khudri inuu yiri, Rasuulku (scw) wuxuu yiri:

"… Qofkiinna munkar arka ha ku beddelo gacantiisa, hadduusan awoodinna ha ku beddelo carrabkiisa, hadduusan

95. 21/Anbiyaa, 58

taas samayn karinna ha ka necbanaado qalbigiisa, laakiin tani waa nooca iimaanka ee ugu daciifsan."[96]

İn gacanta lagu saaro dhaaquut waa jihaadka ugu sareeyo ee diinta islaamka. Haddii mu'miniinta ay awoddooda gaarsiiyaan meeshii ugu sarreysay oo ay yeeshaan dowlad Islaami ah iyo calan Islaami ah, waxaa waajib ku ah waa jihaadkaas.

Hadafka jihaadka ee diinta islaamku waa in bini'aadamka laga badbaadiyo is addoonsiga, yacnii dhaaquutka- lagana dhigo kuwo addoon Ilaah keliya ah. Waajibkaasna wuu sii jirayaa ilaa diinta Alla loo hoggaansamo, oo aanay jirin wax fidno ah oo dhulka ku hadhay:



"La dagaallama ilaa fitnadu/ shirkigu ka dhammaanayo oo diinta/maamulka u ahaan Alla. Haddii ay joojiyaan waxa ay ku kacayaan, lalama Collaytamo cidaan daalimiinta mooye."[97]

Hadday Mu'miniinta waayaan dawlad Islaami ah iyo calan Islaami ah, sida maanta jirtaba waxay la halgamayaan dhawaaqiinta, iyagoo u adeegsanaya afkooda. Waxay caddeynayaan xukunka Alla (swt) ee dhaaquutka la xariira, sidoo kalena bulshada u sharraxa isaga iyo nadaamkiisa baadilka ah, iyagoo afkooda kula jihaadaya.

Kuwa aan middaas awoodin qalbiga ayey ka naci doonaan. Inkastoo tani ay tahay nooca ugu daciifsan ee iimaanka, haddana waa muhiim, maxaa yeelay kuwa aan gacantooda iyo carabkooda kula dagaalami karin

96. Muslim, 49
97. 2/Baqarah, 193

dhaaquutka, waxaa laga yaabaa in muddo kaddib ay u hoggaansamaan aqlabiyadda, oo ay jacayl u qaadaan, oo ay noqdaan kuwo aan dareensanayn munkarka. Waxay taasna sababeysaa in iimaanka qofka uu buro. Sida aan sheegi doonno, in la jaclaado dhaaquut waa mid ka mid ah canaasiirta burisa "Laa'ilaaha illallah", sidaa darteed xitaa kuwa aan waxba samayn karin waxaa ku waajib ah waa inay necbanaadan isaga.

## C. Kuwa Rumeeyey Dhaaquut

Qofku ama Alla ayuu rumeeyay oo ku gaaloobay dhaaquutka, ama wuxuu ku gaaloobay Alla (swt) Ma jirto meel dhexe:

"Miyeydaan arkayn kuwa la siiyey qayb (cilmiga) kitaabka ah. Waxay rumeeyeen Jibtu iyo Dhaaquut, waxayna ku dheheen Gaalada: "Kuwaani waxay ku sugan yihiin Jid ka toosan Mu'miniinta."[98]



Kuwa rumeeyay Dhaaquut waa kuwa aan inkirin isaga. Si taasna u dhacdo loomana baahna inay Dadkani yiraahdaan, "Waxaan rumeynay dhaaquut." Sida Shareecadaba qabto, Kuwa aan inkirin dhaaquutka waa kuwo isaga rumeysan, maxaa yeelay dadka aayaddu kusoo degtay waa hoggaamiyaashii iyo culummadii Ahlu-kitaabka. Marna ma aqbalaan xukunka ah inay yihiin kuwo rumeeyey dhaaquutka, sidaa darteed mar haddii aysan inkirin dhaaquutka, Islaamku wuxuu ku xukumay inay yihiin kuwo rumeysan dhaaquutka.

98. 4/Nisaa, 51

Aayaddan waxay daaha ka rogtay sifada kuwa rumeeyay dhaaquutka oo ah arrin aan la beddeli karin. Taas oo ah in gaalada laga door bidayo mu'miniinta oo la sheego in gaaladu ay waddo toosan ku taagan tahay. In dariiqa gaalada laga hormariyo dariiqa mu'miniinta, lagana hormariyo dhibkooda dhibka mu'miniinta, lagana hormariyo dariiqooda habka mu'miniinta waa astaamo kala duwan oo isku sifa ah.

Haddii qofku ka tago habka halgan ee Alla (swt) u jiheeyey mu'miniinta, uu ku halgamo habab laga soo qaatay dunida reer galbeedka – sida doorashooyinka dimoqraadiga ah iyo ururrada liberalka ah, oo haddana uu ugu yeero "Tani waa wax waafaqsan islaamka", taasi waxay ku tusinaysaa inuu rumeysan yahay dhaaquut.



## II. In la yiraahdo Kelmeddaani iyadoo cilmi loo leeyahay

Shardiga kale ee badbaadada Kelime Tawxiidku waa cilmi, yacnii, waa in qofka kelmeddaani yiraahda isagoo og wuxuu diidayo iyo wuxuu aqbalayo:

فَاعْلَمْ اَنَّهُ لَٓا اِلٰهَ اِلَّا اللّٰهُ

"Ogaada inuusan jirin ilaah (cibaado mudan) oo aan Alla ahayn ..."[99]

Alla (swt) wuxuu aayaddani Rasuulka (scw) ka doonaya inuu yiraahdo kelime Tawxiidka, isagoo cilmi u leh. Waxaana lagu yiri "Ogow in Alla mooyee aan ilaah kale jirin." Aayaddani waxa laga fahmayo waa: In kelmed-

99. 47/Muxammad, 19

daan la yiraahdo adigoo cilmi u leh waa mid ka mid ah shuruudaha "Laa'ilaaha illallah".

Waxa laga weriyey Cusmaan (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, Rasuulku (scw) wuxuu yiri:

مَنْ مَاتَ وَهُوَ يَعْلَمُ أَنَّهُ لَا اِلٰهَ إِلَّا اللهُ دَخَلَ الْجَنَّةَ

"Qofkii dhinta isagoo og inaan Alla mooyee ilaah kale jirin wuxuu gelayaa jannada."[100]

Si ay kelime Tawxiidku Adduun iyo Aakhiraba, qofkeedana wax u tarto, waa in la yiraahda iyadoo aqoon loo leeyahay.

Kelmed uu qofku ku yiraahdo isagoon micnaheeda garanayn ma ka aha masuul. Tusaale ahaan, haddii ninku guursado naag ajnabi ah oo uusan luuqadeeda garanayn, oo mid ka mid ah dadka isaga ka ag dhow ay luuqadooda weedhan ka baraan "waan ku furay" oo xaaskaada ku dheh waa weedh wanaagsan ku yiraahdaan." Markaas kadidbna xaaskiisa ku yiraahdo waan ku furay. Hadday naagtu u timaado xaakimka shareecada oo ay ku tiraahdo ninkeyga ayaa i furay. Waxaynu wada ognahay inaanu xaakimku kala fureynin, maxaa yeelay ninku waxa uu sheegayo maba garanayo micnahooda saxda ah. Mar hadduusan garanayn micnahooda, weedhaasi ma ansaxayso adduun iyo aakhiraba, sidoo kale kelmedda "Laa'ilaaha illallah" waa saas. Haddii la yiraahdo iyadoon micnaheeda la garaneyn, wax faa'iido ah u ma leh qofkii lahaa.

100. Muslim, 26

## A. Kelmedda Ashhaadka Waxay Tilmaamaysaa shardiga cilmiga ah

Marka aan soo galayno diinta Islaamka, waan shahaadanaa: "Waxaan ka marag kacaynaa inuusan jirin ilaah xaq (lagu caabudo) oo aan Alla ahayn. Waxaan ka marag kacaynaa inuu Maxamad yahay addoonkiisii iyo rasuulkiisii. Si diinta loo soo galo, Alla (swt) wuxuu doortay kelmedda Ashhaadka. Sabab gaar ah ayaa jirta. Qaamuuska Carabiga, Ashhaadka wuxuu ka soo burqamay xididka ah "Sha-hi-da". Asalkani waxa uu leeyahay saddex micne oo aasaasi ah: in xaadir looyahay, in cilmi loo leeyahay iyo in la caddeeyo.[101]



Hadduu qofku wax ka marag kacayo, waa inuu ka marag kacaa dhacdada uu goobjoog ka ahaa. Waa inuu indhihiisa ku arkaa, oo aqoon u lahaada dhacdada. Markaas kaddibna, waa inuu dadka kale la wadaago xogtaan. Hadduu qofku ka hadlo wax aanu markhaati ka ahayn, oo aanu xog ka heysan, qofkaasi wuxuu noqonaya mid been ku markhaati furay.

Si la mid ah qofka ilaahnimada Alla ka marag kacaya, oo garanayo waxa uu ka marag kacayo sidii inuu indhihiisa ku arkay oo kale, qofkaasi maraggiisu waa sax, haddii kale maraggani ma'aha mid sax ah.

Allaha sare wuxuu addoomadiisa ka doonaya inay ka marag furaan xaqa iyagoo og:

101. eeg Mu'jemu Mekâyîsi'l Luğa, 3/221, maqaal Sh-h-d

"Mana hantaan kuway baryaan Alla ka sokow wax shafeeca ah Marka laga reebo ciddii xaqa qirta iyagoo og."[102]

ilaahyada baadilka ah ee mushrikiinta ay caabudaan awood uma laha inay wax u shafeecaan, hase yeeshee Kuwa xaqa shafeeco la siin doono waa kuwa xaqa qiray iyagoo og.

Haddaba, sidee buu qofku ugu marag furaya xaqa isagoo og?

"Haddii uu ku marag kaco isagoo cilmi iyo aqoon u leh…"[103]

"Haddii uu midnimada Alla u hoggaansamo si cilmi iyo yaqiin leh…"[104]



## B. Aqoonta Tawxiidku waa fidhro

Allaha sare Intaanu abuurin addoomadiisa, iyagoo ku sugan caalamka ruuxiga ah, wuxuu la galay ballan ku aadan midnimadiisa:

"(Xusuuso) markuu Rabbigaaga ka qabtay Dadka Dhabarkooda Faracoodii uuna marag uga Yeelay Naftooda, kuna yiri Miyaanaan Rabbigiina ahayn, oy dhaheenna inaad Rabbigeena tahay yaan Marag Kacnay, inaydaan dhihin Maalinta Qiyaame annagu Waan halmaansanayn kan. Ama aydaan Dhihin waxaa wax la wadaajiyey (Alla) Aabbayaalkanagii mar hore annaguna waxaan nahay farac ka Dambeeyey ee miyaad noo halaagi waxay faleen Xumo falayaal."[105]

102. 43/Zukhruf, 86
103. Tefsîru'l Kur'âni'l Azîm, 7/223, Tafsiirka Suuradda Zukhruf aayadda 86'aad
104. Tefsîru't Taberî, 21/655, Tafsiirka Suuradda Zukhruf aayadda 86'aad
105. 7/Acraaf, 172-173

Waxaa sidoo kale aayaddani ug yeernaa aayadda axdiga/ballan-galidda. Sababta axdigaasi dadka loola galay intaanay la abuurin waxay ahayd in marmarsiinyo meesha laga saaro. Alla (swt) wuxuu dadka ka qaatay ballan si aysan Maalinta qiyaame u dhihiin: "Waxaan ahayn kuwo halmaansan tan. Ama "Waxaan ku dayannay awoowayaasheen."

Allaha sare waxuu xogtaani ku beeray bini'aadamka. Qof kasta waxa uu ku dhashay fidhrada ah in Alla (swt) oo keliya uu mideeyo, isaga oo keliya uu caabudo, oo aanu waxba la wadaajin:



"Ee wajigaaga u jeedi xagga diinta adigoo xaniif ah (muwaaxid aan Alla wax la waajinayn). (u hoggaasan) fidhrada uu dadka ku abuuray, ma jiro wax isbeddel ah oo ku yimid abuurista Alla, saasina waa Diinta toosan laakiin dadka badankiisu ma oga."[106]

Sababta ay dadku u xasuusan waayeen ballantaan iyo xogta fidhradoodu ku sugan ayaa ah, inaysan danayn, oo aanay ka fikirayn. Qof kastaa wuxuu fidhradiisa iyo caqligiisa ku og yahay, in haddii qof uu wanaag u sameeyo mudan yahay in loo mahadceliyo, sidoo kale inaan loo mahadin cid aan ka ahayn qofka wanaaga kuu sameeyay. Si taas loo ogaado waa mid aan loo baahnayn aqoon gaar ah, tababar ama macalin. Haddaba, haddii uu abuuruhu yahay Alla, oo uusan mushrigana arrinkaas ka warwareegan karin – waa in la caabudaa isaga (swt) oo keliya.

106. 30/Ruum, 30

Sidoo kale, qof kasta wuxuu fidhri ahaan u garanayaa, haddii qof kale hanti uu isaga leeyahay ku tasarrufo, isagoon fasax ka heysan, inay taasi tahay dulmi, baad iyo xaq daro. Si xogtaan loo ogaado looma baahna aqoon gaar ah ama macalin. Haddaba, haddii Samooyinka iyo dhulkuba ay yihiin hanti Alla, oo mushrik kastana fidhradiisa ku sugan tahay sida awoodda, maamulka iyo xukunka inay hanti Alla yihiin. In kastoo isaga (swt) jiro, haddana kuwa sameeya sharciyo kasoo horjeeda sharcigiisa, waa kuwo awoodda baad ku haysta oo dulmiya.

Taasna waa waxa loola jeedo in tawxiidka fidhri yahay ee lala dhashto. Si taas loo fahmo, waa in qofku fekeraa, welwelaa oo uu daneeyaa. Inta lagu guda jiray xilligii fedredka(xilligii aan nebi la soo dirin), oo aan nebi iman 600 sano, dadka qaar ka mid ah waa sababta ay u noqodeen muwaaxidiin xaniif ah, oo daba raaceen aqoonta fidhrada ahi. Waxay awoodeen inay la kulmaan tawxiidka, sababtoo ah way fikireen oo walwaleen. Kuwa diintii awoowyaasha ku dhaqma oo aan caqligooda ka faa'iidaysan, oo aan codka damiirka dhegaysan, waxay raaceen wadadii awoowyaashood, oo Alla ayey u shariik yeelen:



Waxaa laga weriyey Cabdullaahi ibnu Cumar (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"…Zayd ibni Camr waxa uu cambaarayn jiray xoolihii Quraysh ay sanamyada u gowraci jireen, oo uu odhan jiray: 'Idaha Alla ayaa abuuray. Samada ayuu uga soo dajiyay biyo, wuxuuna uga soo bixiyey dhulka doog.

Markaa waxaad ku gowracaysaan magaca cid aan Alla ahayn.' ..."[107]

Maxay tahay daliil cad ah oo kooban! Alla ariga abu-uray, biyona u soo dejiyay, wuxuuna uga soo bixiyey dhulka doog... Qof kasta fidhradiisa ayuu ku garanayaa oo aqbalayaa. Haddaba, muxuu Alla (swt) ugu gowraceyn, oo ugu gowraca asnaamta, dhagxaanta, iyo qubuuraha?

Meel kale ayuu sidani ku yiri:

"Marka wax loo kala saaro mid mid, ma hal Rabbi ayaan caabudaa mise kun Rabbi? Laat iyo Cuzza la-badooduba waan ka tegey oo diiday. Tani waa waxa dadka aadka u sabar badan iyo kuwa xoogga badan ay sameeyaan..."[108]



Marka qof kasta su'aashaan aad weydiiso, jawaabtu isma beddeleyso! Ma in hal gobol yeesho hal hogaa-miye mise boqolaal hoggaamiyaal ah? Qof kasta fidhri ahaan iyo caqli ahaanba waa ogyahay in wax ka badan hal hoggaamiye ay sababi doonto fowdo. Wuxuuna door bidayaa hal hoggaamiye.

Laakiinsee si uu taas u sameeyo waa inuu ka fikiraa oo caqli-galiyaa. Ma Shareecada Alla ayaa ah in lagu xukumo koonka, mise rabitaanka iyo hawada boqollaal qof oo la doortay? Haddii uu qofku su'aalo tan, wuxuu gaari doonaa macluumaadka saxda ah.

Sidaa darteed, waxaanu leenahay; Aqoonta Tawxii-

107. Bukhaari, 3826
108. Sîretu ibni Hisham, 1/226

dku waa lagu dhashtaa. Qofkasta waxa uu nuxurkiisa ku xambaarsan yahay aqoontan, waxana uu ku dhashtaa aqoontan:

Waxa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"… Ilmo kastaa wuxuu ku dhashaa si waafaqsan fidhrada. Markaas kaddib waalidkiisa ayaa ka dhiga Yuhuudi, Masiixi ama Mejuusi …"[109]

Dadka qaar baa aqoontan daba raacda, oo su'aalaa, oo ka fikiraa oo guud ahaan gaaraa tawxiidka. Dadka qaar waxay isku daraan aqoonta fidhrada iyo dacwada rususha, oo si faahfaahsan ayey u fahmaan oo ugu nolaadaan Tawxiidka.



Sida Rabbigeen sheegayba, badi ma fakaraan, ma gartaan, oo dariiqii awoowayaashoodee maraan, sidoo kale Ma maqlaan codka fidhrada iyo baaqa rususha. Waxay ku qancaan waxa ay helaan, oo aqlabiyadda ayey raacaan, oo kana leexdaan fidhrada iyo tawxiidka:

"Haddii aad raacdo inta badan ee dhulka ku nool, waxay kaa dhumiyaan jidka Alla. Mana Raacayaan waxaan Malo ahayn, waxayna ku dhaqmaan keliya inay qiyaasaan."[110]

"Waxaad dhahdaa ku socda Dhulka oo eega siday noqotay cidhibtii kuwii idinka horreeyey. badankoodu waxay ahaayeen mushrikiin.' "[111]

109. Bukhaari, 1359; Muslim, 2658
110. 6/Ancaam, 116
111. 30/Ruum, 42

"Dhab ahaan, in badan dadkii iyaga ka horreeyay way dhumeen."[112]

## C. Dadka Maanta Jooga Tawxiidka ayey ka Jeedsadeen

**Alla ayaa mahad iska leh, maanta, qur'aanka iyo sunnaha nebiga (scw) ayaa aduunka oo dhan ku faafay. Way u fududahay qof walba inuu helo. In kastoo aadanuhu uusan daba socon xogta fidhrada, haddana waxaa jira qur'aanka iyo Sunnada, oo tawxiidka ku sharraxaya daliil cad oo sugan:**

"Waxaad Dhahdaa yaa ugu Weyn Marag waxaad Dhahdaa Alla Maragga Dhexdeena ah, waxaana lay waxyooday Quraankan inaan idiinku Digo Idinka iyo cidduu Gaaro, Idinku ma waxaad Marag Furaysaan Inay Alla la Jiraan ilaahyo kale, waxaad Dhahdaa ma Marag Furayo (Saas) Waxaad Dhahdaa Alla waa uun ilaah keliya Anuguna waxaan ka Bari ahay waxaad la Wadaajinaysaan.' "[113]



"Waxaad dhahdaa: 'Daliillada dhammays tiran/cad/ugu sarreeyo/ugu saameynta badan waxay u sugnaadeen Alla. Hadduu doono wuu idin hanuunin lahaa dhammaan.' "[114]

"(Waxaan u dirnay) Rasuullo bishaareynaya oo u digaya. Si ay u waayaan rususha dabadeed dadku wax xujo ah oo ay Alla u soo bandhigaan (marmarsiinyo ay ka mid yihiin 'ma anaan garanayn, ma aan maqal'). Allana waa Al caziiz (oo

112. 37/Saafaat, 71
113. 6/Ancaam, 19
114. 6/Ancaam, 149

wax walba ka adkaada) waana Alxakiim (oo xukunka iska leh iyo ximada badane ah."[115]

In kastoo ay cad yihiin kitaabka iyo Sunnada Rasuul-ka, haddana dadku diintu ma danaynayaan. Sida shalay oo kale, maantana way ka leexdeen fidhradii iyo dali-illadii shareecada ahaayeen. Taasi cagsigeeda, waxay raaceen waxyaabihii ay ka heleen awoowayaashooda; Waxay ku qanceen waxyaabahaasi, iyagoon su'aalo ka keyn oo ka fekerin.

Shaki la'aan, tani waa dembi ka weyn, oo ka culus kii hore. Magaca diineed ee hab-dhaqankan waa kufriga icraad/ka jeedsashada. Kufrigaani ah in laga jeedsado diinta Alla iyo kitaabkiisa, daliilladiisa diineed ee shar-ciga ah iyo kuwa koonka ku sugan…



Rabbigeen (swt) wuxuu iyaga ka yiri:

"Maxaa ku dhacay oo ay waanada ugu jeestaan? Iyagu waa sida dameero (baqaya), oo libaaxa ka cararaya."[116]

"Ruuxii ka jeedsada xuskayga (kutubta aan soo diri doono) wuxuu mudan nolol cidhiidhi ah, waxaana soo bixinaynaa maalinta qiyaame isagoo araga la."[117]

"ruuxna kama dulmin badana cid lagu waaniyey aayaad-ka Rabbigiis markaas ka jeedsaday xageeda oo halmaamay wuxuu ku hormarsaday gacmihiisu, waxaan yeelnay quluu-btooda dabool inayan fahmin quraanka dhagahooda culays haddaad ugu yeerto hanuunkana ma hanuunayaan waligood."[118]

115. 4/Nisaa, 165
116. 74/Mudathir, 49-51
117. 20/Dhaaaha, 124
118. 18/Kahf, 57

"Samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhexeeyana waxaan xaq iyo muddo magacaaban ahayn uma aannaan abuurin, gaaladu waa kuwa ka jeedsada wixii looga digay."[119]

Qofka aan ka fekerin xogta tawxiidka ee fidhradiisa ku sugan, oo aan u fiirsan caddaymaha koonkan yaala waa dembiile, sababtoo ah waa qof aan daneyn fidhrada Alla (swt) uu ku abuuray. Qofkii iska daaya ee dhegaha ka furaysta xogta tawxiidka, oo ka jeedsada, in kastoo qur'aanka iyo dacwadii nebiyada ay soo gaareen waa dembiile weyn.

## III. Kelmeddaan In la Yiraahdo Iyadoo La Yaqiinsan yahay Oo Aan Shaki iyo Shubhaad ku jirin



Shuruudaha kelime Tawxiidku waxaa ka mid ah in bilaa shaki la'aan kelmeddaan si yaqiinsan loo yiraahdo.

إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ اٰمَنُوا بِاللّٰهِ وَرَسُولِهِ ثُمَّ لَمْ يَرْتَابُوا وَجَاهَدُوا بِاَمْوَالِهِمْ وَاَنْفُسِهِمْ فِي سَبِيلِ اللّٰهِ اُولٰٓئِكَ هُمُ الصَّادِقُونَ

"Kuwa mu'miniinta ah waa kuwa uun rumeeyay Alla iyo Rasuulkiisa oon shakiyin, kuna jihaada Xoolahooda iyo naftooda jidka Alla dartiis, kuwaasi waa kuwa runlowga ah."[120]

Koox reer Baadiyaha ah ayaa sheegtay inay Alla rumeeyeen. Alla (swt) waxa uu caddeeyey inaanay weli rumaysnayn, inkastoo ay sida muuqata ay u aqbaleen

119. 46/Axqaaf, 3
120. 49/Xujuraat, 15

Islaamka, haddana iimaanka dhabta ahi qalbigooda kuma degin:

"Waxay dheheen reer baadiyihii carbeed waan rumaynay (xaqa), waxaad ku dhahdaa maydaan rumaynin, laakiin dhaha waan is dhiibnay, Iimaankuna wali Quluubtiinna ma gelin, haddaadse addeecdaan Alla iyo Rasuulkiisa kama nusqaamiyo camalkiinna waxba, Shaki la'aan, Alla waa dembi-dhaafe (oo dembiga dhaafa, dembigana asturo, addoonkana ka ilaaliya xumaanta dembiga), waana Naxariiste (Addoomadiisa u naxariista)."[121]

Alla (swt) Wuxuu aayadda ku xigta ku sharraxaya kan mu'minka dhabta ah, marka mu'minka dhabta ahi waa qof aan iimaankiisa kaddib shakiyin, oo dhawra yaqiintiisa.



Rasuulku (scw) isagoo sharraxaya ashhaadka qofka jannada geyneysaa wuxuu yiri:

Waxa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

أَشْهَدُ اَنْ لَا اِلٰهَ إِلَّا اللّٰهُ واَنِّى رَسُولُ اللّٰهِ لَا يَلْقَى اللّٰهَ
بِهِمَا عَبْدٌ غَيْرَ شَاكٍّ فِيهِمَا إِلَّا دَخَلَ الْجَنَّةَ

"Waxaan ka marag kacayaa inaan Alla mooyee ilaah kale jirin iyo inaan ahay rasuulkii Alla. "Haddii addoon uu Alla la kulmo shaki la'aan isagoo ku salaynaya labadan markhaati, jannada ayuu gelayaa."[122]

121. 49/Xujuraat, 14
122. Muslim, 27

## A. Maxaa Loo Baahan Yahay Si Aan Yaqiin Ugu Sugnaano?

### 1. Barashada Cilmiga

Haddaba, si aynu kelmedda tawxiidku ugu liibaanno, waa inaynu ilaashanaa mid ka mid ah shardigeeda yaqiin, laga soo bilaabo wakhtiga ugu horreeya ilaa neefta ugu dambeysa. Taasna wadada loo maro waa barashada diinta. Waxaa loola jeedo barashada diinta waa in la isku dayo, in la akhriyo, oo la fahmo qur'aanka, kaasoo daliilladiisu ay cad yihiin oo la fahmi karo, sidoo kale sunnada Nebiga (scw), maxaa yeelay yaqiintu waa aqoon; Dhanka kale, Shakiga iyo shubhaadku waa walaalaha jahliga. Mahad waxaa iska leh Rabbigeen, oo wuxuu Qur'aanka nagaga yeelay mid lagu bogsodo:



"Dadow! Dhab ahaan, (waxaa idin yimid Kitaab) waana waanada Rabbigiina oo dawo u ah (cudurada) laabta ku jirta, waana hanuunka iyo naxariista Mu'miniinta."[123]

Qalbiyadu waa sida jirka oo kale, way bukoodaan mararka qaarkood. Cudurka ugu khatarta badan ee ku dhaca qalbigu waa shubhaadka, sababtoo ah waxay buriyaan caqiidada qofka iyo waxayna sidoo kale buriyaan kelmedda "Laa'ilaaha illallah". Quraanka waxaa loo soo dejiyay in daawo u noqdo cudurrada ruuxiga ah ee quluubta ku dhaca. Marka ay qalbiyadu shakiyaan, caddaymaha qur'aanka ee cad ee waxtarka leh, wuxuu hagaajiyaa quluubta, wuxuuna u bogsiiya sida daawada sunta lagaga hortagga oo kale:

123. 10/Yuunus, 57

"Waxaad dhahdaa: 'Daliillada dhammaystiran/cad/sarreeya/ee ugu saameynta badan waxaa iska leh Alla. Hadduu doono wuu idin hanuunin lahaa dhammaan.' "[124]

Mararka qaarkood qalbiyadu waxay waayaan jidkooda, oo bartamaha mugdiyada ayey ku haraan. Qofku waxa uu ku wareera waxa saxan iyo waxa khaldan. Waqtiyadan oo kale, aayadaha Qur'aanka ayaa iftiiminaya mugdiga. Alla (swt) wuxuu addoonkiisa kasoo saara mugdiga una soo saara iftiinka:

"… Dhab ahaan waxaa xagga Allahiina idiinka yimid Nuur iyo Kitaab Cad. Alla wuxuu ku hanuuniyaa (Kitaabka iyo Rasuulku) kuwa raaca Jidka toosan, wuxuuna uga soo bixiyaa Mugdiyada xagga Nuurka Idinkiisa, wuxuuna ku hanuunin Jidka Toosan."[125]



## 2. In La Kaalmeysto Alla

Markuu Mu'minku raaco hanuunka, si uusan u dhumin, wuxuu aad u baryayaa Rabbigiisa. Maxaa yeelay Al-Haadi waa Alla. Wuxuu ku hanuunin addoonkiisa xaqa. Al-Xaafidh waa Alla. Wuxuu addoonka ka ilaaliyaa cudurrada maadiga ah iyo kuwa ruuxiga ah.

Sidaa darteed, sida aynu hanuunka uga baryayno Rabbigeenna (swt), ayaynu sidoo kale uga baryaynaa inaanu ka leexan jidka toosan, oo cagaheena iyo quluubteenu uu sugo:

"Rabbigeenow! Quluubteena ha iilin (qalloocin) markaad na hanuunisay kaddib. Nagana sii agtaada Naxariis. Shaki

124. 6/Ancaam, 149
125. 5/Maaidah, 15-16

la'aan, waxaad tahay Al-Wahhaab (oo addoommadiisa ku siiya si bilaash ah)."[126]

Waxa laga soo weriyay Cabdullaahi ibni Camr (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, ducada uu nebigeenu (scw) mar walba ku duceysan jiray waxaa ka mid ah:

اَللَّهُمَّ مُصَرِّفَ الْقُلُوبِ، صَرِّفْ قُلُوبَنَا عَلَى طَاعَتِكَ

"… Allow quluubta roga/xukuma, quluubteena u soo jeedi addeecadaada …"[127]

Waxaa laga soo wariyey Anas (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) inta badan ku duceysan jiray ducadan:

يَا مُقَلِّبَ الْقُلُوبِ، ثَبِّتْ قَلْبِى عَلَى دِينِكَ



"Kan quluubta rogayoow! "Qalbigayga ku sug diintaada."[128]

## 3. In Laga Fogaado Ahlu Shakiga

Shakiga iyo yaqiinta waa wax la isku daarto, oo la kala qaado. Haddaad la fadhiisatid dadka yaqiinsan, waxaad ka qaadaneysaa yaqiinkooda, sidoo kale haddii aad la fadhiisatid Ahlu Shakiga, waxay iyagana kuugu daaranayaan shakigooda. Sababtaas awgeed, Islaamku wuxuu rabaa inaan la joogno dadka runlowga ah iyo kuwa rajeynaya raallinimada Rabbi:

"Kuwa xaqa rumeeyow! "Alla ka baqa oo ka dhowrsada, oo la jooga kuwa runlowga ah."[129]

126. 3/Cali Cimraan, 8
127. Muslim, 2654
128. Tirmiidi, 2140
129. 9/Tawbah, 119

"ee ku samirsii naftaada la jirka kuwa baryaya Rabbigood subax iyo galabba, iyagoo dooni wajigiisa (raallinamadiisa), yeyna ka iilanin Indhahaagu xagooda adoo dooni quruxda nolosha adduunyo hana addeecin ruuxaan halmaansiinnay qalbigiisa Xusiddanada oo raacay hawadiisa uuna ahaaday amarkiisu xadgudub (iyo Xumaan)."[130]

**Alla (swt) Wuxuu ina farayaa inaan ka fogaano dadka sida cilmi la'aanta ah uga hadlaya aayadihiisa, kuna dhegga aayadaha mutashaahbiga ah, iyagoo iska dhaafa aayadaha muxkamka ah ee cad oo la fahmi karo:**

"Markaad Aragto kuwa ku Shuqulaya Aayaadkeena Ku Jees Jees iyo Beenin ka Jeedso Xaggooda intay ka waramaan wax kale. Hadduu shaydaanku ku illowsiiyo ha la fadhiisan dadka daalimiinta ah markaad xasuusato kaddib!"[131]



**Waxaa laga weriyay Hooyadeen Caa'isha (Allaha ka raalli noqdee) inay tiri, Rasuulku (scw) wuxuu yiri:**

"(Caa'ishooy) Markaad aragto kuwa raacaya Aayadaha Qur'aanka kariimka ah ee mutashaahbiga ah, waxaad ogaataa inay yihiin kuwa uu Alla ku sheegay Kitaabkiisa, kuna dhaliilay ee iska jira iyaga!"[132]

**Dadka iyo majlisyada qaarkood waa sida dhiiqada oo kale. Markaad ag fadhiisatid waxaad dareemaysaa niyad-jab iyo jahawareer. Qalbigaagu wuu qallafsan yahay, inkastoo mawduucyo diimeed laga hadlayo, maxaa yeelay waxay ku hadlayaan aayadaha Alla ee**

130. 18/Kahf, 28
131. 6/Ancaam, 68
132. Bukhaari, 4547; Muslim, 2665

mutashaahbiga ah, oo cilmi laga korsanayn oo aan waxba tarayn.

Dhanka kale, majlisyada iyo dadka qaarkood waxay la mid yihiin bad aan mawjado lahayn oo kale. Markay hadlayaan waxaad dareemaysaa degnaan, laabtaadu way sii fidaysaa, qalbigaagu wuu sii jilcayaa, oo waxaad noqonaysaa mid qanacsan, maxaa yeelay waxay ku hadlayaan aayado muxkam ah oo cad, oo sugan, oo la fahmi karo. Waxay ku hadlaan xog waxtar leh oo Alla (swt) ugu dhawaanayno, iyo aayaadka Alla ee cilmiga iyo hanuunka ka warmayaa…

Alle (swt) wuxuu yiri ka jeedso iyaga. Rasuulkuna (scw) wuxuu yiri ka digtoonaada. Haddaynu u soo jeesanno dadka uu sheegayo oo aynaan ka fogaan, taasi waxay noo sababeysaa inaan diinteena ka shakino iyo shaki qalbiyadeenna gala. Aan si taxaddar leh arrintan diiradda u saarno. Arrintu waa mid aad muhiim u ah, oo xitaa Alla (swt) wuxuu arrinkan uga digay Rasuulkiisa (scw):



"(Hadaba) samir! Shaki la'aan, yabooha Alla waa xaq. yeyna kuu horseenin kuwaan yaqiinsanayn (Xaqa) caajisnimo."[133]

## B. Waswaaska ma wax bay u dhimaan Kelime Tawxiidka?

Waswaaska kusoo dhaca maskaxdeena waxba uma dhimaan kelime tawxiidka, maxaa yeelay Waswaaska waa fikir. Wax dhib ah ma yeeli doonto qofka mar haddii aysan qalbiga boos ka yeelan oo ay isu beddelin

133. 30/Ruum, 60

caqiido. Shakiga wax u dhimaya "Laa'ilaaha illallah" waa hubanti la'aan iyo shaki degaya qalbiga oo isu beddelay rumayn.

Waxa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Alla waa u dembi dhaafey ummadeyda mar haddaanay ku camal falin ama aysan ku hadlin waswaaska ay dareemayaan."[134]

Waswaasku waa xagga Shaydaanka, mana dhici karto in laga hortago. Xitaa saxaabadii uu iimaankoodu buur oo kale ahaa ee Alla (swt) raalli ka ahaa, ayaa la kulmay waswaas. Si kastaba ha ahaatee, waswaaska waxba uma dhimin iimaankooda:

Waxaa laga weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri,



"Qaar ka mid ah saxaabada ayaa Nebiga (scw) u yimid oo su'aal ayey weydiyeen, oo waxay ku yiraahdeen: Waxaan dareennaa waxyaallo/waswaasyo, oo xitaa ay nagu adagtahay inaan sheegno.'

Rasuulku (scw) ayaa ku yiri; xaqiiqdii ma dareenteen arrimahan oo kale?

'Waxay ku yiraahdeen haa.

Wuxuuna ku yiri Tani waa iimaanka cad."[135]

Halkaa waxaynu ka fahmaynaa in saxaabadu ay iyaguna ku dhaceen waswaaska. Waxaa maskaxdooda kusoo

134. Bukhaari, 5269; Muslim, 127
135. Muslim, 132

dhacay fikrado halis ah, oo xitaa ay ka baqayeen inay sheegaan. Rasuulku (scw) kumuu cambaarayn fikradahaas ee wuu dejiyay.

Maxaa yeelay inay waxyaabahaas ka xumaadaan, oo xitaa ay ka cabsanayaan inay xusaan, waxa ay muujinaysaa inaanay taasi shaki ku jirin qalbigooda. dhibaatadaan ay dareemayaan waa nooca ugu cad ee iimaanka. Kuwa iimaanka leh, oo qalbiyada fayow leh, oo si buuxda u qadariya Alla way dhibsadaan fikradahaas oo kale.

## Maxaa Loo Baahan Yahay inaan sameeyno Marka Waswaasku Maskaxdeena Kusoo Dhaco?

Inaan waswaaskaas aan sheegin oo aan ku camal falin



Waxa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Alla waa u dembi dhaafey ummadeyda mar haddaanay ku dhaqmin ama aysan ku hadlin (waswaasyadu) ay dareemayaan."[136]

Waxaan kor tusaale ahaan u soo qaadannay saxaabada. Waxay sheegeen inay dareemayeen waswaas, balse ma aysan cadeyn waswaaska ay dareemayaan, sababtoo ah in la xuso waswaaska ayaa keena inuu boos ka yeeshto quluubta. Sida waxa qalbiga ku jira ay ugu yimaadaan carrabka, waxa carrabka ku jirana ay u tagaan qalbiga. Goortii la sheego waswaaska, wuxuu isu beddelaa caqiido aan la liqi karin. Sheegida waswaasku waxay la micno tahay in qofka qalbigiisa uu sumeeyo, sidoo

136. Bukhari, 5269; Muslim, 127

kale wuxuu sababaa inuu saameeyo kuwa kale. Maxaa yeelay, quluubtu way is saameeyaan. Marka wanaagga lagu hadlo ay qalbiyada u saameeyaan oo kale ayey xumaantuna qalbiyada u saamaysaa.

In Alla laga magan galo oo fikirkaas laga tago:

Waxa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Mararka qaar Sheydaanka ayaa idin yimaada oo idinku yiraahdaa yaa abuuray kan? Kaas yaa abuuray?'

Ugu dambayntii waxa uu waydiinayaa yaa abuuray Rabbigaaga?

Haddii uu shaydaanka qofka soo gaarsiyo heerkan, waa inuu qofkaasi si degdeg ah Alla uga magan galo, oo ka tanaasulaa fikirkan!"[137]



Waswaasku waa xagga shaydaanka. Sida la iskaga ilaalin karo waa in Alla laga magan galo, maxaa yeelay Alla (swt) ma cidleyn doono kuwa isaga ka magan gala Shaydaanka, sidoo kale ma ugu taki doono gacanta shaydaanka ee addoonka lee si dhab ah Rabbigiisa ha u baryo.

Qofku waa inuu ka tanaasulaa fikirka waswaaska keenaya, oo ka fikiraa waxyaabo kale. Waxaa laga yaabaa inaanan ka hortagi karin waswaaska. Si kastaba ha ahaatee, anaga ayay ku xiran tahay inaan daba raacno iyo in kale. Waxaan beddeli karnaa deegaanka, oo ka fikiri

137. Bukhaari, 3276; Mslim, 134

karnaa waxyaabo kala duwan, oo aan ka tagnaa fikradaha sababa niyad-jabka. Waxaa hubaal ah in waswaasku yahay sida dhiiqada oo kale. Wuu kusoo jiidanaya markaad ka fikirto. Qofka caqliga leh ma daba raaco ee naftiisa ayuu ilaalshanayaa.

In la akhriyo suuradda Al-ikhlaas oo dhanka bidixna loo tufo:

Rasuulku (scw) ayaa su'aashii ahayd, "Yaa Alla abuuray? Isagoo su'aashaas ka jawaabaya, waxa uu soo jeedinayaa taladan:

Waxa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:



"Markay sidaas ku yiraahdeen akhriya suuradda Al-ikhlaas, oo bidixda u tufa saddex jeer, oo shaydaanna Alla ka magan gal ..."[138]

Sidoo kale in la akhriyo Aayadda 3-aad ee suuradda al-Xadiid

Abuu Zumeyl (Allaha u naxriistee) wuxuu weydiiyey Cabdullaahi ibni Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) shakiga kusoo dhacaya maskaxdiisa. Ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli noqdee) waxa uu kula taliyey inuu akhriyo aayadda 3aad ee suuradda Xadiid.[139]

هُوَ الْأَوَّلُ وَالْآخِرُ وَالظَّاهِرُ وَالْبَاطِنُ ۖ وَهُوَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ

138. Abuu Daa'wuud, 4722

139. eeg. Abuu Daa'wuud, 5110

"(Alla) waa kan horreeyay, waana kan dambayn, waana kan muuqda (khalqigiisa) awgiis waa Al-Baadhiin (caqliga, xaqiiqda aan si buuxda u fahmi karin oo adoomadiisa u dhaw) wax walbana waa og."[140]

## IV. In kelmeddan Loo Yiraahdo Si Daacadnimo (ikhlaasnimo) Iyo Run ah

Shardiga kale ee badbaada kelime Tawxiidku waa in loo yiraahdo si daacad ah oo run ah:

وَمَآ اُمِرُوٓا اِلَّا لِيَعْبُدُوا اللّٰهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ حُنَفَٓاءَ وَيُقِيمُوا الصَّلٰوةَ وَيُؤْتُوا الزَّكٰوةَ

"Hase yeeshee, waxaan Alla caabudiddiisa ahayn lama farin iyagoo u kali yeeli Alla Diinta, oo Salaaddana oogi Sakadana bixin ..."[141]



Waxa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

اَسْعَدُ النَّاسِ بِشَفَاعَتِى يَوْمَ الْقِيَامَةِ مَنْ قَالَ لَا اِلٰهَ إِلَّا اللّٰهُ خَالِصًا مِنْ قَلْبِهِ اَوْ نَفْسِهِ

"Qofka ay u badan tahay inuu dadka dhexdiisa ka helo shafeecadeyda maalinta qiyaamaha waa kan si ikhlaasnimo ah oo qumman u yiraahdaa'Laa'ilaaha illallah"[142]

140. 57/Xadiid, 3
141. 98/Bayyinah, 5
142. Bukhaari, 6570

## İkhlaas

"Ikhlaas waxay ka timid xididka "Kha-la-sa"; Micnaheedu waa in wax la nadiifiyo, oo saafi laga yeelo. kelmeddan inta badan waxaa loo adeegsadaa in ciladaha cilladaysan meesha laga saaro oo laga dhigo saafi..[143]

Ikhlaas; Micnaheedu waa in qofku diintiisa ka nadiifiyo shirkiga iyo munaafaqnimada, iyo istustuska, kuwaas oo Alla (swt) aan raalli ka ahayn, sidoo kale in qofka ka nadiifiyo diintiisa dhammaan ceebaha oo dhan, oo diintana Rabbigiisa u kaliyeelo. Maxaa yeelay, Alla diintiisu waa diinta "khaaliska ah". Diintaasna ma jiro cid kale oo wax ku leh isaga mooye. Waxaa iska leh Alla oo keliya, oo ah Al-Axad iyo Al-Waaxid. Cibaadada la samaynayo waa inay uun Alla (swt) dartiisa loo sameeyo:



"… ee caabud Alla adoo u kaliyeeli Diinta. Diinta khaaliska ahna waxay u sugnaatey Alla …"[144]

Haddii ay diinta Alla (swt) tahay mid"Khaalis ah", xubnaha diintaas; Waa inay u caabudaan Alla si ikhlaasnimo ah oo daacadnimo ah, iyadoo aan cid kale lala wadaajin. Waa inay isaga uun talasaartaan, waa inay isaga uun baryaan, waa inay isku xukumaan, oo ku xukuntamaan shareecadiisa oo keliya, sidoo kale Waa inay jacaylkooda iyo cabsidooda, rajadooda iyo rabitaankooda u khaalis yeelan Alla oo keliya, yacnii carrabka iyo qalbiga, iyo xubnuhu waa inay si ikhlaasnimo ah oo daacadnimo ah u caabudaan Alla (swt) oo keliya.

143. eeg Al-Mufredat, b. Qodobka 292, h-l-s

144. 39/Zumar, 2-3

## 1. Ikhlaaska shirkiga ka daahiriya

Micnaha "Lailaaha illallah" waa in laga diido ilaahnimada dhammaan makhluuqyada oo dhan lana caddeeyo oo keliya ilaahnimada Alla (swt). Yacnii, "Ma jiro Alla ka sokow ilaah kale oo mudan in la caabudo." Micnahaas darted, kelime Tawxiid waxaa sidoo kale la yiraahdaa kelimetul Ikhlaas oo loola jeedo "In Diinta Alla oo keliya loo khaalis yeelo".

Shirkigu waa in mid ka mid ah sifooyinka Alla loo nisbeeyo makhluuqyada ama Alla (swt) ka sokow in cibaadada loo sameeyo cid kale.

Shirkigu waa cagsiga Kelime Tawxiid. Weligood hal meel isuma yimaadaan. Haddii shirki jiro, Kelime Tawxiid ma jirto, si la mid ah haddii Kelime Tawxiid jirto, shirkigu ma jiro. Sababtaas awgeed, Alla (swt) wuxuu u sheegay dadka doonaya inay soo galaan diinta Islaamka, ay marka hore looga baahan yahay inay ka towbad keenaan shirkiga oo ah shardiga koowaad:



"Hadday ka towbad keenaan (Shirkiga), oo oogaan salaadda, oo bixiyaan sakada, markaas waa walaalihiinna diinta. Sidaana ugu u caddaynay aayaadka qoomkii wax garan."[145]

Qofku hadduu Alla u shariikyeelo oo haddana odhanayo "Laa'ilaaha illallah", camalkiisu wuxuu beeninayaa hadalkiisa. "Laa'ilaaha illallah" da uu yiri lagama aqbalayo, sidoo kale kama mid ah kuwa run sheegga, hase yeeshee wuxuu ka mid yahay kuwa beenta sheegaya.

145. 9/Tawbah, 11

**"Laa'ilaaaha illallah" da la yiraahdo, iyadoo loo shariik yeelayo Alla (swt), qofka diinta İslaamka masoo geliso.**

"Waxaad dhahdaa waxaa lay faray inaan caabudo Alla anoo u kali yeeli diinta. Waxaana ley faray inaan noqdo kan ugu horreeya muslimiinta. (Addoomada ka taga shirkiga oo Alla ula noqda towxiidka).' "[146]

"Ee bari Alla adoo u kali yeeli cibaadada haba naceen gaaladu."[147]

"Waa Al-Xay (Kan nool iyo kan noleeya noole kasta). Ilaah kale ma jiro (oo cibaadada mudan isaga mooyee ee barya (caabudana) idinkoo u kaliyeeli Diinta, mahadna waxaa iska leh Allaha Barbaariya Caalamka."[148]



**Qofku hadduu ka daahiro shirkiga, diintana/cibaadadanu u kaliyeelo Alla (swt), oo yiraahdo "Laa'ilaaha illallah", qofkaasi waa muslim Alla waxdiyey. Sida uu qofku diinta ugu soo galay Ikhlaasnimo, ayaa sidoo kale loo baahan yahay in la dhawro Ikhlaaska, oo aan diinta lagu wasakhayn shirkiga. Maxaa yeelay shirkiga iimaanka dabadiisa wuxuu burinayaa camalka oo dhan oo ay ka mid tahay kelime tawxiidka:**

"Waxaad dhahdaa ma wax kasoo hadhay Alla ayaa i faraysaan inaan caabudo jaahiliin yahay. Waxa dhab ahaan loogu waxyooday adiga iyo kuwii kaa horreeyeyba Nebiyow haddaad wax la wadaajisa (Alla) waxaa buri camalkaaga, waxaadna ka mid noqon kuwa khasaaray."[149]

146. 39/Zumar, 11-12
147. 40/Mu'min (Qaafir), 14
148. 40/Mu'min (Qaafir), 65
149. 39/Zumar, 64-66

"Kuwa rumeeyey ee aan ku wasakhayn iimaankooda dulmi/ shirkiga; Waxaana u sugnaaday ammaan waana kuwa hanuunsan."[150]

Waxa laga soo weriyay Abuu Dar (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Qofka Ummadeyda ka mid ah oo dhinta isagoon Alla wax la wadaajinin wuxuu gelayaa jannada."[151]

## 2. Ikhlaaska Riyaaga/Damacyada xunxun ka daahiriya

Sidaan cibaadooyinkeena ugu samayno Alla oo kelıya, sidoo kale waa inaan u samayno isaga dartiisa. Sida aynu cibaadooyinkeeni ugu kaliyeelayno Alla, innagoo aan cid kale la wadaajinayn, sidoo kale waa inaynu niyadeena ka dhignaa mid raalli ahaanshihiisa uun dooneyso, oo aan ujeeddo kale la socon.



Markaan Islaamka soo galayno waa inaan nidhaahnaa "Laa'ilaaha illallah" annagoo isu dhiibayno Alla (swt) oo keliya, oo aan isaga keliya caabudeyno. Waa inaan quluubteena ka daahirinaa is-tustuska iyo ku daneysiga, iyo raacitaanka aqlabiyadda, sidoo kale Waa inaan ka mid noqonaa kuwa run-sheegga ah ee ku sugan "Laa'ilaaha illallah":

Waxa laga soo weriyey Cidbaan ibnu Maalik (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

150. 6/Ancaam, 82
151. Bukhaari, 1237; Muslim, 94

""Xaqiiqdii, Alla wuu ka xaarantimeeyey naarta,qofkii yiraahda 'Laa'ilaaha illallah isagoo raalli ahaanshihiisa uun doonaya."[152]

Waxa laga soo weriyay Abuu Qataadah (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Alla wuxuu ka xaarantimeeya naarta qof kasta oo ku markhaati fura qalbi daacad ah inaan Ilaah kale jirin oo aan Alla ahayn, Maxamadna uu yahay rasuulkiisii."[153]

In "Laa'ilaaaha illallah" la yiraahdo iyadoo ujeeddooyin kale la socdaan waa wax aan qofka ku liibaaneyn; Sidoo kalena qofka kama ilaalineyso naarta, iyo raalli ahaansho Allana uma horseeto.



Dhanka kale, "Laa'ilaaaha illallah" oo ikhlaasnimo lagu yiraahdo, qofka waxay ku sugtaa xaqa. Hadalkiisuna wuxuu xaqiijiyaa camalkiisa, sidoo kalena camalkiisa wuxuu caddeeyaa hadalkiisa. Dhinac kasta oo noloshiisa ah ayaa hagaagi doona. "Laa'ilaaaha illallah" waxay ka muuqan qadiyadiisa iyo halgankiisa, xirfadiisa iyo gurigiisa, iyo xiriirka deriskiisa.

Alla (swt) waxa uu ku sifeeyay kuwa ka run sheegay tawxiidkooda sidatan:

"Samo falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan Qorax ka soo bax iyo Qorax u dhac laakin sama fale waa ruuxii rumeeya Alla, Maalinta Aakhiro, Malaa'igta. Kitaabka (kutubta Alla), Nabiyada, oo siiya maalkooda qaraabada dhow, agoonta, masaakiinta, kuwa xayiran, kuwa tuugsada iyo addoommada, oogana Salaadda, bixiyana Sakada, markay ballamaanna

152. Bukhaari, 425; Muslim, 263

153. Bukhaari, 128; Muslim, 32

oofiya ballankooda, Samra (adkaystana) Waqtiga saboolnimada. cudurrada iyo Dagaallada, kuwaasina waa kuwa ka run sheegay Iimaankooda waana kuwa dhawrsada."[154]

"Mu'miniinta waxaa ka mid ah Rag geesiyaal ah oo ka rumeeyey waxay Alla kula ballantameen. Qaar baa ballantii oofiyey (waa shahiideen), qaarna waa sugayaan. Waxa hubaal ah inaanay is beddelin (hadalkooda). In Alla ka abaalmariyo Runlowyaasha Runtooda, oo cadaabana Munaafiqiinta, hadduu doono, ama ka toobad aqbalo. Shaki la'aan, Alla waa dembi-dhaafe (oo dembiga dhaafa, dembigana asturo, addoonkana ka ilaaliya xumaanta dembiga), iyo Naxariista (oo Addoomadiisa u naxariista)."[155]

"Kuwa mu'miniinta ah waa kuwa uun rumeeyay Alla iyo Rasuulkiisa oon shakiyin, kuna Jahaada Xoolahooda iyo naftooda jidka Alla dartiis, kuwaasi waa kuwa runlowga ah."[156]



"Waxaa Xoolahaas wax ku leh kuwa Saboolka ah ee laga soo saaray guryahoodii iyo Xoolahoodii (laga qaatay) dar Alla iyo doonista nimcadiisa, iyo u gargaarka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, waana kuwa ku run sheegay iimaankooda."[157]

## Dadkaas waa dadka ay anfici doonto "Laa'ilaaha illallah" maalinta qiyaame:

"Wuxuu Alla odhan doona Kani (Maanta) waa Maalinta ay Anfici kuwa Runta Sheega Runtoodu, waxaana u Sugnaaday Jannooyin ay Socoto Dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku

154. 2/Baqarah, 177
155. 33/Axzaab, 23-24
156. 49/Xujuraat, 15
157. 59/Xashr, 8

Waari Dhexdeeda Waligood waxaana ka Raalli Noqday Alla Iyana way ka Raalli Noqdeen, Taasina waa Liibaanta wayn.' "[158]

Waxaa laga yaabaa inay jiraan kuwo dhahaya "Laa'ilaaha illallah" iyagoon daacadnimo iyo ikhlaasnimo ka ahayn ee ujeeddo kale wata. Waxaa la rumeysanaya inay yihiin Mu'miniin intii ay samaynin wax burinaya kelimedda Laa'ilaaha illallah, hase yeeshee kuwa aan Alla (swt) cibaadada u kali yeelin, wuxuu ku xukumaya cadaab lagu waarayo.

Sida munaafiqiintii waagii Rasuulka (scw) oo kale, kuwaas oo si dhab ah u rumayn, oo "Laa'ilaaha illallah" dhaheen si uun loola dhaqmo muslimiin…



"munaafiqiintu waxay u maleenayaan inay dhagrayaan Alla, laakiinsee Alla ayaa iyaga dhagraa, markay u istaagaan Salaaddana waxay istaagaan iyagoo wahsan, oo is tusi Dadka, Mana xusaan Alla wax yar mooyee. waxayna ku noqnoqon (wareeri) arrintaas dhexdeeda, kuwaasina lama jiraan kuwaana lama jiraan, cidduu dhumiyey Alla uma heleysid Waddo. kuwa (Xaqa) rumeeyow ha ka yeelanina Gaalada sokeeye Mu'miniinta ka sokow, Ma waxaad doonaysaan inaad isugu yeeshaan Alla korkiinna xujo cad (inuu idin ciqaabo). munaafiqiintu waxay ku sugnaan dabaqa hoose ee Naarta umana heshid gargaare. Kuwa toobad keena oo khaladkooda saxa, Allana qabsada, u kali yeela Diintooda (Cibaadadooda) Alla kuwaasi waxay la jiraan Mu'miniinta (ma aha Munaafiqiinta). Wuuna siin doonaa Alla Mu'miniinta Ajir weyn."[159]

158. 5/Maa'idah, 119

159. 4/Nisaa, 142-146

**Sida Reer Baadiyaha iyo Munaafiqiinta oo kale, kuwaas oo yiri "Laa'ilaaha illallah" si ay uga faa'ideystaan Nicmada Dowladdii Islaamka ee Madiina, munaafiqiintaas oo ku samray Islaamnimadooda markii ay heleen nimco, markii ay dhibaato soo gaartayna ka jeestay Diintooda…**

"Waxaa ka mid ah Dadka mid u Caabuda (Alla) Dhinac (Shaki) Hadduu soo gaaro Khayra xaasidi, Hadduu soo gaaro Imtixaan (Dhibna) u Gabdooma Wajigiisa (Gaalooba) wuxuu Khasaariyey Adduun iyo Aakhiraba Kaasina waa Khasaaraha Cad uun."[160]

"Dadka waxaa ka mid ah kuwa dhihi waxaan rumeynay Alla, markii lagu dhibo Alla dartiisna kayeela imtixaamka Dadka cadaabka Alla oo kale, hadday timaado Guul xagga Rabbiga ka ahaatay waxay dhahaan anagu waan idin la jirnaa, Alla miyuusan ahayn kan og waxa laabta Dadka ku jira. (Miyayna taas ogayn?) Allana waa ogyahay Mu'miniinta iyo Munaafiqiinta (wuxuuna dadka ku ogeysiiyaa imtixaannada)."[161]



**Sida kuwa dhahaya "Laa'ilaaha illallah" iyadoo aanay rumaysnayn oo is-dhiibin, laakiinsee iska raacaya aqlabiyadda (meesha loo badan yahay)…**

**Waxa laga weriyey Anas ibni Maalik (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:**

"… Markii addoonka la dhigo qabriga, malaa'igtu waxay ku tiraahdaa "Maxaad ka leedahay qofkan la yiraahdo Maxammad (scw).

160. 22/Xaj, 11
161. 29/Cankabuut, 10-11

Mu'minku waxa uu odhanaya, waxaan ka marag kacayaa inuu yahay addoonkii iyo rasuulkii Alla …

Gaalka ama munaafiqu wuxuu odhanaya"ma garanayo, waxaan iska idhi sida ay dadku yiraahdeen oo kale …"[162]

## 3. Sideen ku ogaan karnaa inaan İkhlaas iyo Run ku sugan nahay

**Imtixaan kasta oo aan la kulanno waa fursad aan ku cabbiri karno İkhlaasnimada iyo daacadnimada, maxaa yeelay Alla (swt) wuxuu ku kala saaraa imtixaamaadka runlowyaasha iyo beenaalayaasha, wasakha iyo daahirka, kuwa jecel daarta aakhiro iyo kuwa adduunka jecel:**

"Ma Dadku waxay u maleeyeen in loogaga tagi inay dhahaan waan rumeynay oon la imtixaamayn. Dhab ahaan yaan u imtixaanay kuwii ka horreeyey. Dabcan, Alla waa ogyahay runlowyaasha iyo beenaalayaasha. (Wuxuuna u sahlaa dadka inay ku ogaadaan imtixaannada.)"[163]



"Ma aha Alla kii kaga Taga Mu'miniinta Sidaad tihiin intuu ka kala Sooco ka Xun iyo kan Fiican mooye …"[164]

**Waxaa liibaanay qofka la imtixaamo, oo imtixaankuna u kordhiyo iimaankiisa, sidoo kale xoojiyaa ikhlaaska iyo daacadnimadiisa. Waxaa liibaanay qofka xumaantiisa ka dhex arka imtixaanka, oo Alla u toobad keena, oo Diintana Alla (swt) u kali yeela, oo kasoo noqda khaladkiisa.:**

162. Bukhaari, 1374
163. 29/Cankabuut, 2-3
164. 3/Cali Cimraan, 179

"Kuwa toobad keena oo khaladkooda saxa, Allana qabsada, u kali yeela Diintooda (Cibaadadooda) Alla kuwaasi waxay la jiraan Mu'miniinta (ma aha Munaafiqiinta). Wuuna siin doonaa Alla Mu'miniinta Ajir wayn."[165]

Dhanka kale, halaag waxaa u sugnaaday kuwa aan arkin ceebahooda, in kastoo la imtixaamayo, iyo kuwa aan qaadin tillaabo ay ku saxaan ceebahooda, in kastoo ay arkaan!

"Miyeyna arkayn in sanadkiiba mar ama laba jeer laga imtixaamo (Alla dhankiisa) oo aanay ka tawbad keenin oo ayna kuwaantoomiin?"[166]

Imtixaan kasta oo mid diini iyo adduunba ah, aan ka yeelno mid wax ku qiyaasno oo aan is-milicsanno. Sidoo kale Aan u aqbalno imtixaankeena sidii muraayad oo kale, oo aan ku daawano tawxiidkeena muraayadaas. Yaynaan iloobin: imtixaan kastaa waa aayad Rabbigeenna ah, wuxuuna isaga (swt) addoomadiisa ku edbiyaa aayadihiisa/imtixaankiisa.



## V. In La Jeclaado Ehelka kelmeddaan iyo In La Necbanaado Cadawgeeda

### A. Jacaylka Alla

Jacaylka ugu horreeya waa in la jeclaado Alla (swt). In la jeclaado Alla waa nuxurka tawxiidka. Kuwa rumeeyey waxay ka jecelyihiin Rabbigood wax kasta:

165. 4/Nisaa, 146
166. 9/Tawbah, 126

وَمِنَ النَّاسِ مَنْ يَتَّخِذُ مِنْ دُونِ اللّٰهِ اَنْدَادًا يُحِبُّونَهُمْ كَحُبِّ اللّٰهِۜ وَالَّذِينَ اٰمَنُٓوا اَشَدُّ حُبًّا لِلّٰهِۜ

"Dadka waxaa ka mid ah cid ka yeelan Alla ka sokow wax lala caabudo una jecelyihiin say u jecelyihiin Alla, kuwa rumeeyey xaqa yaa ka daran jeceelkooda Alla …"[167]

M'miniintu waxay Alla (swt) ka jecel yihiin wax kasta, taasna waa mid ka mid ah shardiga tawxiidka. Tani waa nuxurka iyo lama huraanka cibaadada, sababtoo ah tawxiidka waa in Alla (swt) lagu mideeyo cibaadada, sida qalbiga, hadalka, iyo xubnaha. Jacaylku waa cibaadada qalbiga ee ugu sharafta badan. Jacaylku waa saldhigga dhammaan camalka wanaagsan ee Alla (swt) loogu dhawaado.



"Laa'ilaaha illallah" waa jacaylkii oo helay tawxiid, yacnii waa in la jeclaado cidda uu Alla uu banneeyay oo keliya, oo dartiisana loo jeclaado.

Qofka mu'minka ahi waxa uu jecel yahay Alla (swt), waxa uu jecel yahay cidda uu Alla jecel yahay, waxa uu jecel yahay cidda uu Alla doonayo in la jeclaado. Sidaas darteed, waxay ku midoobaan ilaahay oo ah isha jacaylka.

In la jeclaado cid kale, sidii Alla loo jecel yahay oo kale, waa shirki, maxaa yeelay tani waxay la micno tahay in cid kale la siiyo xaq/sifo uu Alla leeyahay, oo isaga lala wadaajiyo xaqaas.

167. 2/Baqarah, 165

Aayaddan aynu kor ku soo xusnay ayaa arrintani daliil cad u ah. Wax kastoo la jeclaado sida Alla (swt) oo kale waa shurako iyo ilaahyo Alla (swt) lala wadaajiyey:

"Allaan ku Dhaaranee waxaan ku Sugnayn Baadi Cad. Markaan Idilla Sinay Rabbiga Caalamka (Waxaan idin Jeclaanay sidii isaga u jecelnahay oo kale, idinkaga baqnay sidii isaga kaga baqno oo kale, Waanu idin Tawbad keenay sidii isaga u Toobad keenay oo kale, waan idin magan gelnay sidii isaga u magan gelayno oo kale.' "[168]

Sida ka muuqata aayaddan, mushrikiinta ayaa waxay ku murmayaan naarta. Waxay cambaareynayaan cidda ay ka yeeshteen ilaahyo, wayna xusuusan yihiin iyagoo ka qoomamaynaya waxa iyaga ka dhigay Ahlu naar. Dembigoodu waa inay la simeen Allaha barbaariya Caalamka. Haddaba, arrinkee ayay kula simeen? Waxaynu wada ognahay inay qirayaan inuu yahay Alla abuuraha, laakiinsee dhanka cibaadada ayay Alla kula simeen ilaahyadooda. Waxa ay iyaga siiyeen sifooyinkii Alla, oo ay ku guteen cibaadadii looga baahnaa inay Alla (swt) u sameeyaan. Sida ku xusan aayadda 165-aad ee suuradda Baqarah, meelaha ay kula simeen waxaa ka mid ahaa jacaylka. Waxay u jeclaadeen la-hawlgalayaashooda (ilaahyadooda) sidii isaga u jecel yihiin oo kale.

## B. Jacaylka Rasuulka

Jacaylka Alla kaddib, waxa ku xiga jacaylka Rasuulka (scw). In la jeclaado Rasuulka waa rumaynta Alla (swt)



168. 26/Shucaraa, 96-98

iyo qaybta labaad ee kelime Tawxiidka ee shardiga ah "Maxamad waa Rasuulkii Alla":

"waxaad dhahdaa haddaad aabayaalkiin, caruurtiinna, walaalihiin, haweenkiinna, qaraabadiinna, xoolaha aad kasbateen, ganacsiga aad ka cabsanaysaan inuu khasaaro iyo guryo aad ka raalli tihiin ka jeceshihiin Ilaahay, rasuulkiisa iyo ku jahaadida jidkiisa suga inta Alla ka keeni amarkiisa, Allana ma hanuuniyo qoomka faasiqiinta ah.' "[169]

Waxa laga soo weriyey Abuu Hureyra (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Waxaan ku dhaartaye Allaha naftayda ku haya gacantiisa, in midkiin uusan noqon qof mu'min ah ilaa uu iga jecel yahay waalidkiis iyo caruurtiisa."[170]



Haa, jacaylka Alla iyo Rasuulkiisa (scw) waa aasaaska iimaanka. Jacaylka Alla (swt) maka dhigna uun in la yidhaahdo "waan jeclahay isaga." Alla wuxuu daliil wax ku ool ah uga baahan yahay addoomadiisa sheeganaya inay jecel yihiin:

**"Waxaad dhahdaa haddaad tihiin kuwo jecel Alla i raaca haydin jeelaado Alla hana idiin dhaafo dembigiinee, Alla wa dembi dhaafe (oo dembiga dhaafa, dembigana asturo, addoonkana ka ilaaliya xumaanta dembiga) Addoomadiisana u Naxariista.' "**[171]

Waxaa waajib ku ah qofkasta oo sheeganaya inuu Alla (swt) jecel yahay inuu Rasuulka (scw) addeeco. Shardigani

169. 9/Tawbah, 24
170. Bukhaari, 14
171. 3/Cali Cimraan, 31

waa shardi Alla go'aamiyey oo jiri doona ilaa qiyaamaha. Maanta kuwa sheegta inay Alla rumeeyeen oo jecel yihiin, haddana sunnada Rasuulka (scw) ka dhego adaygay, waa kuwa naaska aayaddan beeniyey.

## C. Jaceylka Mu'miniinta

Jacaylka Mu'miniinta, kuwaas oo ah Ehelka kelmeddaan, iyo in lagula xariirnaado iimaan waa mid ka mid ah shardiga. Waxa qofka Mu'minka naftiisa la doonayo walaalkiisana wuu la doonaya; wuxuu ka welweli dhibaatooyinkiisa. Xaalad kasta wuu u soo gurman. Walaalkiisa Muslimka ah wuxuu ka door bidi mushrikiinta, xitaa hadday hooyo iyo aabbe yihiin:

"Saaxiibkiinu waa uun Alla iyo Rasuulkiisa iyo kuwa Rumeeyey (Xaqa) ee Ooga Salaadda, oo Bixiya Sakada, oo Rukuuca. Ciddii sokeeye ka yeeshata Alla iyo Rasuulkiisa iyo kuwa rumeeyey xaqa shaki la'aan Xisbiga ilaahay umbaa adkaan."[172]



"Ma waxaad u malaysaan in laydinka tegi isagoon Alla muujin kuwa jahaadaya oo idinka mida oon ka yeelanin wax ka soo hadhay Alla iyo Rasuulkiisa iyo Mu'miniinta sokeeye, Alla waa ogyahay waxaad falaysaan."[173]

Waxa laga soo weriyey Anas (Allaha ka raalli noqdee) inu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"Midkiinna ma rumeyn ilaa uu walaalkiisa (Muslimka) la jeclaanin waxa uu naftiisa la jecel yahay."[174]

172. 5/Maaidah, 55-56
173. 9/Tawbah, 16
174. Bukhaari, 13; Muslim, 45

## D. In la necbanaado Kuwa Cadawga Ku ah Kelmeddaan

"Laailaaha illallah" waxa loola jeedaa waa in nolasha oo dhan Alla (swt) la isu dhiibo iyo in Alla loo kali yeelo cibaadada. Waxaa sidoo kale loola jeeda in la aqbalo oo la caddeeyo in maamulka dhulka, cirka iyo gaar ahaan quluubta uu Alla iska leeyahay.

Micnaheedu waa sida Rabbigeen (swt) u go'aamiyo cidda la jeclaan doono, ayuu sidoo kale u go'aamiyaa cidda la necbanaanayo.

"Laa'ilaaha illallah" waxa ay ka dhigan tahay in asxaabta Alla laga dhigto sokeeye, cadawgiisana lala colaawo.



Alla (swt) wuxuu doonayaa inaan cadaw ka dhigano, oo aan sokeeye ka dhigan mushrikiinta u shariik yeesha, Dhaaquutka isaga lala caabudo, iyo Yahuudda iyo Nasaarada Ahlu-Kitaabka ah ee xaqa kasoo horjeeda iyagoo og. Kuwa iyaga sokeeye ka yeeshta, waxay buriyeen mid ka mid ah sharuudaha suuban ee kelime Tawxiidka.

Alla (swt) wuxuu ku sifeeyay kuwa buriyey shardigan:

Waxay goy'nayaan xidhiidhkii iyaga iyo Alla (swt) ka dhaxeeyey:

"Yeyna ka yeelan Mu'miniintu Gaalada Sokeeye Mu'miniinta ka Sokow. Qofkii sidaas sameeya, isaga iyo Alla wax xidhiidh ah oo ka dhexeeya ma jiro (Islaam iyo iimaanba) ..."[175]

175. 3/Cali- Cimraan, 28

### Waa isku xukun:

"Kuwa Xaqa Rumeeyow ha ka yeelanina Yuhuud iyo Nasaara asxaab. iyaga ayaa saaxiibo isku ah. Ciddii Saaxiib ka Yeelata oo idinka Mid ah wuxuu ka midyahay Iyaga. Hubaal Alla ma hanuuniyo qoom daalimiinta ah."[176]

### Waxay noqdaan Munaafiqiin:

"Ugu bishaaree munaafiqiinta inay mudan yihiin Cadaab daran. waana kuwa ka yeesha Gaalada sokeeye Mu'miniinta ka sokow, ma waxay ka dooni Agtooda Cizzo (sharaf), Cizzana Alla iska leh dhammaanteed."[177]

### Waxay ka dhigan tahay inay inkireen Alla (swt) iyo Rasuulkiisa (scw), iyo kitaabkiisa iyo aakhiroba:



"Waxaad Arkaysaan wax badan oo ka mid ah oo saaxiibo ka Dhigan kuwo Gaaloobay waxaa Xun waxay u Hortmarsadeen Naftoodu oo ah in Alla u cadhooday, Cadaabkana ay ku Waari. Hadday ahaan lahaayeen kuwo Rumeyeeyey Alla iyo Nebiga iyo waxa lagu soo Dejiyey mayna ka dhigan saaxiibo iyaga, laakiin wax badan oo ka mid ah waa Faasiqiin."[178]

"Ma helaysid qoom Ilaahay rumeeyey iyo Maalintii aakhiro oo haddana jecel ruux Ilaahay iyo Rasuulkiisa khilaafaya haba ahaadeen Aabayowgooda, Caruurtooda, Walaahood ama Qaraabadooda ..."[179]

---

176. 5/Maaidah, 51
177. 4/Nisaa, 138-139
178. 5/Maaidah, 80-81
179. 58/Muujaadala, 22

Alla korkiisa Xujo ayey ku noqoneysaa:

"kuwa (Xaqa) rumeeyoow ha ka yeelanina Gaalada saaxiibo Mu'miniinta ka sokow, Ma waxaad doonaysaan inaad isugu yeeshaan Alla korkiinna xujo cad (inuu idin ciqaabo)?"[180]

Waxay ka dhigan tahay inay Dhulka ka dhici doonto fidno iyo fasaad weyn:

"Kuwa Gaaloobay Qaarkood Waa Sokeeyaha Qaar. Haddaydaan yeelin (haddii dhaxdiina saaxiibo iska yeelan ,oo aydan cadow ka dhigin iyaga) dhulka waxaa ka dhici doona fidno iyo fasaad weyn."[181]

Waxay noqdaan kuwo daalimiin ah:

"Kuwa xaqa rumeeyow! Hadday Aabayaalkiin iyo Walaalihiin ka doortaan Gaalnimada iimaanka ha ka yeelanina sokeeye. "ciddiise sokeeye ka dhigata oo idinka mid ah kuwaasu waa daalimiin."[182]



## E. Saaxiibtinimada La Mamnuucay

In lala saaxiibo Gaalada waxaa loola jeedaa in lagu jeclaado diintooda, laguna kaalmeeyo diintooda baadiilka ah, iyo lana garab istaago dagaalka ay kula jiraan Islaamka.

Kuma jiraan Saaxiibtinimada la mamncay sida in iyaga wanaag loo sameeyo,in lagula hadlo hadal wanaagsan, in la booqdo marka ay bukoodaan, in hadiyado la is dhaafsado, iyo in laga jawaabo codsiyadooda gargaarka bini'aadantinimo:

180. 4/Nisaa, 144
181. 8/Anfaal, 73
182. 9/Tawbah, 23

"Alla idinkama reebayo inaad wanaag fashaan oo aad u cadaalad fashaan kuwa aan diintiina idiinla dagaalamin oo aan guryihiinna idinka saarin. Maxaa yeelay Alla wuxuu jecel yahay kuwa caadilka ah. Alla wuxuu idinka reebayaa oo kaliya inaad saaxiibo ka dhigataan kuwa Diinta idiin kula dagaallamay ee Guryihiinna idiinka saaray, gacanna ku siiyey in guryaha la idiinka saaro. dadkii kuwaas sokeeye ka dhigtaa wa kuwa daalimiin ah."[183]

Haddii loo fiirsado Alla (swt) wuxuu u kala qaybiyay mushrikiinta laba qaybood. Kuwa nala dirira iimaankeenna daraaddiis, naga saara guryaheenna, oo u gargaara kuwa naga saaraya… Kuwaasi runtii waa kuwa Islaamka la dagaallamaya iyo kuwa u gargaara kuwa dagaallamaya. In la jeclaado oo lala saaxiibo dadka noocaas ah, waa wax ay samayn karaan kuwa ku wasakheeya iimaankooda dulun iyo kuwa aan fahmin tawxiidka iyo shuruudihiisa.



Kuwa aan lahayn saddexdan sifo waa kuwa had iyo jeer quseeya dacwadeena. Waxaa laguula dhaqmi karaa wanaag. Alla (swt) ma xarrimin taas.

Tusaalooyinka qaar ee Sunnada Rasuulka (scw):

Waxaa laga weriyey Anas (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

"Waxaa jiray wiil Yuhuudi ah oo u adeegi jiray Nebiga (scw). Wiilkaan ayaa xanuunsaday. Nebigu (scw) wuu soo booqday oo wuxuu fadhiistay sariirtiisa dhinaceeda.

Wuxuu ilmihii ku yiri: Muslim.

183. 60/Mumtaxinah, 8-9

Wiilkii waxa uu eegay aabihii oo ag taagnaa.

Aabihii ayaa ku yiri addeec Abuu Qaasim.

Markaas ayuu cunuggii muslimay.

Rasuulku (scw) ayaa markii uu ka soo baxay ilmihii aktiisa ayaa wuxuu yiri: Mahad waxaa iska leh Allihii naarta (Jahannamo) ka badbaadiyay.' "[184]

Saciid ibni Musayyib (Allaha ka raalli noqdee) waxa uu ka weriyey aabbihiis (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

**"Markii ay geeridii Abuu Dhaaliib soo dhawaatay ayuu Nebigu (scw) u yimid. Wuxuu arkay in Abuu Jahal iyo C/llaahi bin Abii Umayya bin Mughiira ay agtiisa joogaan.**



Dabadeedna wuxuu ku yiri, 'Adeer! "Keliya waxaad tidhaahdaa kelmedda 'Laa'ilaaha illallah' anna waan kugu difaaci doonaa Alla hortiisa…"

Abuu Jahal iyo C/llaahi bin Abii Umayya ayaa isla markiiba ku yiri: Ma waxaad ka tagaysaa diinta Cabdulmudhalib?

Nebigu (scw) wuxuu sii waday inuu u soo jeediyo inuu yiraahdo Kalmedda Tawxiidka. Waxay iyagana ku celceliyeen isla weedhii. Ugu dambeyntii Abuu Dhaalib wuxuu u sheegay inuu ku sugan yahay diinta Cabdulmudhalib oo uusan dooneyn inuu yiraahdo Laailaaha illallah…"[185]

184. Bukhaari, 1356
185. Bukhaari, 4772; Muslim, 24

Waxaa laga weriyey Cabdullaahi ibnu Cumar (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri:

“Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Cumar wuxuu arkay dhar xariir ah oo iib ah oo lagu iibinayo albaabka masjidka (waxaana iibinayey Utarid ibnu Xaajib) wuxuuna Rasuulka (scw) ku yiri: Rasuulkii Allow waxaan jeclaan lahaa inaad soo iibsato dharkaan xariirta ah, oo xidho maalinta jimcaha iyo maalmaha aad wafdiga qaabileysid.

Markaas ayuu Rasuulku (scw) yiri: “Labbiskaan waxaa xirta uun kuwa aan aakhiro waxba ku lahayn.’

Maalmihii danbe ayaa nebiga (scw) loo keenay dhar xariir ah oo uu midkood Cumar uu siiyey.



Cumar ayaa ku yiri: Rasuulkii Allow waxbaad ka sheegtay xariirtii uu Utarid iibinayey, balse waxaad i siineysaa xariirkan si aan u xirto, Rasuulkuna wuxuu yiri: Kuuma siinayo xariirkan si aad u xirato…’

Markaa buu Cumar dharkii uu Rasuulka (scw) ka helay, ayuu u hadyadeeyey walaalkiisa mushriga ahaa oo Maka joogay.”[186]

## VI. Ku-dhaqanka Shuruudaha Kelmeddaan

““Laa’ilaaha illallah” waa caddaynta ilaahnimada Alla oo keliya iyo inkirida dhammaan waxyaabaha kale ee isaga lala caabudo. Ilaahnimadu waa cibaadada. Waa in qofka Alla (swt) kula ballamayo inuu isaga oo keliya

186. Bukhaari, 886; Muslim, 2068

caabudayo. "Laa'ilaaha illallah" oo aan cibaado iyo addoonimo ku jirin waa wax aan ahayn weedh qallalan uun. Dadka weedhaas yiraahdaa, haddana aan Alla ugu dhawaan camal wanaagsan, waxay ku beeniyaan weedha odhanayaan camalkooda:

"Waxaad dhahdaa addeeca Alla iyo Rasuulkiisa, hadday ka jeedsadaan Alla ma jeela Gaalada."[187]

"Kuwa (Xaqa) Rumeeyow Addeeca Alla iyo Rasuulkiisa hana ka Jeedsanina idinkoo Maqli."[188]

"Waa maxay shuruudaha "Laa'ilaaha illallah"? Waa wax kasta oo micnaheeda iyo shruudaheeda tilmaamayso. Kuwa rumeeyey oo ku qirta Carrabkooda, haddana aan ku dhaqmin shuruudaheeda, kuwaasi waxba uma



tarayso. Sababtoo ah mabaadi'da la Rumeysan yahay wax micno ah kuma fidhiyaan, haddii aysan nolosha ka muuqan camali ahaan oo gebi ahaanba laga tago.

Tusaale ahaan, in Alla loo aqbalo inuu yahay sharcidejiye iyo in la rumeeyo inuu isagu ku kali yahay xukunka waa cibaadada. Haddii qofku uu aqbalo xaqiiqdaan, haddana uusan si dhab ah uga muuqan noloshiisa, aqbalaaddani waxba uma tari doonto isaga. Alla (swt) waxa uu ku yiri kuwa ka jeedsada axkaamtiisa ee ku xukuntama Dhaaquutka:

"Miyeydaan arag kuwa u malayn inay rumeeyeen waxa lagugu soo dejiyey (Quraanka) iyo waxa lagu soo Dejiyey kuwii

187. 3/Cali-Cimraan, 32
188. 8/Anfaal, 20

kaa horreeyay (Kutubta)? In kastoo la faray inay beeniyaan oo ku kufriyaan, haddana waxay rabaan in dhaaquutka ku xukuntamaan. Shaydaanku wuxuu rabaa inuu Baadiyeeyo Baadi Fog (oo ay adagtahay in xaqa lagu soo noqdo)."[189]

**Alla (swt) wuxuu ka yiri sidan soo socota kuwa aan u xukun tageyn Rasuulka (scw) arrin la isku khilaafo ama aan ku qanacsaneyn xukunka Nebiga:**

""Maya! Rabbigaaga baan ku dhaartaye inayna rumayn haddaanay kaa dhiganin garsoore wixii khilaaf ah oo dhexdooda ah, oo aanay u hoggaansamin go'aankaaga iyagoo dhib ka dareemin."[190]

**Alla (swt) wuxuu marka hore xusay inay waajib tahay in loo hoggaansamo kitaabka uu soo dejiyey, kaddibna wuxuu ku yiri kuwii aan ku xukumin:**



"Waxaana kugu Soo Dejiyey Kitaabka xaqa isagoo rumayn wixii ka horreeyey oo Kitaab ah. Isagoo marag iyo ilaaliye u ah, ee ku kala xukun dhexdooda wuxuu soo dejiyey Alla hana raacin hawadooda waxa kuu Yimid oo Xaq ah, Mid kasta oo idinka mid ah (ummah) sharci iyo jid baan u dejinay. Hadduu Alla idmo wuxuu idinka yeeli lahaa ummad keliya (sharcigeed iyo jidkoodu isku mid ah), Laakiin si uu idiin imtixaamo waxa uu idin siiyey (Wuxuu kala dhigay sharciga iyo jidkiinna) ee u tartama khayrka, Xagga Alla yey Noqoshadiinu tahay dhammaantiin wuxuuna idiinka Warrami waxaad isku khilaafteen."[191]

189. 4/Nisa, 60
190. 4/Nisa, 65
191. 5/Maaidah, 48

Alla (swt) wuxuu ka yiri sidan soo socota kuwa Ummaddan ka mid ah ee ka ballan qaaday inay isaga iyo Rasulkiisa (scw) addeeci doonaan, balse aan ballankii oofin:

"Waxay dhaheen waan rumaynay oo addeecnay Alla iyo Rasuulka. Markaasaa waxaa Jeedsada Kooxo ka Mid ah Intaas kaddib, Kuwaasi ma ah Mu'miniin."[192]

Haddii loo fiirsado wuxuu Alla (swt) yiri "Waan rumaynay oo addeecnay". Taas dabadeed wuxuu diiday kuwii addeecidda ka leexday iimaankoodu kaddib. Guud ahaan quraanka, iimaan la'aanta waxaa lagu muujiyay falka ah "beenida", sidoo kale camal la'aantana waxaa lagu muujiyay falka ah "ka jeedsashada". Aayaddan waxa uu Alla (swt) ku xusay iimaanka iyo addeecidda kaddib ka jeedsashada. Tani waxay daliil u tahay in dadka iimaankooda la diiday ay ka jeesteen addeecidda, yacnii camalka. Aayad kale waxa uu Alla (swt) ku yiri, "Ma uusan Rumaynin ,mana uu tukan. Laakiin wuu Beeniyay wuuna Jeedsaday."



Aayaddu waxay sheegtay in lagu beeniyo beddelkeeda oo aan la xaqiijinin, lagana jeedsado salaadda oo aan la tukan. Taasina waxay daliil u tahay sharraxaadda aayadda aan kor kusoo xusnay. Dadka iimaankooda laga diiday suuradda An-Nuur; Rumaysadkooda looma diidin inay ka leexdeen iimaanka, laakiin waxaa loo diiday addeecidda. Sababtoo ah iimaanku waa ficil. Waa xaqiijinta rumaynta qalbiga iyo xubnaha. Beenta ugu foosha xun ee ay taariikhdu marqaati ka tahay waa

192. 24/Nuur, 47

bidcada sheegaysa in iimaanku uun yahay xaqiijinta, laakiinsee camalkana muhiiimad siineyn.

Rasuulku (scw) waxa uu ku fasiray iimaanka sidatan:

Waxaa laga weriyey Ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli nqodee) inuu yiri:

"Rasuulku (scw) waxa uu weydiiyey, 'ma garanaysaan waxa uu yahay Rumeynta Allaha keliya?

Waxay yiraahdeen Alla iyo Rasuulkiisa ayaa og.

Rasuulku (scw) waxuu yiri: 'In laga marag furo inaan Alla mooyee ilaah kale jirin, Maxamadna uu yahay rasuulkii Alla, salaadda la tukado, oo sakada la bixiyo, oo la soomo, oo bililiqada la siiyo shan meelood meel khasnada dawladda …' "[193]



Rasuulku (scw) markuu dadka barayay iimaanka, wuxuu ku micneeyay camalka. Taasina waxay ku tusinaysaa inaanu iimaanku ahayn in kelime Tawxiidka la yiraahdo oo keliya, balse ay la socoto camalka wanaagsan.

"Waxa loola jeedo inay dadka anfaceyso "Laa'ilaaha illallah" waa: in qofka ay gayso jannada oo ka ilaalinayso in lagu xukumo cadaab lagu waarayo.

Marka kuwa jannada ku galay iimaankooda laguna soo dhaweeyo camalkii ay faleen, waxaa loo sheegaa in sababta jannada keenay ay tahay camalkoodii wanaagsanaa ee waafaqsan Kelime Tawxiidka:

193. Bukhari, 53; Muslim, 17

"... waxaana loogu Dhawaaqi doona Tani waa Jannadii Laydin Dhaxalsiiyey Camalkiinna Dartiis."[194]

"Ee ah kuwa ay oofsato Malaa'igtu iyagoo Fiican (Kuna dhihi) Nabadgalyo korkiina ha ahaato ee Ku gala jannada Waxaad camal fali Jirteen Dartiis."[195]

"Way ku faraxsan yihiin (Nimcada) Rabbigood siiyey. Rabbigood waa ka dhawray cadaabka naarta. "Cuna oo cabba idinkoo faraxsan (shifaysan) waxaad camal falayseen dartiis.' "[196]

Tani waa weedha soo dhawaynta ah ee uu mu'minku ku maqli doono albaabka jannada. Waxaynu wada ognahay waxa meeshaas keenay inay ahayd "Laa'ilaaha illallah", hase yeeshee waxa loogu bishaareynaya camalkii uu falay. Haddaba, waa maxay sababtu? Maxaa yeelay waxa ugu adag ee kelime Tawxiidka ayaa ah in lagu camal falo oo logu noolaado nolol waafaqsan. Way fududahay in la rumaysto oo lagu dhawaaqo waxaad aaminsan tahay, laakiinse Ku-dhaqanka waxa aad aaminsantahay waxay la micno tahay sida xidhashada shaadh dab ah oo kale. Taasina waa inay noqotaa sababtaas, Alla (swt) ayaa og midda ugu saxsan, waxaa lagu soo dhaweynayaa iridda jannada camalkiisa.



194. 7/Acraaf, 43
195. 16/Naxl, 32
196. 52/Dhuur, 18-19

## VII. In lagu dhinto kelmeddaani (İyadoo lagu sugan yahay)

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ اٰمَنُوا اتَّقُوا اللّٰهَ حَقَّ تُقَاتِهِ وَلاَ تَمُوتُنَّ اِلَّا وَاَنْتُمْ مُسْلِمُونَ

"Kuwa xaqa rumeeyow! Alla si xaq ah ugu dhawrsada! Hana dhimanina idinkoon Muslim ahayn (Addoomo ka taga Shirkiga oo Alla ula noqda Tawxiid)."[197]

Waxa laga soo weriyey Cabdullaahi Binu Mascuud (Allaha ka raalli noqdee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

مَنْ مَاتَ يُشْرِكُ بِاللّٰهِ شَيْئًا دَخَلَ النَّارَ

وَقُلْتُ أَنَا: وَمَنْ مَاتَ لَا يُشْرِكُ بِاللّٰهِ شَيْئًا دَخَلَ الْجَنَّةَ



"Qofkii dhinta isagoo Alla wax ugu Shariik yeela, wuxuu gali doona Naarta.'

(Cabdullaahi wuxuu yiri:) Waxaanan leeyahay: Qofkii dhinta isagoon Alla wax la wadaajinin wuxuu gelayaa jannada."[198]

Kuma filna in kelime Tawxiidka la yiraahdo, oo lagu dhaqmo shuruudaheeda oo keliya, hase yeeshee Si looga faa'iidaysto waxaa lagama maarmaan ah in la ilaaliyo shuruudaheeda oo lagu dhinto. Tani waxay u baahan tahay feejignaan iyo halgan nolosha oo dhan

197. 3/Cali-Cimraan, 102
198. Bukhaari, 1238; Muslim, 92

ah. Maxaa yeelay, shayaadiinta insiga iyo jinnigu waxay maalin iyo habeenba dabinnada u dhigayaan muwaaxidiinta, waxayna la dagaallamaan muwaaxidiinta ilaa ay ka noqdaan diintooda:

"Kuwii tabarta yaraa (raaciyaddii) waxay ku dhahayaan kuwii iskibriyay (Madaxdii) saas ma aha ee waxaa hooshiinu ahayd inaad habeen iyo maalin wax dhagartaan, (sababtoo ah) waxaad na farayseen inaan Alla ka gaalowno una yeelno shariikyo, Waxay qarsadeen qoomamo markay arkeen cadaabka, Waxaana yeelnay kuwii gaaloobay luquntooda Biro Naar ah. Miyaa laga abaalmarinin gaaladu waxay camal faleen mooyee?"[199]

"… kama tagaan gaalada inay idinla dagaallamaan ilaa ay idinka celinayaan diintiina hadday karaan, ruuxii ka ridooba Diintiisa oo dhinta isagoo Gaal ah kuwaasi waa kuwa buray camalkoodu adduun iyo aakhiraba, kuwaasina waa Naarta Ehelkeeda, wayna kuwaari dhexdeeda."[200]



Si loo ilaaliyo kelime Tawxiidka waxaa lagama maarmaan ah in si miyir leh loo fahmo micnaheeda iyo shuruudaheeda, iyo lagana fogaado waxyaabaha burinaya iyada.

Micnaheeda iyo mid kasta oo shuruudaheeda, ayaa ka mid ah tiirarka aasaasiga ah ee diinta Islaamka.

Waxaa lagama maarmaan ah in lagu sii sugnaado Rumeysadka"Laailaaha" neefta ugu dambeysa. Waxaa lama huraan ah in la inkiro, oo laga fogaado Dhawaaqi-

199. 34/Saba, 33
200. 2/Baqarah, 217

inta la caabudo, iyo sidoo kale kuwa u addeega iyaga iyo cibaadadooda kala duwan.

Waxaa lagama maarmaan ah in lagu sugnaado Rumeysadka "illallah", taas oo caddaynaysa ilaahnimada Alla oo keliya. Waxaa lagama maarmaan ah in nolol iyo geeriba, iyo dhammaan cibaadada Alla (swt) loo khaalis yeelo, oo aan waxba lala wadaajin.

Waxaa lagama maarmaan ah in si yaqiinsan loo rumeeyo micnaha kelime Tawxiidka ay xambaarsan tahay, oo lagu sugnaado caqiidadaas, iyadoo aan la shakin ilaa neefta u dambaysa.

Waxaa lagama maarmaan ah in kelmeddaan la yiraahdo ilaa neefta ugu dambeysa, iyadoo aan laga leexan ikhlaaska iyo runta, oo la ilaalinayo daacadnimada.



Waxa lagama huraan ah inaan dhinaca saxsan aan doorano ilaa neefteena ugu dambeysa; Waxaa lama huraan ah in la garab istaago Alla (swt), Rasuulkiisa (scw) iyo Mu'miniinta, sidoo kale in laga bari ahaado Dhawaaqiinta, kuwaas oo Alla la dagaallama, iyo in laga bari ahaado mushrikiinta u adeegta dhawaaqiinta. Waxa lama huraan ah in laga bari ahaado dhammaan dadka gaalada ah ee ku dheggan diin aan Islaamka ahayn.

Waxaa lagama maarmaan ah in la ogaado acmaasha ay na farayso kelime tawxiidka ee aynu ku niraahno cilmi iyo yaqiin, iyo in Alla (swt) lagu caabudo camal wanaagsan ilaa neefta ugu danbeysa, sidoo kale waxaa laga marmaan ah in la addeeco Alla iyo Rasuulkiisa (scw).

## Maxaa loo baahan yahay in la sameeyo si loogu sugnaado Tawxiidka?

Waxaa lagama maarmaan ah in loo gargaaro diinta Alla (swt):

Qofka fahma micnaha iyo shuruudaha kelime Tawxiidka, sidoo kale wuxuu fahmayaa canaasiirta burinayso. Qofka isku daya siduu u ilaashan lahaa tawxiidkiisa, isagoo kaalmeysanaya Alla, qofkaasi waxaa ilaalinaya Alla, wuxuuna ku hanuunin jidka ugu toosan. Sababtoo ah dadaalka lagu ilaalinayo tawxiidka iyo inaan iimaanka lagu wasakheynin dulun, waa dadaalka ugu sharafta badan, sidoo kalena waa mid ka mid ah heerarka ugu sarreeya ee addoonimada. Alla (swt) addoomadiisa sidan oo kale ah, wuxuu u ballan qaaday inuu ilaalin doono, kuna hanuunin doono jidka ugu toosan, oona amni siin doono:



"Waxaan dhab ahaan tusi doonaa waddooyinkeena (ugu saxsan) kuwa ku jihaada jidkeena. Shaki la'aan, Alla wuxuu la jiraa kuwa wanaagga fala/kuwa isku daya inay u caabudaan sida ugu wanaagsan."[201]

"Kuwa Xaqa Rumeeyey oon ku Dheehin Iimaankooda Dulmi (Gaalnimo) Waxaana u sugnaaday ammaan (ka dhan ah ciqaabta Alla). Waana kuwa hanuunsan."[202]

Intaa waxaa sii dheer, waxaa jirta sabab kale oo ah habka ugu waxtarka badan ee lagu ilaaliyo tawxiidka. Taas oo ah in la kaalmeeyo diinta Alla (swt), iyo in loo

201. 29/Cankabuut, 69
202. 6/Ancaam, 82

halgamo sidii adduunka loogu fidin lahaa dacwada tawxiidka, yacnii in loo halgamo Iclaa-i Kelimetullah:

"Kuwa xaqa rumeeyow haddaad u gargaartaan Alla (Diintiisa) isna wuu idiin gargaari, Cagihiinana wuu sugi."[203]

Taasi waa yabooh Rabbaani ah oo aan shaki ku jirin xaqiiqdeeda iyo dhicideeda. Qof kastoo mu'min ah waxa uu ballankaas qaybtiisa ka helayaa marka loo eego sida daacadda ah ee uu ugu gargaarayo diinta Alla (swt). Waxa waajibkeena ah waa inaan dhegaysanno taladaan uu Rasuulku (scw) u jeediyay Ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli noqodee):

Waxa laga soo weriyey Ibnu Cabbaas (Allaha ka raalli noqodee) inuu yiri, wuxuu Rasuulku (scw) yiri:

"... ilaali (ka dhawrso) Alla (Awaamiirtiisa iyo Xaraantiisa) si uu Alla kuu ilaaliyo. Ilaali (ka Dhawrso) Alla (Awaamiirtiisa iyo Xaraantiisa) si aad u heshid (gargaarkiisa) dhinac kasta oo aad u jeedsato. Marka aad waydiisaneyso Alla ka warso. Marka aad gargaar weydiisaneyso, Alla gargaar weydiiso ..."[204]

Kuwa ilaaliya diinta Alla waxaa iyagana ilaalinaya Alla (swt). Kuwa ilaaliya ee u halgama Tawxiidka dartiisa, sidoo kale Ku taageerta arrintaas naftooda iyo maalkooda, iyo afkooda ee ka noqon jidkaas ... waxay ka heli Alla iyo gargaarkiisa dhinac kasta oo ay u jeedsadaan.

Qofku mar hadduu Alla (swt) ilaaliyo, ma jirto wax dhib ah oo diintiisa saameyn karta, Xitaa hadday adduunka



203. 47/Muxammad, 7
204. Tirmiidi, 2516

oo dhan isu yimaadaan si ay u dhumiyaan ugana jeediyaan diintiisa, waxay u kordhinayaan uun iimaankiisa iyo is dhiibidiisa:

"Cid Alla hanuuniyeyna ma jiro wax dhumin kara, Allana miyuusan ahayn adkaade aarsada?"[205]

Waa inaan kordhinaa siyaabaha loogu gargaarayo dacwada Tawxiidka, oo aan ka shaqayno ilaa aan ka mutaysano ilaalinta Alla. Gargaar kasta oo aan u fidinno dacwadan muqadaska ah; Waxay inoo soo dhawaynaysaa hal tallaabo oo ilaalintii Alla, sidoo kalena waxay sii xoojinaysaa xiriika aynu la leenahay Alla (swt).

Waxaa lagama maarmaan ah in la cuskado Alla (swt):



"... Ruuxii cuskada Alla waxaa hubaal ah in lagu hanuunin jidka toosan."[206]

"Kuwa Alla rumeeyey ee xagiisa qabsadana wuxuu ku dari doonaa naxariistiisa iyo fadligiisa, wuxuuna ku hanuunin jidka toosan (ee ay Alla ku gaari doonaan)."[207]

Dacwada Tawxiidku waa mid adag, xanuun badan, oo dhib badan. Waxaa jira dabinno aan la soo koobi karin oo ay dhigaan shayaadiinta insiga iyo jinnigu. Si loogu sugnaado jidkaas dheer ee khatarta ah, waxaa lagama maarmaan ah in si adag ah loo qabsado jidka. Shaki la'aan, meesha la qabsan karo ee lagu xajin karo waa Alla.

205. 39/Zumar, 37
206. 3/Cali-Cimraan, 101
207. 4/Nisa, 175

In la cuskado Alla (swt) waa in isaga lagaga xidhnaado xagga qalbiga. Waxay la micno tahay inaan ogaano baahida aan isaga u qabno. Waa dareenka ah inaan halaagsami doono gargaarkiisa iyo hanuunkiisa la'aanteed. Ducooyinkii inta badan ee nebiga (scw) ku celcelin jiray ayaa ah, "Il bidhiqsi xitaa ha igu keli yeelin nafteyda". Waa in dareen sidaas oo kale la qabaa.

Miyirkan; Waxa uu carrabka uga muuqdaa duco ahaan, qalbigana talo saarasho ahaan, iyo camalkana toosanaan ahaan.

Noloshii Rasuulka (scw) oo dhan, waxaa ka buuxa tusaalayaal dadaalladan la doonayo in lagu sii adkeeyo. Sow tan maaha ducada uu inta badan ku celcelin jiray?



يَا مُقَلِّبَ الْقُلُوبِ، ثَبِّتْ قَلْبِى عَلَى دِينِكَ

"Kan quluubta rogaya! "Qalbigayga ku sug diintaada."[208]

Bal u fiirsada adkaarta uu Nebiga (scw) akhrin jiray ka hor qorrax soo baxa iyo qorrax dhaca! Dhammaantood waa baryo qalbiga ka ah, magan-gal dhab ah iyo dadaalka ah cuskashada Alla (swt) uun.

**Waxaan kusoo gabagabeynaynaa Ducada ah "Mahad waxaa iska leh Allaha barbaariya Caalamka"...**

208. Tirmiidi, 2140

## SHURUUDAHA LAAILAAHAILLALLAH

- In la yiraahdo iyadoo cilmi loo leeyahay
- In Loo Yiraahdo Si Daacadnimo (ikhlaasnimo) Iyo Run ah
- In La Yiraahdo Iyadoo La Yaqiinsan Yahay Oo Aan Shaki iyo Shubhaad ku jirin
- In Lagu Gaaloobo Dhaaquut
  - **Waa maxay Dhaaquut?**
    - Wax kasta oo Alla ka sokow la caabudo
    - Wax kasta oo laga dhigtay Rabbi iyo Ilaah iyadoo la siiyey sifaadka Alla
    - Waa sharciyada aan kuwa Alla ahayn iyo kuwa sameeya Shar-ciyadaas
    - Wax kasta oo naga jiidayaa iftiinka waxyiga, oo nagu riixayaa mugdiyada kufriga
    - Waddooyinka iyo Ciidanka Aan jidka Alla ku Halgamin
  - **Sidee loogu Gaaloobaa Dhaaquut?**
    - Iyadoo Dhaaquutka Lagula halgamayo ficil iyo qowlba
      - In laga bari ahaado kuwa Caabuda Dhaaquut
      - Ka fogaanshaha Dhaaquut
      - In la Takfiireysiyo Dhaaquut iyo Addoomadiisa
      - In Dhaaquut iyo Addoomadiisa loo qabo nacayb iyo cadaawad weligeed ah
- In La Jeclaado Ehelka kelmeddaan iyo In La Necbanaado Cadawgeeda
- Ku-dhaqanka Shuruudaha Kelmeddaan
- Ku Dhimashada Kelmeddaani (İyadoo lagu sugan yahay)

# TIXRAACA


• Jami'u'l Beyan fî Te'wîli'l Qur'ân/Tefsîru't Taberî, Ibn Jarîr Et-Taberî, Muessesetur'r Risale, 24 volumes, 1st edition, M 2000

• Al-Bidaya wa'n Nihaya, Ibn Kathir, Daru Hajr, 21 volumes, 1st Edition, M 2003

• El-Mufredât fî Ğarîbi'l Qur'ân, Râgıp El-İsfahânî, Dâru'l Qalem, 1st Edition, H 1412

• Al-Mustalahâtu'l Erbe'a fi'l Qur'an, Abu'l A'ala Al-Mawduudi, Dâru'l -Qalem, H 1391

• Fi Zilali'l Qur'an, Seyyid Qutb, Daru'sh Shuruk, 6 volumes, 17th edition, H 1412

• I'lâmu'l Muvakkiîn, İbnu Kayyim El-Jawziyya, Dâru İbni'l Jawzi, 7 volumes, 1st Edition, M 1423

• Lisânu'l Arab, İbnu'l Manzur, Dâru Sâdr, 15 volumes, 3rd Edition, H 1414

• Mu'jemu Mekâyîsi'l Luga, İbnu'l Fâris, Dâru'l-Fikr, 6 volumes, M 1979

• Musnedu'l Imam Ahmed ibni Hanbel, Ahmed ibni Hanbel, Muessesetu'r Risale, 45 volumes, 1st Edition, M 2001

• Sahih al-Bukhari, Muhammad ibn Ismail al-Bukhari, Muassesetu'r Risale, 3rd Edition, H 1441

• Sahîhu Muslim, Muslim ibn al-Hajjaj, Muessesetu'r Risale, 2nd Edition, H 1441

• Siratu ibni Hisham, Abdulmelik ibni Hisham, Shirketu Mektebeti ve Matbaati Mustafâ El-Bâbî El-Halebî ve Evlâdihi, 2 Volumes, H 1375

• Sunenu Abî Dawoud, Abû Dawoud Es-Sijistani, Muessesetu'r Risâle, 1st Edition, H 1440

• Sunenu ibni Majah, Ibn Majah, Muessesetu'r Risale, 1st Edition, H 1438

• Sunenu't Tirmidhi, Muhammad ibni Îsa At-Tirmidhi, Muessesetu'r Risâle, 1st Edition, H 1438

• Tafsir al-Quran al-Azim, Ibn Kathir, Darul Kutubi al-Ilmiyah, 9 volumes, H 1419

• Usûlu'l Fıkhi'l İslâmî, Wahbah Az-Zuhaylî, Dâru'l Fikr, 1st Edition, H 1406

• Zadu'l Mesir fî Ilmi't Tefsir, Ibnu'l Jawzi, Dâru'l Kitâbi'l Arabî, 4 volumes, 1st edition, H 1422



**Dhammaan nambaraynta axaadiithta waxaa laga sameeyay kutubta soo socota:**

• Jami'u'l Usûli't Tis'a mine's Sunneti'l Mutahhara, Ahmed Salih Ash-Shami, Al-Maktabul Islami, 14 Volumes, 1st Edition, M 2021

• Zavâid ibn Huzeyme and ibn Hibbân ve'l Mustadrek Ala Kutubi't Tis'a, Salih ibn Ahmed Ash-Shami, El-Maktebu'l Islamî, 3 Volumes, 1st Edition, M 2012

• Zavâidu's Sunen'il Kubrâ li'l Beyhaki, Ahmed Salih Ash-Shami, El-Maktebu'l Islamî, 3 Volumes, 1st Edition, M 2010

UJEEDADA ABUURKA

# LAA'ILAAHAILLALLAH

"Laa'ilaaha illallah" waa dacwada guud ee rususha oo dhan".

Qoomamka u kala qaybisay Muslimiin iyo Gaalo...

"Laa'ilaaha illallah" waa midda go'aamisa aakhirka dadku,
halka ay gaari doonaan adduun iyo aakhiroba...

Tani waa kelmedda bogga taariikhda ku jirta ee aabbe iyo wiilkiisa iska hor keentay...

Tani waa kelmeddii Nebi Nuux (cs) ku qaaday doontii badbaadada
oo wiilkiisana ku xukuntay mawjadaha cadaabka sita...

Tani waa kelmeddii Nebi Luud (cs) ka dhigtay mid ka mid ah kuwii badbaaday
oo ku soo dejisay dhagaxyo samada ka yimid madaxa xaaskiisa...

Tani waa kelmeddii Ibraahiim (cs) kasoo saartay geesinnimo uu ku yiraahdo
Aabihii iyo Qoomkiisii: "İdinka iyo Aabayaashiin waxaad tihiin kuwa baadi ku sugan..."

Tani waa kelmedda reer binu Israa'iil ka badbaadisay Dhawaaqiintii
waqtigaa oo afartan sannadood cidlada ku dhex wareegaysay...

Kelmeddaani waa sababta dhammaan
Dhawaaqiinta ay u dhibaatayn jireen Nebiyadooda...

In kastoo uu ahaa qofka loogu kalsoonida badnaa ee waagaas haddana
kelmeddaan ayaa ka dhigtay Rasuulku inuu ku suntan yahay
"abwaan, beenaale, waalan, kaahin iyo sixiroole"...

Isagoo baayacmushtar iska ahaa, ayuu Rasuulku (scw) dadka ku yiri,
"waxaa la ii soo diray si ay bani'aadamka oo dhan u caabudaan Alla,
oo aysan u shariik yeelin". Tani waa kelmedda ka dhigtay inuu sidaasi yiraahdo...